
USTAAD CABDULQAADIR SALAD DHOORRE

# SOOMAALIYA
iyo
## TAARIIKHDEEDII HORE



Con profonda stima
Dorre




# TUSMADA KITAABKA

FAALADA SAWIRKA BOGGA HORE EE GARBADKA KITAABKA . . . . . . 04

HORDHAC . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 05

ERAYBIXIN . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 09

ERAYADA GUMADAN (ABBREVIATED WORDS) . . . . . . . . . . . . 10

1. AB-AWALADII AADMIGA . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 11

2. HAYAANKA KOOWAAD EE AB-AWALADA SOOMAALIYEED . . . . 17

3. XIRIIRKA BEECMUSHTAR EE DHULKA BOONT IYO MASAARIDA . . . 27

4. XIXIIRKA BOONT IYO XADAARADIHII KALE EE ADDUUNKA . . . . . 38

5. DIIMIHII HORE IYO QAABDHISKA BULSHADA SOOMAALIYEED . . . 48

6. XIRIIRKA SOOMAALIDA IYO MUSLIMIINTA . . . . . . . . . . . 62

7. CADOWGA KOOWAAD EE SOOMAALINIMADA . . . . . . . . . . 73

8. HALGANKII AXMED IBRAAHIM GUREY . . . . . . . . . . . . . 81

ERAYO-RAACA QORAALKA (AFTERWORD) . . . . . . . . . . . . . 92

TIXRAAC . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 95

## FAALADA SAWIRKA BOGGA HORE EE GARBADKA KITAABKA

Sawirkaan wuxuu muuqaal ku muujinayaa waxyaalaha uu ka hadlayo kitaabkaan;
Koobaabyada ku yaalo bartanka xidigta waxay tilmaamayaan bilawga iyo korriinka dadka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, iyagoo ka soo bilaabatay noloshii badaa'iga aheed ee ku salaysnayd qadhaabsiga iyo ugaaratada una gudubtay nolosha xoolodhaqatada iyo beerayda, ka dibna ku fiday shanta gobol ee xidigta Soomaalida tilmaamayso.
Shantaas gobol waxaa muujinayaa xuruufta kala ah **G** (Galbeed ama Gabballand), **W** (Waqooyi), **K** (Koofur), **N** (NFD, waa qaybta Keenya) iyo **J** (Jibuuti). Xuruufahaan waxay garbaha uga yaalaan shan-dhinacle (pentigon) ay cirifyadiisu ku qoran yihiin xuruufaha ah **B, O, O, N, T**, oo haddii lays raaciyo samaynaya erayga **BOONT** oo ah magacii hore ee waqooyiga Soomaaliyeed loo yaqiin.
Halkii dadkii bidaa'iga ahaa ay ka maamuli jireen **hargaanti** sida ku cad koobaabada korriinka badaa'iga ah, Soomaalida tarantay oo ku fidday shanta gobol waxay lahaayeen maamul kaas ka heer sareeya oo ay hoggaanka u hayaan rag **Islaw**, ama **Wabar**, ama **Boqor** ama **Garaad** ama **Ugaas** ah. Maamuladaan oo midba iskiis u madaxbanaanaa waxay isku xirmeen markay dadku Islaameen sida ku cad xuruufta **I, S, L, A, M** ee ku qoran gudaha xagalada xidigta shanta gees leh, israacinta xuruufahaasna waxay keenayaan erayga **ISLAM**.
Islaamka wuxuu mideeyay maamuladii kala madaxbanaanaa laakiin dadkooda uu isku afka, isku dhaqanka iyo isku dhalashada ahaa, waxaana halkaas ka dhashay **SOOMAALIYA**, sida ku cad isugaynta xuruufaha **SO, OM, AA, LI, YA** ee ku qoran cirifyada xidigta Soomaaliyeed.
Afarxagalka fallaaraha leh wuxuu muujinyaa sida Soomaalinimada ugu xiran tahay dhawritaanka dhammaan waxa afarxagalkaas guduhiisa ku jira, mid ka mid ah haddii la waayana qatar galayso aragtida Soomaalinimo iyo Islaamnimo ee dadka Soomaaliyeed isku xirta.
Sida ku cad erayada ku qoran cirifyada afargeeslaha, jirista iyo madaxbanaanida Ummadda Soomaaliyeed waxay ku xiran tahay sida **DADKA, DIINTA, DADAALKA** iyo **DULQAADKA**. Maamul kasta oo **DADKA** iyo **DIINTA** isku xiro, **DADAALKIISAASNA DUQAAD** u yeesho, ayaa ah kan keeni karo horumar dhaqan-dhaqaale iyo mid bulsho sida ku cad koobaabyada waa weyn ee isku keenay taariikhda, dhaqanka iyo diinta qaybaha kala duwan ee bulsho weynta Soomaaliyeed.



## HORDHAC

*Waxaa mahad leh Allaha dhulka uumay, kuna beeray dad isku ab ah hadana kala midab iyo af duwan. Waxaa mahad leh Allaha soo diray rusullo dadkaas ku mideeya Islaamnimada, una haga halka adduunkooda iyo aakhiradooda u wacan. Waxaan naxariista Alle iyo nabad u baryayaa, Kii dadka iyo rusulada ugu fadli badanaa, Sayiddinaa Muxammed Bin Cabdullaahi Bin Cadulmudalib.*
*Waxaan raali ahaansho Alle u codsanayaa Asxaabtii Nabiga (SCW) oo la kala reebin* Intaa ka dib:
Waxaan buuggaan, si kooban ugaga hadlay taariikhda daboolan ee ummadda Soomaaliyeed, laga bilaabo waayihii ugu horeeyay ay soo degeen Geeska Afrika illaa ay ka dhalatay ummad ku midowda Islaamnimada iyo Soomaalinimada. Waa qoraal canfacayo aqoonyahan (academic) iyo aqoon-aqool (intellect), wadaad iyo diin-aqool, siyaasi iyo garaadyahan kasta oo raba inuu fahmo ama baaris cilmi ah ku sameeyo taariikhda dadka Soomaaliyeed. Waa buug dhallaanka iyo dhalinyarada Soomaaliyeed fikrad cilmiyaysan ka siinayo halka ay ka yimaadeen, si ay u fahmaan halka ay u socdaan oo waatii hore loo yiri:
*"Maanta waxa jira waa sii wadka wax hore u jiray, iyo gogoldhigga waxa soo socda"*. Sidaas darteed, nimaan ogeyn wixii Soomaali hore uga jiray way adag tahay inuu maanta Soomaali wax u qabto, mustaqbalka wax uu u qabto iskaba daayee oo waatii hore loo yiri:*"Tagto hilmaame, tubtii abkii ka tagow ku talaxyeeyaa"*.
Si tacab khasaar uusan u dhicin, isla markaasna looga digtoonaado waxyaalihii sodonkii sano oo xorta la ahaa fashiliyay dhalashada maamul Soomaali ah oo loo midaysan yahay, ayaa qoraha buugga ku qasabtay inuu muddo sideed sano ah uu urursho qoraalada iyo aragtiyada tilmaamaya taariikhda dadyowga ku nool Geeska Afrika. Waxaa cilmibaaristaa uga soo baxay fac dheerida taariikhda dadka Soomaaliyeed, halka dadkaas ay ka yimaadeen, sida ay Islaamka ka hor u dhaqmi jireen iyo waxa u diiday inay dawlad noqdaan, balse wali la' yihiin! Qoraha wuxuu isku dayay inuu dhaqankii hore ee Soomaalida ka soo dhiraandhiriyo siday u samaysmeen unugyada bulshada Soomaaliyeed iyo sababta Soomaalida uga tagi la' dahay qabiilka. Wuxuu ogaaday in asalka iyo qaabdhiska qabiilada Soomaaliyeed uu la xiriiro diimihii Soomaalida haysatay Islaamka ka hor, diimahaas oo sal u ahaan aaminaadda waxa la yiraahdo *"ayaanka"* ama *"abterka"* sida aan dib uga soo sheegidoonno. Waxaa la muujiyay in dareendiqadka (psychology) qof kasta oo Soomaali ah, uu si toos ah ama si dadban ugu xiran yahay wax yaalihii Soomaalida aaminsaneyd Islaamka ka hor; si qabiilka loola dagaalana loo baahan yahay fahan caqiidooyinka

Islaamka ka hor Soomaalida aaminsanayd iyo in caqiidadaas cawaaniga ah lagu bedelo caqiidada Islaamka. Maadaama buuggaan uu yahay buug taariikhda kaliya ka hadlaya, si dheer loogama hadlin *"abterka"* iyo sida uu u saameeyo saykoolojiga ama dareendinqadka qofka Soomaaliga. Faalo gaaban oo arrintaas la xiriirtase ayaa laga heli karaa qaybta *"Erayo-raac"* ee buugga. Qaybtaan waxaa kaloo ku qoran aragti gogoldhig u noqon karto dib u dhiska dawlad Soomaali ah, oo Soomaalidaysan, oo Soomaali-islaamaysan, Soomaali idilna ka raali noqon karto.

Buuggaan waa kii ugu horeeyay oo taariikh Soomaali oo noocaan ah lagu lafo-guro sidaas darteed marnaba akhbaartiisa oo idil ma noqon karto mid wada hufan; waase waa qoraal bilaw ah oo anfaci karo ciddii rabto inay taariikhdii hore ee Soomaalida iyo dareendinqadkooda wax ka fahanto ama wax ka qorto.

Waxaan buuggaan u huray dhammaan halyeeyadii Soomaaliyeed ee u dagaalay, lagu takooray aakhirkiina u dhintay mideynta iyo sharafta Soomaaliyeed. Buuggaan waxaan u huray dadkii ku dhintay, ku tabaaloobay, ku barobaxay sabab iyaga si toos ah aysan u keensanin, waxaana leeyahay ha la sabro hana lays cafiyo waayo *"Carrab iyo ilkaba waa is qoomaan"*, *"Walaalana waa kuwii waran ka heshiiya, weelna wax ku wadaaga"*.

Boorin awgeed ayaan si gaar ah qoraalkaan ugu hibaynayaa dhalinyarada, aqoonyahanada iyo culumda Soomaaliyeed, waxaana leeyahay taariikhda ayaa idin xusidoontaa jiifadka aad ka jiifateen danta dadkiina, qaarkiinana gacan ka geestay hoogga maanta lagu jiro. Walaalayaal, waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa calaacalka ka imaanayo caruurta iyo haweenka Soomaaliyeed ayna leeyihiin:

*Calankiyo dhulkeennii*
*Dhawaqa iyo muragada*
*Miyaan dhabanahays iyo*
*Igu beerin mahadhada*
*Malaayiin miyay dhiman*
*Miyay dhuuniqaad iyo*
*Dhurwaayada daldalanoo,*
*Dhunnayee dhankee jiraan*
*Kuwa dhaanka aadoo*
*Aan ku dhaadanayno..*

Jawaabta aan ka celiyay calacalkaas waa:

*Kuwa dhaanka aadoo*
*Lagu dhaadanaaya*
*Waa dibi duguuguman*
*Dibadaha wareegee*
*Danbiga iyo beentana*
*Darbiyada la joogee*



*Daamo-dheel dunaystee*
*Daanka qaad daliigmee*
*Dabafeed ku daal ba'ay.*

*Dahabow duulkaad rabtid*
*Waa durriyo naareed*
*Doqomoo la kala dilay*
*Dacayaysi gaal ogol*
*Diracyada iyo diintana*
*Diidayow docdow ridi.*
*Daango duug ah booboo,*
*Dabo orodka gaalada*
*Duunyo doon ka yeeshee*
*Dullibay, dullibay la diin yihiin.*

Canaantaan xoogga leh, waxay dhalinyarada Soomaaliyeed isaga rogi kartaa in dib u soo ceshadaan sharafta bulshada Soomaaliyeed ay ku dhex lahaayeen, kana xoroobaan gacanta qabiilquutayaasha iyo siyaasiin ku sheegga dalka iyo dadka baaba'shay. Sida ugu wanaagsan ee raggaas uga gacan sarreyn kartaan waa idinkoo *"Afar Qaaf, Qaaf kula dagaala"*. Afarta "Q" waa Qalin iyo Qur'aan, Qiyaas iyo Qunyar-socod. Qaafka kala dagaalayana waa Qabiil.

Waxaan wadaadada iyo aqoonyahanka si gaar ah ugu boorinayaan inay bartaan dadkooda iyo dalkooda, markaas kaliya ayay noqon karaan diin-aqool ama aqoon-aqool wax kala aqooli kara. Barashada iyo baarista taariikhda ma aha danbi, haddii qasadka hawshaa loo samaynayo ay tahay *"wanaag"* raadin. Xadiith Saxiix ah oo laga soo xigtay Samaak Bin Xarbi ayuu ku sheegay in Jaabir Bin Samrah yiri:

*"Waxaan meel la fadhiistay Nabiga (SCW) in ka badan boqol jeer, asxaabta Nabigana (SCW) ay halkaas ku gabyayaan kuna sheegayaan waxyaalo dhacay Islaamka ka hor (ama waqtigii Jaahiliyada), Nabigana (SCW) wuu iska aamusnaa, waxaana dhici jirtay inuuba uu la dhoolo cadeeyo (ama la qoslo)"*. Xadiithkaan waxaa wariyay At-Tarmidi, Ad-Dayaalisi iyo Axmed.

Cabdullaahi Bin Camru wuxuu isna sheegay in Nabiga (SCW) yiri:

*"Gabayga waa sida hadalka, markuu wanaagsan yahay waa sida hadal wanaagsan, markuu xun yahayna waa sida hadal xun"*. Waxaa wariyay Al-Bukhaari.

Waxaa halkaan nooga cad inuu Nabiga (SCW) ogolaa in taariikhdii hore iyo gabayada la barto haddii markaasi keenaynin fitno iyo dhibaato.

Qoraalkaan waxaan digniin ugu dirayaa, cadowga Soomaaliyeed iyo ciddii is leh dalkaas kala hoobtay, hamsii. Wallee*"Timri lafbaa ku jirtaa"*; *"Rag la riixayna riinbaa ka haraa"*, ee ka digtoonaada. Dadkaasi ha qadariyaan jirista dadka Soomaaliyeed; Soomaalidana ha ka tanaasusho in midnimadeeda ku raadiso hab qatar galin karo ummadaha la dariska ah. Arrintaan danbe

waxaa lagu heli karaa iyadoo qof kasta oo Soomaali ah ee adduunka joogo uu ku dhaqmo siyaasadda *"Afarta Qaaf oo Qaarkood Qarsoon yihiin"*. Qaafyada waa isla kuwii hore.

Fursaddaan waxaan uga faa'idaysanayaa in mahad Alle ka dib, aan u mahad noqo dhammaan dadka aan la koobi karin ee gacanta igu siiyay ururinta iyo talo ka bixinta qoraalkaan siibana Sh. Cabdikariim Abukar Cumar, Sh. Axmed Maxamed Hadaafow, Cabdixakiim Cali Casir, Axmed Garaad, Prof. Ibraahim Nakruuma, Dr. Xasan Salada Dhorre, Drs. Niina Salaada Dhorre iyo Ibraahim Salaad Dhorre.

Waxaan Allaha Idil-Awooda ka codsanayaa inuu qoraalkaan ka dhigo dhagaxdhigga qoraallo muujiya qiimaha iyo qaayaha ay leedahay taariikhda, dhaqanka iyo diinta dadka Soomaaliyeed. Waxaan Allaha Idil-Sarreeya ka baryaayaa inuu Soomaalida ka dhigo kuwo isyaqaan, isa dhisa, isku xirma, isxaq-dhowra, isku naxariista, maamul ay ka wada raali yihiinna samaysta. Waxaan hilmaami karin labadii i dhashay, inta ila dhalatay, kuwii diinta i baray iyo kuwii u dhintay Islaamnimada Ummadda Soomaaliyeed, waxaanna dhammaantood Alla Idil-Naxariista uga baryayaa inuu wada geeyo JANATUL FARDOWSA.

Waxaan arartayda ku soo afjarayaa qayb ka mid ah gabaygii halyay Ismaaciil Mire, uuna ku sheegayo in waxa na haysto ay tahay waxaan innaga isku keenay. Halyey Ismaaciil wuxuu yiri:

- *Cuquubooyinbaa dirirayaa, la isma daareenee*
- *Waatii qaraamigaa derderan, dumarka raaceene*
- *Waatii gabdhihii door ahaa, daba ormeeyeene*
- *Waatii la darandoorriyee, damacba beeleene*
- *Waatii Bashiirkii danqaday, diiqa galiyeene*
- *Bashku wuxuu dalleysanahayee, daanka dhiganaayey*
- *Deembaa uga siyaadiyo inay, derejo waayaane*
- *Dulligiyo laaluush cunkii, dabajin weyn reebye!*

***Xasbuna Allaahu Wa Nicmal Wakiil***
***Qore: Ustaad Cabdulqaadir Salaad Dhoorre***
***(Dr. Dhooraawi)***



## ERAYBIXIN

**Abaahin**= kudid
**Ab-awal** (paleo-ancestor)= waa qofka xaalufay oo aan raad-raac maadi ahaan u huban laga haynin
**Abtere**= Waa eray kale ee loo yaqaan waxa Soomaalida ay tiraah *"ayaan"*.
**Afaf-aqool** (linguistic)= waa qofka aqoon qotodheer u leh asalka iyo qaab dhaladka afka.
**Abaqaal**= talaal.
**Abqo**= Iniino sida kuwa quraca oo ku guda jira labo qalbac oo kolkay engegaan furma.
**Abasax**= hashu markay u baahan tahay awrka.
**Absaxan** (ancestor)= waa qofka xaalufay oo ha yeeshee la hubo jiritaankiisa.
**Ab-suul** (pre-ancestor)= waa qofka xaalufay oo aan raad-raac maadi ahaan u huban laga haynin hase yeeshee dadka aaminsan yihiin inuu jiro.
**Abyan**= yaab.
**Abaydin**= caruurta naaska laga gooyay.
**Eraygumadan**= waa eray la soo gaabiyay, lagana soo qaatay xarafkiisa koowaad kaliya.
**Erayo-raac**= Waa hadal raaca hadalo ka horeeyay, hase yeeshee ka hadli karo mawduucyo kuwii hore aan toos ugu xiriirin.
**Goldhaw** (adoptee)= waa canug aadan dhalin hase yeeshee aad korisid.
**Guur-dibad** (exogamy)= waa guurka nin iyo naag dhalashooda kala fog tahay ay isguursadaan.
**Guur-guri** (endogamy)= waa guurka nin iyo naag dhalashooda isku dhawdahay ay isguursadaan.
**Jaad** (race)= waa eray tilmaama dadka kala cunsurka ah.
**Raad-awal-aqool** (archeology)= waa cilmi lagu baaro lafaha iyo qalabka dadkii hore, si loo ogaado sida uu ahaa araggooda, dhaqankooda iyo qalabkay lahaayeen.ay isguursadaan.
**Xaarufley**= naagta kala daadsan oo korkeeda iyo reerkeeda ka fakarin.
**Xeeragoys**= naagta wax dhaqaalaynteeda xun tahay.
**Xungruf**= (sheekaxariirta) bahal qof jeexii ah oo hadba qofkuu doono codkiisa isu yeeli kara, oo dadka wajiga ka muruxsada, ka diirta, ama ka xangaruufta. Eraygaan waxaa loo isticmaalaa qofka caytinta iyo kuleeti ku dhegga badan.

# ERAYADA GUMADAN (ABBREVIATED WORDS)

**b.**= bogga.

**CS**= Calayhi Salaam. Micnaheedu waa nabad Alle korkiisa ha ahaato, waana weedh la yiraahdo marka la sheego ama la qoro magaca qof nabidaya ka mid ah.

**F.G.** (note)= Fiiro Gaar ah.

**Hj**= Hijriyah.

**ikk** (et al.)= iyo kuwo kale.

**iwkd** (ff)= iyo wixii ka danbeeyo.

**iwm** (ecc.)= iyo wixii la mid ah.

**NCKD**= Nabi Ciise ka dib.



**NCKH**= Nabi Ciise ka hor.

**SCW**= Salalaahu Calayhi Wasalin. Micnaheedu waa nabad Alle iyo naxariis korkiisa ha ahaato, waana weedh la yiraahdo marka la sheego ama la qoro magaca Nabiga (SCW).

**wml** (nd)= waqti ma leh.

# 1

## AB-AWALADII AADMIGA

Dhammaan dadyowga aaminsan Alle waxay xaqiiqsan yihiin inuu Aadmiga ka yimid qof kaliya, qofkaas oo ah AADAN; arrintaanna waxaa ku soo arooray aayado Qur'aan oo tiro badan iyo axaadiithta Rasuulka Alle (SCW). Aayadahaas waxaa ka mid ah aayadda koowaad ee Suuratu An-Nisaa' uu Allaha Idil Sarreeyo ku yiri:
*"Dadow ka dhawrsada Rabbigiina idinka uumay naf kaliya (Nabi Aadan (CS)), kana abuuray haweeneydeeda, dhigayna dhexdooda rag badan iyo haweenba; kana dhawrsada Allaha aad wax weydiisataan iyo qaraabada; Alle waa kan dushiina muraaqabeeya (ilaalinayee)".*
Axaadiithta sheegayso in Aadmiga ka yimid Aadan waxaa ka mid ah xadiith Huudah ka soo xigtay Cawf, isna ka soo xigtay Qusaamah Bin Zuhayr oo sheegay inuu maqalay Al-Ashcari oo leh wuxuu Nabiga (SCW) yiri:
*"Alle wuxuu ka uumay Nabi Aadan (CS) ciid uu ka soo qaaday dhammaan dhulka, ilmihii Nabi Aadan (CS)na waxay noqdeen sidii dhulka: waxaa ka mid ah caddaan, casaan, madow iyo intaa in u dhaxayso, mid faraxsan iyo mid tiiraansan iyo intaa in u dhaxayso, mid xun iyo mid fiican iyo intaa in u dhaxayso".* Waxaa wariyay Axmed, Abuu Daawuud, At-Tirmidi iyo Ibnu Xibbaan; saxiixnimadiisana waxaa qiray At-Tirmidi.
Aadankaa kaliya ayaa laga soo wada faracmay. Si uu ugu xasilo, ayuu Alle ka beeray feer calaanta Nabi Aadan (CS) Abooto Xaawo kana dhigay haweeneydiisa sida ku cad aayadda 189aad ee Suuratu Al-Acraaf oo Allaha Idil-Sarreeya ku yiri: 
*"(Alle) waa kan idinka uumay naf kaliya, kana sameeyay xaggeeda haweeneydeeda si uu ugu dego".*
Waxaa la yiri in Abooto Xaawo 120 goor ayay uur u yeelatay Nabi Aadan (CS), uur kastana Alle siinayay labo mataano oo wiil iyo gabar ah. Uurkii ugu horeeyay waxaa ku dhashay Qaabiil iyo walaashiisa Qaliima; uurkii ku xigayna waxaa ku dhashay Cabul-Mugiith iyo walaashiisa Ummul-Mugiith; halkaasna ayay dadkii ku tarmeen kuna bateen sida ku cad aayadda koowaad ee Suuratu An-Nisaa' oo aan hore ku soo sheeganay. Dadka taariikha u kuur gala waxay sheegeen in Aadan uusan dhiman illaa faraciisu gaareen afar boqol oo kun oo qofood. Waxaan ka ahayn Shayth, caruurta Nabi Aadan (C.S.) intooda kale way dhammaadeen. Sidaas darteed, dadka adduunka maanta jooga waxay dhammaantood ka yimaadeen Shayth (Fiiri kitaabka *"Al-Bidaayah wa An-Nihaayah"*, xir. 1aad bogagga 98aad iyo 100aad). Alle oo na garaysiinayo awoodda tarminta uu leeyahay wuxuu aayadda 20aad ee Suuratu Ar-Ruum ku yiri:
*"Waxaa ka mid ah calaamadihiisa inuu idinka abuuray ciid markaasna noqoteen*

*dad faafa"*.
Shayth waa nabi sida ku cad xadiith laga soo xigtay Abuu Dar' kuna sheegay in Rasuulka Alle (SCW) yiri:
*"Alle wuxuu soo dejiyay boqol iyo afar suxuf; **Shaythna** waxaa ku soo degtay konton suxuf (oo kuwaas ka mid ah).*
Muxammed Bin Is-Xaaq wuxuu isna sheegay in markuu Nabi Aadan (CS) dhimanayay uu u dardaarmay wiilkiisa **Shayth**, uuna baray saacadaha habeen iyo maalinta, wuxuu kaloo baray cibaadooyinka saacadahaas la sameeyo; wuxuuna wargalyay in muddo ka dib dhicidoonaan duufaanno; isagoo sii odorasay Biyo-fatahii dhacay waqtigii Nabi Nuux (SC).
Dadka badankiisa waxay qabaan in Nabi Aadan ku duugan yahay dhulka Hindiya walow ay jiraan dad aaminsan inuu ku duugan yahay buurta la yiraahdo Abii Qabiis ee Mako ku taalo. Waxaa kaloo la sheegay in waqtigii uu dhacay Biyo-fatahii Adduunka, Nabi Nuux (CS) uu soo qaaday meedadkii Nabi Aadan (CS) iyo Abooto Xaawo kuna duugay Baytul Maqdas (Fiiri kitaabka*"Al-Bidaayah wa An-Nihaayah"*, xir. 1aad bogga 100aad). Abooto Abooto Xaawo hal sano ayay ka danbaysay geeridii Nabi Aadan (CS).
Waxaa la sheegay in Nabi Aadan uu noolaa kun sano, markuu dhintayna todobo bari baroordiiq ku jireen dhammaan wuxuu Alle uumay. Geeridiisa ka dib, xilka waxaa la wareegay wiilkiisa **Shayth** oo Alle ka dhigay nabi

sida nooga cad xadiithkii lagu sheegayay in lagu soo dejiyay konton suxuf. Markuu Shayth dhimanayay, wuxuu wiilkiisa **Anuush** faray inuu gadaashiisa xilka la wareego. Anuush ka dib waxaa xilka la wareegay wiilka Anuush oo la yiraahdo **Qaynan**, waxaa isna kaga danbeeyay wiilkiisa **Mahlaayiil** oo la yiri waa qofkii todobada qaarad boqor u noqday, oona ahaa qofkii ugu horeeyay oo duur ood qaada oo magaalooyin ka dhiga. Waa kan dhisay magaalada Baabil iyo As-Suus Al-Aqsaa'. Wuxuu kaloo Ibliis iyo ciidankiisa ka raacdeeyay dhulka ay dadka degaan una riixay buuraha iyo dhulkaan la degin. Wuxuu kaloo layn jiray dadka jinniga muriidi ka dhigta; wuxuuna lahaa taaj weyn. Mahlaayiil dadka ayuu u khudbayn jiray wuxuuna xukunka haystay afartan sano. Gadaashiisa, maamulka waxaa qabsaday wiilkiisa **Yardi** oo isna markuu dhimanayay xilka ku wareejiyay wiilkiisa **Khunuukh.** Dadka badankooda waxay qabaan in Khunuukh uu yahay **Nabi Idriis** (Fiiri kitaabka*"Al-Bidaayah wa An-Nihaayah"*, xir. 1aad bogga 101aad). Khaanuukh (ama Nabi Idriis) waxaa xukunka kaga danbeeyay **Matuushalakhi** oo isna kaga danbeeyey **Laamak.** Markuu Laamak geeriyooday waxaa xukunka qabsaday **Nuux** oo Alle ka dhigay nabi. Xadiith laga soo xigtay Muxammed Bin Cumar Bin Yuusuf oo isna ka wariyay Muxammed Bin Cadul-Malik Bin Zanjuuyi oo isna ka wariyay Abuu Tawbata oo isna ka wariyay Macaawiyah Bin Salaam oo ka soo xigtay walaalkiisa Zayd Bin Salaam oo sheegay in Abuu Salaam ka maqlay Abuu Amaamah oo dhahayo:
*"Ninbaa wuxuu yiri: Rasuul Allow ma iiga warimi Aadan? Haa ayuu (Nabiga, SCW) uu yiri. Ninkiibaa wuxuu yiri: Meeqaa u dhaxaysay Aadan iyo Nuux? Wuxuu (Nabiga, SCW) yiri: labaatan qarni"*. Waxaa soo wariyay Abuu Xaatim Ibnu Xibbaan.
Xadiith laga soo xigtay Ibnu Cabbaas uuna soo wariyay Al-Bukhaari ayuu Ibnu Cabbaas ku yiri:
*"Waxaa u dhaxeeyay Aadan iyo Nuux labaatan qarni oo dadku wada Islaam ahaayeen"*. Arrintaan waxay beeninaysaa aragtida taariikhyahanada iyo Ahlu Kitaabka qabaan oo ah in Qaabiil iyo caruurtii ka faracantay ay dabka caabudi jireen (Fiiri kitaabka*"Al-Bidaayah wa An-Nihaayah"*, xir. 1aad bogga 103aad).Waase in la ogaadaa in labaatanka qarni Sunnada ku xusan ay ka duwanaan karto boqolka sano oo ay dadka qarniga u yaqaanaan. Qarniga Nabiga (SCW) sheegay wuxuu noqon karaa "jiil" sida ku cad meelo badan oo Qur'aanka Kariimka ah. Tusaale, Allaha Idil-Sarreeya Isagoo tilmaamaya qawmiyadihii la haligay Nabi Nuux (CS) ka dib, wuxuu yiri:
*"Imisaa aan halignay **quruun** ka dib Nuux"* (Israa', 17).
Allaha Idil-Xooggan wuxuu kaloo ku yiri aayadda 42aad ee Suuratu Al-Muu'minuun:
*"Markaasaan beernay gadaashood **quruumo** kale"*.
Nabigana (SCW) wuxuu xadiith ku yiri:
*"Waxaa **quruunta** u khayr badan kuwa qarnigayga"*.

Halkaa waxaa nooga cad in mudada u dhaxaysay Aadan iyo Nuux ay kumanaan sano ahayd maadaama erayga "Qarni" ee ku jira Quraanka iyo Sunnada uu micnahiisu yahay "jiil"; xaqiiqdase Allaa og.
Qarniyadaas dadka ay wanaagsanaayeen ka dib, waxay dadkii bilaabeen inay masawiraan dadkooda magaca leh oo dhintay si ay u xusuustaan; arrintaasna cibaadadooda ka gacan gaysato. Dadka ka danbeeyay dadkii waxaa sawiray, ayaa Shaydaankii lumiyay una sheegay in aabayaashooda ay sawiradaas caabudi jireen. Waxay markaa dadkii bilaabeen inay asnaam ay samaystaan una baxshaan magacyo dadkii hore lahaayeen sida **Wadda, Suwaac, Yaguuth, Yacuuq** iyo **Nasra** (Fiiri kitaabka*"Al-Bidaayah wa An-Nihaayah"*, xir. 1aad bogga 108aad). Waxaa dunidii ku faaftay shirkiga iyo fasaadka; markaas ayuu Alle soo diray Nuux (CS), wuxuuna ahaa Rasuulkii Koowaad uu Alle soo diro. Ibnu Cabbaas wuxuu sheegay in Nuux nabi laga dhigay isagoo 480 sano jiro, Nabi Nuuxna (CS) markaas bilaabay inuu dadka ka reebo sanam caabudka laakiin way ka diideen sida ku cad aayadda 23aad ee Suuratu An-Nuux oo Allaha Idil-Sarreeya ku yiri:
*"Waxay isu dheheen, haka tagina ilaahyadiina, hana ka tagina Wadda iyo Suwaac iyo Yaguuth iyo Nasra"*.
Nabi Nuux (CS) dadkiisa habeen iyo maalin ayuu waanin jiray, kor iyo hoosna wuu ugula hadlay, wuxuuna u sheegay goodintii Alle u goodiyay

dadka ku caasiya, hadalkiisaasise way diideen. Sidaa wuxuu ku waday 950 sano sida ku cad aayadda 14aad ee Suuratu Al-Cankabuut uu Allaha Idil-Sarreeya ku yiri:

*"Wuxuu dhexdooda joogay kun sano oo konton la', markaasaa heshay duufaan iyagoo daalumiin ah".*

Muddo dheer markuu wacdinaayay dadkiisana hadalkiisa maqliwaayeen ayaa Nabi Nuux (CS) Alle ka baryay inuu dadkaas baabi'iyo. Markaa ayaa waxaa la faray Nuux inuu abuuro geed, geedkaasna daayo illaa boqol sano; kadibna uu gooyo kana dhigo doon. Waxaa la yiri, Nabi Nuux wuxuu doontaas dhisayay boqol sano, walow dadka qaar yiraahdeen dhismaheedu waxay ku qaadatay afartan sano. Doonta markii uu dhisay, waxaa Nabi Nuux (CS) la faray inuu nooc kasta oo xayaan ah lab iyo dhedig ka qaado, sidoo kale geedaha miraha dhala iwm.

Doonta waxaa kaloo raacay Nuux iyo xaaskiisa Waaligah, iyo saddex wiil uu dhalay Nabi Nuux (**Xaam, Saam, Yaafith**) iyo xaasaskooda, iyo dad 10 illaa 83 gaaraya oo ahaa dadkii Nabi Nuux (CS) diintiisa raacay. Ciddii aan doontaa korin waa la baabi'iyay oo daadbaa Alle cir iyo dhulba uga keenay. Wiilka **Yaam la yiraahdo** oo uu dhalay Nabi Nuux (C.S) ayaa ka mid ahaa dadka daadka lagu baabi'iyay maadaama uu Alle beeniyay. Nabi Nuux (CS) wuxuu kaloo dhalay wiil Caabir la yiraahdo oo dhintay inta doonta la korin ka hor.



Saddexda wiil oo Nabi Nuux (CS) ayay ka faracmeen dhammaan dadka maanta dunida ku nool. Waxaana la yiri Xaam ayaa intii doonta la saarnaa naagtiisa la galmooday, taasna waxay ka caraysiisay aabihiisa Nuux (CS) oo markaa Alle ka baryay in faraca Xaam dhalangadoomaan, sidaa darteed ayaana dhashii ka faracantay Xaam Alle madow ka dhigay.

Sida laga soo xigtay Ibnu Cabbaas, duufaankaas ka dib Nabi Nuux (CS) wuxuu noolaa 350 sano. Haddii laysku daro 480 sano oo ka horaysay nabinadiisa, 950 sano oo uu duufaanta ka hor dadkiisa wacdinayay, iyo 350 sano oo duufaanta ka dib uu noolaa; waxaan arkaynaa in Nabi Nuux (CS) uu dhintay isagoo 1780 sano jir ah. Nabi Nuux (CS) wuxuu ku duugan yahay Al-Masjidul Xaraam (Fiiri kitaabka *"Al-Bidaayah wa An-Nihaayah"*, xir. 1aad bogga 123aad).

Ilaah wuxuu tarmiyay caruurtii Xaam, Saam iyo Yaafith. Dadka ay ka mid yihiin Turkiga, Roomaanka, Faarisiyiinta iyo Juuj waxay ku abtirsadaan Yaafith. Tusaale, abtirsiga Roomaanka waa Ruumi Bin Ludhbi Bin Yuunaan Bin Yaafith Bin Nuux (CS)

Saam waxaa ka soo faracmay dad ay ka mid yihiin **Iram**, Arfakhshad iyo Laawid. Reer Iram oo Qur'aanka Alle ku xusay waxay ahaayeen Caabir iyo Cawa. Caabir waxaa ka faracmay Jaadis iyo **Reer Thamuud** oo ahaa dadkii ku caasiyay Nabi Saalax (CS). Abtirsiinada Nabi Saalax (CS) waxay ahayd Saalax Bin Cabdi Bin Maasax Bin Cubayd Bin Jaabir Bin Thamuud Bin Caabir Bin Iram Bin Saam Bin Nuux (CS). Cawa waxa ka faracmay **Reer Caad** oo ahaa dadkii ku caasiyay Nabi Huud (CS). Abtirsiinada Nabi Huud (CS) waxay ahayd Huud Bin Cabdillaahi Bin Ribaax Bin Jaaruud Bin Caad Bin Cawa Bin Iram Bin Saam Bin Nuux (CS). Nabi Huud wuxuu ahaa qofkii ugu horeeyay oo ku hadla afka Carbiga.

Arfakhshad Bin Saam isna wuxuu dhalay Kurth oo ah reerkii ay ka dhalatay Buna oo ahayd xaaska Nabi Ibraahim (CS) iyo Shaalikh oo ah reerkii uu Nabi Ibraahim (SC). Abtirsiga Nabi Ibraahim waa Ibraahim Bin Taarakh (Aazar) Bin Naaxuur Bin Saarug Bin Raacu Bin Faalig Bin Caabir Bin Shaalikh Bin Saam Bin Nuux (CS). Nabi Maxammed (SCW) iyo Nabiyada Reer Banii Israa'iil oo idilna Ibraahim (CS) ayay ka soo faracmeen. Nabiyada magacdooda Qur'aanka lagu sheegay waa:

*Aadam, Idriis, Nuux, Huud, Saalax, Ibraahiim, Luud, Ismaaciil, Is-Xaaq, Yacquub, Yuusuf, Ayuub, Shucayb, Muuse, Haaruun, Du Al-Kifli, Daa'wuud, Sulaymaan, Ilyaas, Al-Yasac, Yuunis, Zakariya, Yaxya, Ciise iyo Muxammed (SCW). Waxaa kaloo jiraa afar kale oo nabinimadooda laysku qilaafsan yahay waana Cuzayr, Luqmaan, Du Al-Qarnayn iyo Al-Khadar* (Fiiri kitaabka: *"Bugyatul al-Amal"* 1955, b.:19).

Xaam dad tiro badan ayaa ka tarmay waxaana ka mid ah Reer Qibdhi oo Masar ah, Barbar iyo Reer Kowsh (Kuush) oo la yiri waa dadkii uu ka dhashay Nimruud *(Faafaahin zaa'id ah ka fiiri xir. 1aad ee kitaabka Al-Bidaayah wa An-Nihaayah)*. Waxaa jiraa dad qaba in Nimruud ahaa wiil ka mid ah wiilasha Kowsh (Sergi, 1897 bogga 74).




Kowsh waxaa kaloo ka yimid dadka ay ka mid yihiin Soomaalida, Oroomada, Cafarta, Beeja, Saaxo iyo dadyowga deggan waddanka maanta loo yaqaan Jaad. Waxaa la yiri erayga Kowsh waa eray yahuudi ah oo la micna ah kuleelka zaa'idka ah oo dadka madoobaynayo. Maadaama mid ka mid ah caruurta Xaam u guuray dhanka dhulka kulul ee Afrika, ayaa canuggaas ka sii madoobaaday walaalihiisa kale loona baxshay Kowsh. Eray Soomaali ah oo asalkiisa ka yimid Kowsh waa Kowshin waxaana yaalaaba loo baxshaa caruurta madowga badan ama caruurta kulkul oo xanaaqa badan. Erayaal kale oo asalkooda laga keensaday Kowsh waa kush iyo kushad oo kan hore tilmaamayo geed gaaban oo isku humaagsan oo meel dheer marka laga joogo midab madow leh, halka erayga danbe ee *"kushad"* yahay kul iyo caro ama xanaaqid (Yaasiin C. K., 1976, b.:267).

Sida aan u soo sheegay dadka Kowshka ka ah waa ka madow badan yihiin dadka kale ee Xaamiga ah waxayna leeyihiin luqad, arag iyo dhaqan isku dhow ama israaci karo. Luqadda dadkaan ay ku hadlaan waxaa guud ahaan la yiraahdaa luqadda Kowshiinta (Cushitic Language). Waxaa la qiyaasayaa in dadka afka Kowshiinta ku hadla ay jireen in ka badan 15,000 sano (Greenberg, 1963a, Fleming 1974, Mason 1977, Ehret 1979). Waqti ugu yaraan 10,000 NCKH ayay dadka Kowshiinta ah soo degeen dhulka u dhaxeeya

Suudaan iyo Badda Cas (Greenberg, 1963a). Kowshiinta waxaa ka mid ahaa qadhaabsato, ugaarsato, beerato iyo xoolo dhaqato. Lama ogo in waqtiga beerashada la mid yahay kan xoolo dhaqadka, ha yeeshee waxaa jiraa waxyaalo cadaynayo in 5000 NCKH ay Kowshiinta beero ka tacbi jireen meelo ka mid ah waqooyi Dhulkoraad Xabashida (Ethiopian Plateau).

*Laamolaamaynta tax-mala-awaalka faracii Nabi Aadam (SC)*






# 2 HAYAANKA KOOWAAD EE AB-AWALADA SOOMAALIYEED


Sida uu qabo Ehret (1976, b.: 5-18) sanadkii 5,000 NCKH, Kowshiinta waxay bilaabaan geedi ay u guurayaan dhanka koofureed iyagoo ka soo tagaya dhulkii u dhaxeeyay Suudaan iyo Badda Cas. Qaar Kowshiintaas ka mid ah waxay ku hareen dhulka maanta loo yaqaano Eretariya, kooxdaasna waxaa la yiraahdaa Beeja. Koox labaad ee Kowshiinta ah ayaa iyagana ku hareen bartamaha Dhulkoraadka Xabashida. Kooxdaan waxaa la yiraahdaa Aqaw. Kowshiinta intooda kale waxay geedigooda uu gaaray Dhulkoraad koofureed ee Xabashida, waxayna degeen dhulka u dhaxeeyo harooyinka Abaaya iyo Turkaana. Waxay halkaas ay daganaayeen illaa u dhawaadkii sanadkii 3000 NCKH (Fleming 1969, Ehret 1971, 1974b).

Lama yaqaan waxyaalaha sababay hayaanka Kowshiinta, ha yeeshee culumada waxay qabaan in sababta ugu weyn ee keenta hayaankaas ahayd iyadoo waqooyi-bari Afrika ka dhacay isbedel cimilo oo xoog badan. Culumada darasta cimilooyinkii hore waxay sheegeen in inta u dhaxaysay 21,000 illaa 12,000 NCKH, Afrikda waqooyi ee haatan loo yaqaano Sahara ay hawado aad u kululaatay taana keentay inuu dhul badan nabaadguuro. Hase yeeshee intii u dhaxaysay 10,000 illaa 5,000 NCKH, roobka wuu kordhay, dhulba dhulkuu koofur ka sii jirana roobka wuu ka sii badanayay. Dhulka Saharaada koonfur ka jira waxaa meel kasto ka samaysmay balliyaal biyaha iska buuxaan, dhasheeg iyo kayn jiq ah (Faure 1966, VanZinderen iyo Coetzee 1972, Street iyo Grove 1976). Dhul maanta aan geedna ku aalin ku noolaanshihiisana adag tahay ayaa waxaa ku yaalay biyo qabatimo waa weyn. Waxaa la yiri in Harada Turkaana biyaheedu sideetan mitir ka koreeyeen halka maanta ay joogaan, harooyin badan oo ku yaal Bariga Afrikana waxay biyahooda ku shubi jireen durduradda biyaha geeya Wabiga Nayl iyo wabiyada kale ee gobolkaan ku yaala. Sidoo kale dhulka ku yaal Geeska Afrika wuxuu ahaa meel wabiyadiisa iyo togaggiisa biyaha ka go'in, balliyadiisana biyaha caygagaan. Dhulbiyeedkaas koofurta ka xiga Saharaha waxaa ka buuxay kalluun iyo barri-biyoodyo ay jeerta ka mid tahay. Kalluunkaas sida sahlan looga helayay biyo galeenadaas ayaa dadkii soo jiitay, sababayna in Kowshiinta koonfur soo aaddo. In kastoo Aadmiga dhacdooyinkaan dhacay u saarinayo isbedel cimileed, hadana waxaa waajib ah in la ogaado inuu Alle yahay cimiladaas wanaagsan kan keenay sida ku cad aayadda 63aad ee Suuratu An-Namal oo Allaha Idil Sarreeya ku yiri: *"Yaa soo diraa hawooyinka (cimilada rogroga) iyagoo bishaarayno naxariista Alle (waa roobkee)".*

Isbedelkii hawo oo dhacay intii u dhaxaysay 10,000 illaa 5,000 NCKH, waxay

wax weyn ka bedeleen nolosha dadka Kowshiinta. Sida aayadda kore ku xusan isbedelkaas hawo waxay hordhac u ahayd khayr weyn uu Alle Aadmiga ugu naxariisanayay oo ah roob meel kasta biyo dhigay sababayna inay bataan dhir ta iyo xoolaha Aadmiga ka faa'idaysan karo. Arrintaan iyadoo uu cadaynayo ayuu Allaha Idil-Sarreeya yiri:
*"(Yaa) idiinkaga soo dejiyay samadda biyo oo aan ku soo bixinay beero qurux badan; ma aadan awoodin inaad soo bixisaan geedkeeda"* (Suuratu An-Namal, aayadda 60aad).
Alle waxaas oo idil wuxuu u samaynayay in dhulka uu noqdo meel Aadmiga uu dego, camiro, ka faa'idaysto khayraadkiisa sida ku cad aayadda 62aad ee Suuratu An-Namal oo Allaha Idil-Sarreeya ku yiri:
*"Idinkana yeelay kuwo dhulka u hara"*.
Waxyaalahaan kor ku soo sheegnay oo idil wuxuu Allaha-Idil-Agaasima ku soo koobaya labo aayad oo Suuratu Al-Furqaan ku jira:
*"Alle waa kan dira dabeesha bishaaro darteed naxariistiisa (roobka) horteed, waxaana ka soo dejinay samadda biyo wax daahiriya. Si aan ugu noolayno deggaan dhintay kuna waraabino waxaan abuurnay, oo ah xoolo iyo dad badan"* (Suuratu Al-Furqaan, aayadaha 48-49aad). Alle wuxuu kaloo yiri:
*"Alle waa kan diray dabaysha taasoo kiciso daruurta markaasna ku waraabsho magaalo dhimatay (abaarowday) markaasna roobkaas ku noolayno dhulka, markuu dhintay ka dib"* (Suuratu Faadir, b.: 9).






*Khariidada koowaad waxay muujinaysaa degaankii Kowshiina inta u dhaxaysay 5000-4000 NCKH, khariidada labaadna waxay muujinaysaa sida deggaankaas u fiday waqti ku aadan 3000 NCKH. Waxaa xeebaha waqooyi soo gaaray qaar ka mid ah ab-awalada dadka maanta ku nool Geeska Afrika.*

Aayadahaan wuxuu Alle noogu sheegayaa in cimilo gaddoonka iyo roobabka ka dhaco dhulka sida kuwii Afrika ka dhacay 10,000 illaa 5,000 NCKH uu uga dan leeyahay inuu ku nooleeyo dhul dhintay sida dhulkii ku xaalufay abaarihii Afrika ka dhacay 21,000 illaa 12,000 NCKH, dhulkaasna u bedelo dhul leh biyo iyo kheyraad badan oo uu dadka ku noolaan karo.
Maadaama Aadmiga guud ahaan, gaar ahaan Kowshiintii hore aqoon u lahayn cilmiga sahminta iyo orosidda, ayaa Allaha Idil-Sarreeya mar kasta ku toosinayay wixii u dan ah iyo meeshii barri iyo badba noloshooda u wanaagsan. Arrintaan waxay ku caddahay aayadda 63aad ee Suuratu An-Namal oo Allaha Idil Sarreeya ku yiri:
*"Yaase idin toosiyaa mugdiyada barriga iyo badda"*.
Toosintaas Alle ayay ku timid in Kowshiintii hore degaan ahaan u doortaan dhulkoraadka Xabashida maadaama dhulkoraadkaas lahaa harooyin kalluunka badan, dhir kala duwan oo miro la cuno leh, isla markaasna ay ku yareed kaneecada iyo qaniinka kale ee Aadmiga dhiba. Kowshiintaas oo noloshooda la mid ahayd qadhaabsatada iyo ugaarata mar aan fogayn ku noolayd dhulka koofurta ka xiga Saharaha, waxay u degi jireen sideed illaa labaatankii qofoodba meel, waxayna nolol maalmoodkooda ka heli jireen qadhaabsiga, ugaarsiga iyo kaluumaysiga (Lee 1968, Silberbaur 1965). Degitaankaani wuxuu ahaa falkii ugu muhiinsanaa uguna horeeyay ay Kowshiinta ka sameeyeen Bariga Afrika. Dadkaas markay degeen waxay waqti u helaan inay samaystaan aaladaha lagu kalluumaysada ama lagu ugaarto. Dadka harooyinka ag degay ma aqoon dabaasha, markay kalluumaysanayaanna waxay qatar u ahaayeen inay biyaha ku dhacaan halkaasna ku dhintaan. Arrintaan waxaa cadaynayaa in micnaha asalka ah ee erayga biyo uu yahay *"baaba' badan"* ama shaygii baabi'inta badnaa. Micnahaan waxay ka muuqataa erayga biyo oo ka koobmo labo eray oo kala ah *"bi"* oo la micno ah *"baaba'"*, iyo *"yo"* oo ka mid ah erayaasha tilmaamo jamaca. Isugaynta labada eray ee ***"bi+yo"***, waxay sidaas darteed la micno noqonayaan shaygii baabi'inta badnaa. Qeexiddaan erayga *"biyo"* waxaa si wanaagsan looga sii fahmi karaa lahjooyinka la aaminsan yahay inuu afka Soomaaliga ee maanta lagu hadlo ka yimid oo ay ka mid yihiin lahjadda Dadka Boont iyo Mayga. Dadka Boont waxay biyaha u yaqaanaan *"bi'i"* (Grottanelli wly, b:215). oo la micno ah baaba'she. Dadka reer Markaha ahna waxay iyagana biyaha u yaqaanaan *"bishaan"* oo ah *"kuwii wax baabi'inayay"*.



Shaygaas baabi'inta badnaa oo markii danbe loo baxshay *"biyo"*, waxay baabi'intiisa badnayd waqtiyada roobka da'o, oo dadka dooxooyinka deggan biyaha qaadaan. Si dhibaatadaas ay u yareeyaan ayaa waqtiga jiilaalka ah dadka ciid ku ururin jireen bartanka dooxada; ciiddaas karooran oo laga soo qaaday caloosha dooxadana waxaa la yiraahdaa doon (Yaasiin

C. K. 1976, b.:123). Maadaama ciidda kaligeeda aysan biyo badan jijin karin ayaa *"doonka"* korkiisa la saari jiray qoryo mayrax la isugu xiray. Biyaha haday xaaqaan ciidda, dadka waxay ku baxsan jireen qoryihiin laysku xiray ee "doonka" ayaa la kor saaray, qoryahaasaana sida *"doonka"* loo kor saaraan jiray illaa ay biyaha ka yaraadaan ama la tago meel dhul ah oo la degi karo. Markaas oo kale qoryaha sidaas la isugu xiray waxay gali jireen booskii "doonka" ciidda ka samaysnaa, dadkana waxay qoryahaas ku magacaabeen *"doon"*. Si *"doon"*ka ciidda ka samaysan looga garto kan qoryaha ka samaysan, ayaa ab-awaladii Soomaaliyeed ay kala duween dhawaqa labadaas eray kana kala dhiigeen *"doonta"* oo ay u yaqaaneen geedaha biyaha dul sabeeyo, iyo *"doonka"* ay u yaqaaneen ciidda laga soo ururiyo salka dooxada oo meel la tuuro. Soomaalidu waxay tiraah *"Magac sabab la'aan ma baxo"*, sidaas ayayna ku baxeen erayaasha aan dusha ku soo sheegnay. Aayadaha 88-89 ee Suuratu Al-Kaaf ayaa iyagana noo tilmaamayaa in *"waxna sabab la'aan dhicin"*. Allaha Idil-Sarreeya wuxuu aayadahaas ku yiri:

*"Annaggaa makaninay (sinnay) xukunka dhulka,* ***waxaana siinay wax kasta sabab (cilmi ah)****, wuxuuna raacay sabab (jid cilmi ah).*

Waxaan hadalkaan uga dan leeyahay, in cabsi dadka uu ka qabay daadadka ay keentay inuu samaysto qoryo *"doon"* ahaan loo sameeyay oo biyaha looga badbaado, doontii la sameeyayna sabab u noqotay dhalashada aalad cusub oo lagu kalluumaysto. Dadkaan kalluumaysatada ah si qoryaha doonta ay u soo goostaan waxay qoryaha engegan oo daab ahaanta u haystaan ku garaaci jireen goryaha geedaha engegay ama bolalay. Isku garaaciidda qoryahaas waxaa ka dhashay tamarta wax gubta oo la yiraah *"dab"*. Arrintaan waxaa noo cadaynaya asalka erayga *"dab"* oo ka yimid qoryihii *"daab"*ka ahaa ee laysku garaaci jiray (Dhoorre 1994, b.:3). Boont oo ah dadka ku hadla lahjaddii ab-awalada Soomaaliyeed waxay dabka u yaqaanaan *"teb"* (Grottanelli wly, b:215) oo la mid ah erayga *"tib"* oo haatan Soomaalida u taqaan usha wax lagu sukulo ama lagu tumo (Zorc ikk 1991, b:468). Sidaas darteed, aragtida qabta in erayga "dab" uu yahay tamarta ka dhalatay markii "tib" ama "daab" lagu garaacay "tib" ama "daab" kale, waa mid la garwaaqsan karo, walow xaqiiqdeeda uu Alle kaliya ogyahay.

Mar kale ayaa toosinta Alle uu dadka ku toosinayo wax u dan ah, ayaan ka arki gartaa sida dabka uu ku dhashay. Dadkii hore ma aqoon in tamar ku keedsan tahay geedka, hase yeeshii Alle wuxuu u keenay sabab tamartaas ay ku helaan iyagoon aqoon u lahayn. Tamartaas yaa halkaa ku keediyay, yaana loo keydiyay? Allaha Idil-Agaasima ayaa noo sheegay oo wuxuu yiri:

*"Ka warrama dabka aad shidataan. Ma idinkaa ahaysiiyay geedkiisa mise Annagaa ahaysiinay. Annagaa ka dhignay dabka waano iyo nafci kuwa safarka ah"*.

Helista doonta iyo dabka waxay isbedel xoog leh ku sameeyeen dadka



Kowshiinta ah, waxaana dhanna ka batay waxsoosaarka kalluunka, dhanka kalana ka wanaagsanaaday sixada iyo nabadgelyada dadka. Dabka wuxuu yareeyay dhibaatada qabowga ku hayay dadka isla markaasna wuxuu noqday shay dadka ay isaga difaacaan habar dugaagta. Dabka wuxuu kaloo keenay in qaar ka mid ah duur joogta siibana kuwooda tabarta daran u soo dhawaadaan halka dadka uu deggan yahay si iyagana uga badbaadaan qatarta duur joogta ka xoog badan. Waana sababtaas in xayawaanka dadka la nool loo yiraahdo *"dabjoog"* (domestic animals).Soo dhawaanshaha xoolahaas waxay keentay inay is dhaqan bartaan xoolahaas iyo dadka, aakhirkiina dadkii uu dhaqaaleeyay qaar xoolahaas ka mid ah. Si xoolahaas u rabaayoobaan, dadkana rasmi ahaan u helo xoolo ay isku halayn karaan ayaa waxaa xoolahaas la geeyay meelaha biyaha leh, si marka ay oomaan looga waraabiyo. Jaceelka sii kordhaya ee ka dhaxeeyay xoolahaas iyo dadka wuxuu keenay in dadka qaarkood u qubeeyaan xoolahaas kana *"dhaqaan"* wixii wasakh iyo uskag gaara. Kowshiinta jaceelka xoolaha ay u qabaan uu gaarsiiyay inay *"dhaqaan"* ayaa waxaa loo baxshay "xoolo-dhaqdo", ama kuwii xoolaha dhaqayay. Dadkii *"xoolo-dhaqdada"* ayay ka yimaadeen dadka maanta la yiraahdo *"xoolo-dhaqato"*.

Rabaayeenta xoolaha faa'ido ka sii ballaaran tan doonta iyo dabka ayay dadka siisay, waayo xoolaha waxaa laga helayay wax la cuno, wax la cabo, wax la xirto iyo wax gaadiid ahaan loo raaco. Waxaa yaraatay ku xirnaanshaha dadka ay 100% ku xiran yihiin wixii biyaha ama geedaha laga helo. Arrimahaan iyo kuwo kale ayaa keenay in dad badan oo kalluumaysto ama ugaarato ahaa ay xoolo dhaqdaan, siyaalo kala duwanna uga faa'idaystaan. Fa'idada badan ay leeyihiin awgood ayuu Alle "ancaam" ugu yeeray xoolaha la dhaqdo, isla markaasna Aadmiga u suuragaliyay inay rabaayeestaan sida ku cad aayadaha 71-73aad ee Suuratu Yaasiin:

*"Miyaadan arkaynin Inaan uga abuurnay waxaan ku samaynay gacanteenna xoolo (nicmoolay) ah oo ay iyaga hananayaan. Waana u laylinay, waxaana ka mid ah kuwo ay koraan iyo kuwo ay cunaan. Waxayna ka helaan manaafic iyo cabitaanno"*.

Xoolo dhaqatadse waxaa igayana dusha ka fuulay xil dadka kale aysan qabin oo ah ilaalinta nolosha iyo badbaadada xoolaha gacanta ay ku haayaan. Marka hore waa in xoolahaas ay geeyaan meel si joogta ah uga heli karaan daaq iyo waraab; isla markaasna ka fog degaanada ay ku badan yihiin qaniinka (insects) iyo habar-dugaagga qatar galinaya nolosha xoolahaas. Arrimahaan waxay xoolo-dhaqatada ku qasabtay inay reer guuraa ay noqdaan, oo hadba u guuraan halkii nolosha xoolahooda u fiican. Baahida guuritaan waxaa kaloo soo dedejiyay hoos u dhaca da'mada roob ee wixii ka danbeeyay sanadii 2000 NCKH (Street iyo Grove 1976, Butzer 1984). Harooyin badan ayaa guray ama joogga biyahooda hoos u dhacay. Dhul badan ayaa nabaadguuray, hase yeeshee tirada dadka xoolo-dhaqatada ah iyo xoolahoodaba aad iyo aad ayay u kordhayeen. Degaanka ku yaalo

harooyinka dhulkoraadka Xabashida kuma filayn dad iyo xoolo sidaas u badan. Dhibaatooyinkaas ayaana keenay in Kowshiinta deganayd koofurta Xabashida ay halkaas ka soo guuraan soona degaan dhul-daaqa ku yaalo dhulhoosaadka Geeska Afrika. Dadka soo guuray waxay u badnaayeen xoolo-dhaqatada, ugaaratada, qadhaabstada iyo beerayda. Beerayda waxay degeen dhulka roobka badan ama wabiyada ay maraan, halkaasna ayay ka samaysteen degaan rasmi ah. Maadaama qofka beerayda ah wixii xilli u baxa uu ku noolaan karay xilligaan wax u bixin, badanaa ma jirin wax ku qasbi jiray guuritaan dheer iyo isbedelka habka dhaqan-dhaqaalihiisa. Xaaladda qaybaha kale ee Kowshiinta saas ma ahayn. Tusaale, qofka xoolo dhaqatada ah oo xoolaha ka le'daan wuxuu intuu xoolo kale oo uu dhaqdo ka helayo noqon jiray ugaarato; sidoo kale qofka ugaaratada ama qadhaabsatada ah oo xoolo rasmi ah helay wuxuu noqon jiray xoolo-dhaqato. Fursadda nolosha iyo isdhexgalka ee dadka ogol isbedelka dhaqan-dhaqaale ee kala duwan, way ka badnayd kan dadka isakaga dheggan hal dhaqan-dhaqaale bulshada (beeray, xoolodhaqato, ugaarsato, qadhaabsato). Kowshiinta ogolaatayd in habka dhaqan dhaqaalahooda isbedbedela cabsi kama qabin noloshooda maadaama markuu dhibaato u timaadaba ay sahal u bedelaan habka dhaqan-dhaqaalahooda. Waana sababtaan in dadkii beerayda ahaa oo hal hab dhaqan-dhaqaale yaqaanay ku ekaadaan jiinka wabiga iyo dhulka roobabka badan, halka ugaaratada iyo xoolodhaqatada ku baahayn dhammaan dhulka ku yaalo Geeska Afrika. Waxaa la cadeeyay in Kowshiinta ugaaratada iyo xoolodhaqatada ah ay 3,000 NCKH, qaarkood soo gaareen xeebaha waqooyi iyo koofureed ee Geeska Afrika (*As-Suumaaliyah bi luqati Al-Qur'aan* 1963, b.:1).

Dadkaas qaar ka mid ah ayaa la kulmay badmaaxiintii Faaris ee 3000 NCKH imaan jiray xeebaha Geeska Afrika (Grottanelli wly, b:330; Kobischanov 1965, b.:137-141, Ali 1977, b.:43,67).

Faarasiintaas waxay waqtigaas Geeska Afrika u yaqaaneen *"Magan iyo Meluhha"*. Labadaan erayba waa af Soomaali sidaas darteed, waxaa cad in 3000 NCKH ay xeebaha Sooma-aliyeed ku noolaayeen dad ku hadla af Soomaali ama lahjad ka mid ah lahjooyinka Soomaaliyeed.

*"Magan"* waa eray tilmaamaya dugsiga qof tabar yar uu xumaha ka dugsanayo qof ama wax dhibaato u keeni karo. Sidaan dib u soo sheegidoonno, Soomaaliya waxaa loo yaqaanay Dhulka Ilaahyada, sidaas darteed ayay dadka ilaahyadaas magangalo loogu baxshay *"Magan"*. Tan iyo haatan Soomaalida marka ay ducaysanayaan ama dadka masaakiinta ah ay baryootamayaan waxay yiraahdaan *"Magan Alle iyo Magan Rasuul"*. Waxaan tusaale u soo qaadanayaa weedho masaakiinta yiraahdaan marka ay tuusanayaan oo ah:

- *Gaajo waa malagee*
- *Mudacbay sidataa*



- *Muslimow magan Alle.*

Eray *"magan"* la mid ah waa *"dugsi"*, eraygaan danbe waxay Soomaalida u taqaan rugaha Qur'aanka lagu barto, maadaama meelahaas laga barto wax (ama Qur'aan) uu qofka magangali karo ama dugsan karo.

Magaca labaad ee Soomaaliya loo yaqaanay wuxuu ahaa *"Meluhha"* (Grottanelli wly, b:330), waana magac la mid ah ama u dhow magaca mid ka mid ah ab-awalada Soomaaliyeed oo ah *"Meylaha"*. Waxaa laysku wada waafaqay in dadkaan Meylaha la yiraahdo ay ka mid yihiin dadyowga ugu facaad weyn ee Bahweynta Soomaaliyeed (Colucci 1924:90). Buugga qalinjabinta ee Dr. Ali Abiraxmaan Hirsi cinwaankiisana ah *"The Arab factor in Somali history"*, waxaa lagu xusay in 3000 NCKH, Geeska Afrika loo yaqaanay *"The Black land of Meluha"* ama Dhulka Madow ee Meylaha (Ali 1977, b.:43; Kobischanov 1965, b.:137-141). Dhulka madow wuxuu muujinayaa in degaanka ay Faarisiinta yimaadeen uu ahaa carro madowga koofurta Soomaaliya ama dhagax-dhadhaabka madow (basaltic basements) ee waqooyiga Soomaaliya. Waxaa suuragal ah in Faarisiintii hore waqooyiga Soomaaliya oo ah Dhulka Ilaahyada u yaqaaneen *"Magan"* halka koofurta Soomaaliyeed ay yaqaaneen *"Dhulka Madow ee Meylaha"*.


Erayga *"Meluhha"* wuxuu kaloo noqon karaa *"Mey-luha?"* oo ah weedh ka mid ah lahjadda koofurta Soomaaliya looga hadlo, waxayna lana micno tahay *"Muxuu lahaa?"*. Maadaama dadka degganaa xeebaha dhul madowka Geeska Afrika aysan af aqoonin badmaaxiinta Faarisiinta ah, waxaa suuragal ah in Soomaalidii ay la yaabeen dadkaan ka dhalan iyo af duwan ayna is weeydiiyeen *"Muxuu lahaa?"* ama *"Mey-luha?"*. Faarisiintii oo iyagana ka amakaagsan hadalka wada *"Mey-luhada"* ah ayaa dadkaas ku magacaabeen *"Meluhha"*, dhulkooda carrada madoobaana u baxshay *"The Black land of Meluhha"* (Dhulkii Madoobaa ee Meluhha).

Magac kale ee loo yaqaanay Geeska Afrika, siibana xeebahiisa waqooyi waa *"Punt Land"*. Soomaali badan ayaa u qaatay erayga *"Pun"* inuu la mid yahay *"Bun"* oo ah miraha geedka quddiga la yiraahdo, oo marka la engejiyo, la daqiijiyo laga dhigo qaxwada dadka ay cabaan (Yaasiin C. K. 1976, b.:41). Dadbaa erayga *"Bun"* u haystaa inuu la micno yahay *"fooxa"* ama *"lubaanta"* ama *"beeyada"*. Fahan la'aataas waxaa keenay in dadka qaar ay maqleen in Roomanka iyo Giriiggii hore u yaqaanee xeebaha waqooyi ee Soomaliya *"The Land of the Spices"* oo micnahiisa saxa ah uu yahay *"Dhulka Fooxa"* ee ma aha *"Dhulka Bunt"*. Waxaa kaloo loo baahan yahay in la ogaado in Masaaridii hore ahayd dadkii xeebaha waqooyi ku tilmaamay "Punt" oo aysan ahayn Roomankii iyo Giriiggii. Sidaas darteed, micnaha erayga *"Punt"* waa in laga raadiyaa taariikhda Masaaridii hore sida ay sameeyeen dadka ku xeeldheer afka iyo taariikhda Masaaridii hore. Muller oo ka mid ah culumada si fiican u taqaan afka Masaaridii hore wuxuu diiday fikradda ah in erayga *"Punt"* ka yimid *"Péwenet"* oo ah weedh ka kooban saddex

eray oo kala ah Pé+wen+et (Muller 1910, b.:39 F.G. 2). Wuxuu sheegay in micnaha *"Pé"* ay tahay cir, *"wen"* ay tahay furnaan, *"et"* ay tahay eray raaca erayaasha dhedigga ah ee afka Masaaridii hore. Weedha "Péwenet" waxay sidaas darteed la micno noqonaysaa "Cir furan". Muller wuxuu marka hore yiri *"Péwenet"* iyo *"Punt"* isku mid ma aha suuragalna ma aha in weedha "Péwenet" isku bedesho weedha "Punt". Muller wuxuu kaloo sheegay in farta Masaaridii hore ay ka kooban tahay shibanayaal (consanants) kaliya oo aysan lahayn shaqallo (vowels), sidaas darteed magaca *"Punt"* uu u qoran yahay *"Pwnt"* (Breasted 1906, b.:161). Aragtidaas waxaa la qabaa Prof. Cabdalla Mansuur oo ka mid ah culumada Soomaaliyeed ee ku xeeldheer afafka Kowshiinta (Caballa 1988, b.:112). Prof Cabdalla wuxuu kaloo sheegay in Masaaridii hore ku dhawaaqi jirin xarafka "t", markuu xarafkaan uu raaco xarfaha dhawaqooda sanqada ka yimaado sida "n". Prof. Cabdalla wuxuu kaloo yiri dhawaqo xaruufyada *"P"* iyo *"B"* waa isugu mid dhammaan Kowshiinta ah, sidoo kale xarafka *"w"* haddii shaqal ahaan loo isticmaalo yahay *"oo"*. Sidaas darteed, Masaaridii hore waxay Geeska Afrika ku magacaabi jireen "Dhulka Boont" (Cabdalla 1988, b.:112). Natiijadaan Prof. Cabdalla gaaray waxay waafaqsan tahay tii Muller, waxaase intaa raacaa iyadoo 100% ka tarjumayso dadka iyo dhaqanka Masaaridii hore ku arkeen Geeska Afrika. Baaritaan arkiyoloojika ah (raad-awal-aqoolayn) ee Soomaaliya lagu sameeyayna waxay tilmaantay sababta dadka Geeska Afrika deggan loogu baxshay Boont.



Waa midda hore ee Soomaalida sida dadka kale Kowshiinta ah waxay erayaasha dhedigga ah raacisaa "t" sida Masaaridii hore. Waa marka labaadee, *"Boon"* waa eray Soomaalida af Mayga ku hadasho u taqaanno nooc ka mid ah aaladaha lagu ugaarto oo ah fallaarta baalasha tirada badan leh. Waxaa xusid mudan in dadka fallaarta u yaqaan *"Boon"* ay la lahjo yihiin dadka *"Mey-luha"* ku yiri badmaaxyadii Faarisiinta oo Soomaaliya ku magacaabay "The Land of Meluhu'. Waxaa kaloo xiiso leh in daraasad raad-awal-aqoolayn ah (archeology) ee lagu sameeyay dhulka ay degaan




*Khariidadaan waxay muujinaysaa fidka iyo hayaanka Ab-awalada Soomaaliyeed wixii ka danbeeyay 3000 NCKH.*

dadka Soomaaliyeed ee lahjadda Mayga ku hadlo laga helay fallaaro 100% la mid ah fallaaro laga helay Fayyuum oo ku taalo dalka Masar. Waxaa kaloo laga helay gobolada koofur Galbeed ee Jamhuuriyadda Soomaaliya qalab kale oo lagu ugaarto lana mid ah kuwo laga helay degmada Hilwaan ee dalka Masar (Fiiri kitaabka *"Tarikh as-Sumal"*, 1961, b.:12). Waxaa suuragal ah in waqtigii ay Masaaridii hore imaanayeen Geeska Afrika ay la kulmeen dadkaan fallaaraha qurxoon wata, ayna dadkaas weydiiyeen magaca fallaarta ay wataan, sidaas darteedna dalkaan ku magacaabeen magacii fallaarta ay dadkaas wataan.

Arrin kale oo cadaynayso in qoraalka *"Punt"* uu yahay "Boont" waa iyadoo maanta Geeska Afrika ku nool yihiin dad leh magacaas oo wali ugaarato ah (Biasutti 1905, VI-F.G. 3). Dadkaas waxaa ka mid ah Aweerbaala, Aweerbuura, Aweeryare, Aweersafar, Aweerbedde, Aweerwaqooyi, Aweerbuube, Aweerguduud, Aweerkelli, Aweerduwa, Aweerkije, Dagoto (ama Dhagoto) iyo Riibi (Grottanelli wly, b:219-223). Boont Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ku nool waa Riibida iyo Aweerkeliya waxayna degaan agagaarka Wabiga Jubba, Jilib iyo inta u dhaxayso Bilisqooqaani iyo Afmadow. Boont inteeda kale waxay haatan deggan yihiin dhulka Soomaaliyeed ee Keenya ka mid ah. Waqtigii hore waxay dadkaan deganaayeen dalkoo idil, gaar ahaan dhulka Guurraha ee ku yaal Gabballand ama Galeed (Elliot 1913, b.:554 iwkd)

Luqadda ay ku hadlaan dadkaan waxay ka mid tahay lahjooyinka dadka Soomaaliyeed ku hadlaan waxayna lahjo ahaan u dhow dahay midda ay ku hadlaan Soomaalida Garraha ah (Dracopoli 1914, b:156-157; Cabdalla 1988, b.:66). Tusaale aan u soo qaadano tirada lahjadda dadka Boont sida looga wariyay Fischer (1878, b:141-144):



*1- kaya 2- lawa 3- sédeha 4- a'fera 5- shana 6- leha 7- seda'wa*
*8- si'yiira 9- sagiila 10- tawana.*
*20- lawtawana 30- sedatawana 40- afartawana 50- shantawana...*
*100- lebetawan 1000- dèbwa*

Inta uu magaca Boon aan la marin habaabin, wuxuu ka mid ahaa magacyada sida caadiga ah ay Soomaalida ula baxdo, waxaana taas kuu cadaynayaa in firka Ugaas Khalaf Madoobe uu ka mid ahaa nin la yiraahdo Ugaas *Boon* Ugaas Cilmi Ugaas Warfaa Ugaas Xirsi Ugaas Khalaf Madoobe (Robecchi 1903, b.:572). Waxaa kaloo magacaan la baxaa dad ka mid ah Yaahaabuur Samaalaha ee la yiraahdo Du'aale. Nasiib darase, qaar ka mid ah dadkii Boont ayaa isaga dheganaa noloshoodii badaa'iga ahaa kana haray isbedelka diimeed iyo dhaqan-dhaqaale ee Geeska Afrika taasna waxay u keentay, isdhexgal yari iyo isdur. Dadka Aweeraha ah ee aan kor ku soo sheegnay waxay 100% dhalasho wadaagaan dadka Soomaaliyeed, hase yeeshee keli u noolaanshahooda iyo guurgurigooda (endogamy) ayaa u keenay inay ka yara dhallan duwanaadaan Soomaalida kumanaan sano si madax banaan

isku guursanaysay.
Mid ahaanshaha guud ee dhaqanka iyo dhallaanka Boont iyo Soomaalida waxaa kaloo cadaynayaa sawirada dadka *"Boont"* ahaa ee ku sawiran darbiyada qaboorta Masaaridii hore ee Daarul Baxaari iyo Men-khabris-Seneb. Sawiradaas waxay muujinayaan midabka dadka *"Dhulka Boont"* deggan la mid ahaa midabka Kowshiinta deggan Bariga Afrika, dadkaasna timaha u daysan jireen una dhisi jireen sida barbaarta Soomaalida xoolo dhaqatada ah ay haatan u deystaan (Hamy 1882, b.:697 iwkd, Sergi 1897, b.:77, Max 1910, b.:39-40). Xoolo dhaqatada Soomaaliyeed waxay kaloo maanta isticmaalaan qori marka ay seexanayaan madaxa ay ku cuskiyaan si timaha uga wasakhoobin ama uga jajabin. Qorigaas waxaa la yiraahdaa *"barshi"*, waxaana la sheegay in Masaaridii hore ay iyagana isticmaali jireen qori 100% la mid ah kan Soomaalida isticmaasho, waxaa kaloo la yaab ah in Masaaridii hore qorigaas iyagana u yaqaaneen *"Barshi"* (Fiiri kitaabka *"Tarikh as-Sumal"*, bogga:7). Markaa ma Soomaalidii horaa eraygaas iyo qorigaas laga qaatay, mise Soomaalidaas ayaa Masaaridii hore ka soo amaahatay qorigaas iyo magaciisa? Jawaabta iyo xaqiiqda Allaa og, waxaase aniga ila tahay in Masaarida hore ay eraygaas iyo qorigaas sidaas qurxan loo qoray Soomaalida ka qaateen. Dhaqanka Soomaalidii hore ka dhaxashay Masaarida waa *"istunka"* ama dabshidka. Waxaa la yiri beeralayda Masaarida qaar ka mid ah ayaa sanad kasta bilawgiisa sameeyaa dabaaldeg la mid ah *"istunka"* Soomaaliyeed, sida Soomaalida oo kalana sanadka bilowgiisa shitaa dab oo ay ka boodboodaan (Fiiri kitaabka *"Taariikh As-Sumal"*, bogga 16).



# 3 XIRIIRKA BEECMUSHTAR EE DHULKA BOONT IYO MASAARIDA

In kastoo xaqiiq ahaan la la' yahay baaxadda iyo halkii uu ku yaalay dhulka loo yaqaanay Dhulka Boont hadana waxaa hubaal ah in dhulkaas ahaa dhul koofur ka xiga Masar, lagana helo waxyaalaha aad ay ugu baahnaayeen Masaaridii hore sida beeyada, meelahaas oo lagu gaari karay iyadoo badda loo sii maro kaliya.. Culumada darasta taariikhda Masaaridii hore waxay isku raaceen in xeebaha waqooyiga Soomaaliya ahaayeen dhulkii Masaaridii hore u taqaanay Boont (Maspero 1879, b.:9 iwkd; Naville 1894, b.:22, Breasted 1906-II; b.:-104).
Inta la og yahay, Masaarida waxay markii ugu horeeyay timid Geeska Afrika bilawgii Boqortooyadii Koowaad ee dhalisay ilbaxnimadii ballaarnayd ee Faraaciinta. Waqtigaas oo u dhaxaysay sanadihii 3546-3190 NCKH, ayay Masaarida bilawday inay xiiseeyaan xabagta udgoon ee ka timaado geedaha xijiga ee ka baxa Geeska Afrika. Geedaha xijiga ee Soomaaliya ka baxa wey badan yihiin, waxaana badankooda laga helaa waqooyiga Soomaaliya. Geedahaas waxaa ka mid ah yagcarta, moxorka iyo hadiga. Xabagta yagcarta waxaa la yiraahdaa *maydi*, xabagta moxorkana waxaa la yiraahdaa *beeyo*.
Xabagahaas udgoon waxay Masaaridii hore u isticmaali jireen in ay shitaan marka ay samaynayaan arrimo la xiriiro diintooda. Jaceelka iyo baahida joogtada ah ee Masaaridii hore u qabtay xabagahaas udgoon wuxuu xoojiyay xiriirka Masaaridii hore la lahayd Dhulka Boont, waxayna dadka Masaarida u arkayeen in dhulka xabagahaas ka baxo uu yahay dhulkii ilaahyada (To-Neter). Allaha Idil Sarreeya wuxuu yiri Isagoo tilmaamaya dadka fikradda noocaan ah aaminsan:
*"Kuwaasu waa kuwa khasaariyay naftooda, waxaana ka dhumay waxay been abuurteen"* (Suuratu Huud, b.: 21).
Cawaannimda Masaaridii hore waxay keentay inay raadshaan waxay ilaalhyo been ah oo ay maskaxdooda ka samaysteen. Waxay Masaaridaas gaareen inay yiraahdaan qaar iyaga ka mid ah iyo xataa qaar ka mid ah ilaahyadooda Faraaciinta ah inay ka yimaadeen dhulka Boont. Tusaale, mid ka mid ah magacyada ilaahyada Faraaciinta wuxuu ahaa *"Xuur"*, magacaan oo ka mid ah magacyada shimbiraha waaweyn oo ku nool Soomaaliya, dadka qaarna u garanayaan *"Shimbir-fircoon"* (Marzuq 1962, b.:29). Soomaaliduba way xushmeeyaan shimbirkaas, sida ku cad tix ka mid ah gabay dheer uu Maxammed Cabdalla Xasan u tiriyay faraskiisa Xiin Finiin, kuna yiri:
*Isagaan xateeyada lahaa xuurta ugu looge.*

Ismaaciil Mire ee ka mid ah ragga gabya wuxuu isna erayga *"xuur"* ku isticmaalay tix ka mid ah gabaygiisii ahaa "Xariggu Yeelkiis", tixdaas oo ah:

*Hadday **xuuri** shalay feenatay oo hawdii laga gooyay*
*Xaraashkiyo xigaalada luntiyo xarigga yeelkiise.*

Mar kale Ismaaciil Mire oo la hadlayay askar Soomaaliyeed oo Ingiriiska dabadhilif u ahayd wuxuu yiri:

*Nimanyahow askareed*
*Haddii aan eray **xuura***
*Oon aqligayga ka fiirshay*
*Iraahdoo idin waansho*
*Ibtilaa dhulka joogtee*
*Armaa lay qabsadaayoo*
*Awowgiir Dhaladiir*
*Afka ii gelisaan!*

Erayga Xuur waxaad kaloo ka heli kartaa weedho iyo erayo badan oo Soomaali ah waxaana ka mid ah "Daa-xuur" oo ah daanyeerada labka ah oo waaweyn. Sidaan dib u soo sheegidoonna daayeerkaan wuxuu ka mid ahaa xayawaanada uu safarkii Masaarida ee Hatshepsut ka qaatay Dhulka Boont, waxaana suuragal ah in Masaaridii hore iyo Soomaalidii hore aaminsanaayeen in daayeerkaa uu nabadgaliyay ama *"daayay"*, xuurta; sidaas darteedna loogu magacaabay *"daa-xuur"*.



Erayga *"xuur"* waxaad kaloo laga dhex helaa murti Soomaaliyeed oo tilmaanta noocyada haweenka oo ah:

1. *Xungruf laga tagay,*
2. *Xeeraggoys la eryey,*
3. *Xaaruflay orodda,*
4. *Xabeebley dhillo ah,*
5. ***Xuur** ilmo wadata,*
6. *Xaawo dhaqata,*
7. *Xaliimo naftaada ah.*

Waxaa kaloo la og yahay ilaahyada Masaaridii hore inay ka mid ahayd ilaahiyad cillin ah ee la yiraahdo *"Bees"* (Beys), lana aaminsanaa in laga keenay Dhulka Boont (Maspero 1909, b.:18). Ilaahiyaddaan Bees waxay ahayd ilaahiyadda dhalliinka. Magaca ilaahiyadda Bees wuxuu ka mid yahay magacyada rag ka mid ab-awalada Soomaaliyeed, faracooduna maanta deggan yihiin Geeska Afrika. Magaca *'Seda"* oo ah ilaahiyadda jaceelka ee Masaaridii hore isna wuxuu la mid yahay magaca mid ka mid ah ab-awalada Soomaaliyeed. Masaaridii hore waxay kaloo qabeen ilaahiyadda cirka ee Dhulka Boont waxaana loo yaqaanay Hathor. Eraygaan wuxuu la asal noqon karaa erayga Soomaaliga ah ee *"Habar"* (Ferrand 1903, b:17) maadaama Soomaalida hore ilaahiyadda cirka u taqaanay *"Habar-waaq"*. Magacaan danbe waa maanta loo adeegsadaa xiddigo yaryar oo ciiro ahaan samadda ugu muuqdo, oo afka Ingiriiska lagu yiraahdo *"Milky Way Galaxay"*. Haddii aragtidaan sax tahay waxaa si sahlan loo garan karaa sababta ugu badnaan dadka deggan Soomaalida waqooyi ay u leeyihiin ab-awallo magacyadooda ay ka bilawdaan *"Habar"* (Ferrand 1903, b:17).

Ilaahyadii Masaaridii hore ee Dhulka Boont laga keenay waxaa kaloo ka mid ah *"Min"* oo ah ilaahii degaanka Bari iyo Hoorus oo lagu tilmaamay inuu yahay "Libaaxii Dhulka Boont", waxaana la aaminsanaa inuu ku dhashay meel *"Outen"* la yiraahdo oo ku taal Dhulka Boont.

Ilaahyadaas mooyee waxaa la sheegay in qaar ka mid ah wadaadada Masaaridii hore markay xafladaha diiniga ah ka khudbaynayaan ku candacoon jireen in asalkooda uu ka yimid Dhulka Boont. Waxaa intaa raacaa in Masaarihii hore aaminsanaayeen in shimbirta ay qadariyaan ee *"Felix"* safar u aaday dhulka malmalka iyo beeyada ka baxaan ee Geeska Afrika iyo Jasiirada Sokotara, soo laabadkeediina ku nasatay geed beeyo oo ku yaalo Dhulka Boont halkaasna ay ku dhimatay. Sidaas ayayna beeyada Dhulka Boont u noqotay wax si gaar ah ay Masaaridii hore u tixbalshaan. Sidey ahaataba Masaaridii hore Soomaaliya waxay u haysatay dhul wada foox iyo ilaahyo ah, waxayna soo dhaweyn jireen cid kasta ama wax kasta oo ka yimaado Geeska Afrika.

Waqtiyadii ay bilaabanaysay ilbaxnimada Masaarida, dalkaasna ay ka talinayeen Boqortooyinkii Kowaad illaa tii Afraad, Masaarida kama soo doonan jirin Geeska Afrika maydiga, beeyada iyo hadiga ee badeecadaas waxaa Masar keeni jiray dadka Boontiga ah naftooda. Imaanshaha Boontiga ee Masar waxaa cadaynayaa in waqtigii ay talinaysay Boqortooyadii Afaraad (3100-2965 NCKH) nin Boont ah u shaqaynayay Cheop oo ah wiilka Boqor Khufu, boqorkaan oo ah kii dhisay haramka la yiraahdo Haram Weyne. Wagaas badeecadda dhulka ayaa la soo marin jireen (Fiiri kitaabada *"Tarikh as-Sumal"* 1961, b.:12-13; *"Al-Islam fi-Sumal"* 1973, b.:53, Hourani 1951, b.:17). Waqtigii ay talinaysay Boqortooyadii Shanaad (2958-2946 NCKH) ayayse Masaarida bilaabeen inay si toos ah iyaga u doontaan maydiga, beeyada iyo hadiga iyagoo badda raacayana safar u aadeen Geeska Afrika. Dhab ahaan looma yaqaano waxa Masaarida ku qasbay inay safarkaas dheer aadaan waxaase loo malaynayaa inay ugu wacneyd iyadoo maydiga, beeyada iyo hadiga qiimo saa'id ah looga iibin jiray Masaarida maadaama badeecadaas dhowr gacan ay isku soo dhaafi jirtay. Waxaa kaloo suuragal ah in waqtigaan ay ahayd waqtigii badmaaxiinta Masaarida u bislaadeen inay samaystaan doomo safar dheer gali kara, aqoontooda badda iyo degaanka Geeska Afrikana horumartay.



Boqor Sahure ayuu ahaa qofkii safarkii koowaad ee badda sii mara u diray Dhulka Boont si loogu keeno xabagyo udgaayo iyo waxyaalaha laysku dhayo ama daaweeyo sida malmalka. Safarkaan oo si weyn loogu

guulaystay wuxuu Dhulka Bunt ka keenay maydi cabirkeedu yahay 80,000; birciid ama bir-ajuuraan (electrum) oo cabirkeedu 6,000 iyo 2,6000 oo xirmo oo dhista qaaliga (Breasted 1905, b.:127; Hourâni 1951;62). Waxaa kaloo la sheegay in waqtigii Boqortooyadaan taliska Masar haysay in uu aad u wanaagsanaaday xiriirka dhaqanka ee ka dhaxeeyay Masaarida iyo Boont. Tusaale ahaan, waqtigii Boqor Isesi wuxuu khasnajga ilaaha la yiraahdo *"Burded"* Masar keenay niikiye (dancer) Boont ah si uu uga qaybqaato dammaashaadka loo dhigayo ilaaha Boqorkaas (Breasted 1906, b.: I-160-161).

Imaanshaha cayaartoyda Boont ee Masar imaanayeen kuma ekayn waqtigii Boqor Isesi, balse Boqor kasta oo Masar ah wuxuu isku dayi jiray in cayaartoy ka timid dhulka ilaahyada ay ka qaybqaataan xafladaha lagu maamuusayo ilaahyada Masar. Cayaartoyda gaagaaban oo Dhulk Boont waxay noqon kareen dad joog ahaan ka gaagaaban Masaaridii hore, waxaa kaloo ay noqon kareen dad da' ahaan u yar oo caruur ah maadaama boqoradu iyo madaxdu jecel yihiin cayaaraha dadka da'da yar ama caruurta ah. Aragtidaan danbe waxaa xoojinayaa dardaaranka xoogga leh uu Boqor Neferkere oo ahaa Boqorka Masarta Kore iyo tan Hoose uu siiyay sarkaal uu amray inuu u keeno qof Boont ah oo ka niikiya xafladda loo qabanayo ilaahyada Masar. Boqor Neferkere oo sarkaal la hadlayana wuxuu yiri:

*"Toos waa inaad u timaadaa maxkamadda (oo ah halka uu boqorka joogo), waana in ninkaas gaaban (ama yar) oo u niikinayo ilaaha si uu u farxiyo qalbiya Boqorka Masarta Kore iyo tan Hoose, ka keentaa dhulka ilaahyada isagoo nool, shoobshoobsan, oona fiyow. Markuu doonta kula soo raaco, waa inaad xushaa ragga ugu wanaagsan si ay geesaha uga fadhiistaan inta uu doonta saaran yahay, yuusan biyaha ku dhicinee. Habeenkii markuu hurdayo waa inaad xushaa ragga kuwa ugu fiican si ay teendhadiisa ula seexdaan, toban goorna habeenkii ay u fiirshaan. Haybadlahayga Boqorka ah wuxuu aragga qofkaas gaaban (ama yar) ka jecel yahay hadiyooyin kasto oo looga keeno Siinay iyo Boont. Haddii aad maxkamadda timaado adigoo kula socdo qofkaas gaaban oo nool, shoobshoobsan, fiyowna, Habadlahayga Boqorka ah wuxuu kuu qabanayaa waxaan loo qabanin khasnajigii ilaaha Burded (Bwrdd) ee waqtigii Isesi, waayo Haybadle Boqorkayga wadnahay uga taal si uu u arko qofkaas gaaban"* (Breasted 1906- I, b.:161).

Dardaaran iyo taxadir noocaan ah looma samayn lahayn qof weyn haba gaabnaadee. Waxaa kaloo halkaan nooga cad sida boqorada Masaarida uga tartamayeen la jirka iyo ag joogga dadka Dhulka Boont, oo waxaan aragnaa in sarkaalkaan la yiri in haddii qof Boont ah oo niikiyo uu nolol ku keeno la siinayo xoolo iyo darajo ka badan tii la siiyay khasnajigii Isesi ee keenay qof Boont ah oo u niikisa ilaaha *"Burded"*. Qaar ka mid ah maamulayaasha Masaarida ayaan ku qanci jirin aragga ay indhahooda ku arkayaan dad ka yimid Dhulka Ilaahyada oo iyaga naftooda ayaa dhulkaas siyaaro ahaan u aadi jiray. Qoraal ku yaalo qabriga Khui ayaa waxaa ku qoran hadal sarkaal




la yiraahdo Khnemhotep ku sheegay in isaga iyo Khui *kow iyo toban* jeer tageen Dhulka Boont, nabadna uga soo laabteen (Breasted 1906- I, b.:164). Boqortooyadii Lixaad ee Masar waxay sii waday xiriirkii Boont iyo Masar ka dhaxeeyay waxayna sii badisay safaradii badda ee tagayay Boont (Hourani 1951, b.:7). Waqtigii Boqortooyadii Lixaad ayay Masar soo saartay nooc cusub oo ah qoryaha lagu kaxeeyo doomaha, arrintaanna waxay xoojisay tayada iyo tirada beecmushtarka Masaarida la lahayd Dhulka Boont. Magaalo ku taal koofurta Masar oo la yiraahdo Elefantayn ayaa waxay noqotay rug beecmushtariinta Masaarida ay yimaadaan oo badeecadooda ka diraan ama ay keenaan (Breasted 1905, b.:142). Beecmushtarka Masar iyo Dhulka Boont wuxuu sii koray markii la dhisay magaalofurdo la yiraahdo Thebes. Boqor Mentuhotep II oo ahaa taliyihii Boqortooyadii Kow iyo Tobanaad, wuxuu khasnajigiisa guud ee Henu u diray Koseir oo ku taal Badda Cas si uu u dhiso doon ama doomo loo diro Dhulka Boont, waxaana la sheegay in safaradaas ay keeneen maydi, beeyo iyo hadiyooyin tiro badan oo uu ku faani jiray Boqor Mentuhotep II (Breasted 1905, b.:153; ; 1906- I, b.:208-210)).

Boqortooyadii Labo iyo Tobanaad (2000-1788 NCKH), ayaa Boqor Mentuhotep III u diray Boont sarkaal la yiraahdo Khentkhetwer (*Hnt-ht-wr*) waxaana la sheegay inuu safarkaas nabad ku soo laabtay.(Breasted 1906- I, b.:275). Waxaa kaloo jiray safar Boqor Sesostris II uu diray Boont, Boontina waxay noqotay meel Masaarida si wanaagsan u taqaano. Xiriirkaas wuxuuse hoos u dhacay markuu ciidamada "Hykos" ay qabsadeen Masar (Breasted 1905, b.:256).

Bilawgii Boqortooyadii 15aad ayuu dib u xoogaystay xiriirkii ka dhaxeeyay Masaarida iyo Boont, waxaana xusid mudan safarkii caanka ahaa ee Boqoradii Hatshepsut u soo dirtay Dhulka Boont. Hatshepsut waxay ahayd naag aad iyo aad u karti badan taas oo gaarsiisay in iyadoo yar ay aabaheed, Boqor Thothmes I. gacan ka siinaysay arrimaha maamulka boqortooyada. Intay yareed waxay u labisan jirtay sida ragga waxaana la ictiqaadsanaa in marka ay yareed ay caanaha ka nuugi jirtay saca ruuxaanig ah ee la yiraahdo Sac Hathor. Waxay xiran jirtay labiska ragga wadaadada ah, aabaheedna wuxuu ugu wici jiray sida qof lab ah oo wuxuu oran jiray *"Haybadle, gabadhayda"* (Naville 1894, b.:15-16). Si aan u ogaanno dhaqanka guurka Masaaridii hore, waxaan shaxda hoos ku muujinay laamolaamood muujinayo nidaamka ay isku qabeen iskuna guursan jireen Boqortooyadii ay ka dhalatay Hatshepsut.

Waxaad jaantuuska hoos ku qoran ku aragtaa in ayeeyada Hatshepsut oo ahayd boqorad la yiraahdo Aahhotep ay guursatay nin la yiraah Amenophis I oo qabay naag kale oo la yiraahdo Senseneb, naagtaasoo u dhashay wiil la yiraahdo Thothmes I. Hatshepsut hooyadeeda oo la yiraahdo Boqorad Aahmes ayaa iyadana waxay guursatay wiilkii isku aabaha iyo kala hooyada

ahaayeen ee Thothmes I, waxaana guurkaas ka dhashay Hatshepsut . Thothmes I wuxuu isna qabay naag kale oo la yiraahdo Mutnefert oo u dhashay wiil la yiraahdo Thothmes II.




Boqorada Hatshepsut waxay iyadana sida hooyadeed oo kale guursatay wiilkii isku aabaha iyo kala hooyada ahaayeen ee Thothmes II oo qabay naag kale oo la yiraahdo Isis. Hatshepsut iyo Thothmes II waxay dhaleen gabar la yiraahdo Hatshepsut I, Thothmes II iyo Isesina waxay dhaleen wiil la yiraahdo Thothmes III. Wiilkaan iyo gabadha isku aabaha iyo kala hooyada yihiin ee Hatshepsut I ayaa iyagana is guursaday, sidaas ayayna isku guursan jireen reer boqorka Masaaridii hore ( Naville, 1894, b.:14). Isku guursiga noocaan ah waxaa la yiraahdaa *"endogamy"* ama *"Guur-guri"*.

Boqoradaan Hatshepsut oo aabaheeda sidaa u jeclaa, waxaa kartideeda si fiican loo arkay markay gacanta ku dhigtay boqortooyada, ayna diyaarisay safarkii ugu magac dheeraa safaradii Masaarida u dirtay Dhulka Boont. Qoraalada laga dhaxlay safarkaas waxay noqdeen marqaatigii ugu horeeyay oo si cad u tilmaamay dabeecadda iyo degaanka dadka iyo dalka Boont; waxaana si fiican uga hadlay rag ay ka mid yihiin Naville (1894), Breasted (1906) iyo Rossini (1928). Safarkaan wuxuu si wanaagsan uu ugu tilmaaman yahay sawirada iyo qoraalada lagu hardhay darbiyada qabriga Hatshepsut ee la yiraahdo Dar el-Bahari (Daarul Baxaari). Qabrigaas oo la dhisay inta u dhaxaysay 1489 iyo 1469 NCKH, waa diiwaan dhagax ah oo aan la inkiri karin, si cadna u tilmaamaya xiriirka ballaaran ee u dhaxeeyay Masaaridii hore iyo Boont. Hatshepsut ayaa jeebkeeda ka bixisay kharajka ballaaran ee safarkaas ku baxayay, waxayna si aan la qiyaasi karin u jeclayd in Dhulka Boont looga keeno xabkaha udga oo lagu fooxiyo guryaha Masaarida, qabuurahooda iyo rugaha ilaahyadooda lagu caabudo.

Boqoradaan Hatshepsut waxay aaminsanayd in magaca Boont uu yahay asalka ruuxaaniyaddeeda. Qol ka mid ah qolalka Qabrigeeda Daarul Baxaari ayaa waxaa ka muuqda sawir caddaynayo asalka ruuxiga ah ee Hatshepsut. Sawirkaas waxaa laga arkayaa in markay dhalanaysay Hatshepsut, in hooyadeeda ku soo toostay ama ku soo baraarugtay iyadoo loo carfinayo fooxa Dhulka Boont. Arrintaan ayaa ugu wacnaa in Hatshepsut shaqsi ahaan



u maal galiso safarkaas, shaqsi ahaan u doorato hoggaamiyaasha safarkaas, hubiso bixidda iyo nabad ku soo laabashada safarkaas, caalamka iyo dadkeedana u soo bandhigto natiijooyinka safarkaas.

Hatshepsut si ay u hubsato guul ku dhamaadka safarkaas, waxay safarkaas madax uga dhigtay ninkii hoggaaminayay mashruucii ballaarnaa ee lagu dhisay qabrigeeda, magaciisana la oran jiray Senmut. Ninkaan waxaa la aaminsan yahay inuu kaaliye u ahaa boqoradda nafteeda (Max M. 1904, b:12). Hatshepsut waxay amar ku bixisay in la xulo badmaaxiinta waqtigaas kuwa ugu wanaagsanaa uguna aqoon badnaa, waxayna tiri waa in la dhisaa doomo waaweyn aadna u xoog badan. Doomahaas waxaa raacay askar, badmaaxyo, muruqmaalyo, qorayaal iyo farshaxanyaqaanno, wuxuu safarkaas badda ku jiray labo bilood.

Safarkaas wuxuu ku xirtay meel ku taalo waqooyi bari ee Soomaaliya una dhaxayso Caluula iyo Raas Casayr oo markii hore loo yaqiinay Madax-Maroodiille *"Raas Al-Fiil"*. Maspero (1909, b.:77) wuxuu qabaa in doomaha Masaarida ay ku xirteen tog biyaha badda ugu shuba meel u dhaxayso Madax-Maroodiille iyo Raas Casayr (Cape Guardfui). Hindi oo ah taariikhyahan Masri ah wuxuu sheegay in safarkii Hatshepsut ku xirtay Madax Maroodiille ama Ollog oo ah tuulo yar oo sideed kiilomitir galbeed ka xigto Raas Casayr (Fiiri kitaabka: *"Tarikh as-Sumal"*). Raad-awal-aqoolka (archeologist) la yiraahdo Chittick oo daraasad ku sameeyay waqooyi bari Somaaliya wuxuu sheegay in halkii badmaaxyada Masaarida ku xirteen ay tahay tuulo buburkeeda wali muuqda una dhaxayso Ollog iyo Raas Casayr lana yiraahdo Daamo (Chittick 1976, b.:123-124).

Waxaad aragtaa in meelaha ay culumadaan ay tilmaameen ay ku wada yaalaan waqooyi bari Soomaaliya, ayna yihiin meelo degaan ahaan aad isugu dhow. Waxaase raad-awal-aqoolayn ahaan (archeologically), degaan ahaan iyo ab-awal raac ahaan, xaqiiqda u dhow in badmaaxiinta Masaarida ay ku xirteen tuulada Daamo oo magaceedu ka soo jeedo Daame oo ah mid ka mid ah ab-awalada Soomaaliyeed, faraciisana maanta Soomaaliya ku nool yihiin.


Siday ahaataba, badmaaxiintii Masaarida waxay ku soo xirteen xeebta waqooyi bari ee Soomaaliya. Safarkaas ninkii hoggaaminayay, isla markaasna ahaa ninkii ay Boqoradda Hatshepsut soo dirtay iyo unug sideed askari ka kooban ayaa doomihii ka soo degay. Askarta waxay wateen faasas, warmo iyo gaashaamo, hoggaamiyaha askartuse halkii gaashaanka wuxuu ka watay fallaar. Hoggaamiyaha safarka Masaarida, si uu dadka Boont ugu muujiyo inuu dagaal u soconin ee waxa uu u socdo tahay beecmushtar ayuu hortiisa wuxuu dhigay karoor kuulal ah, baangado, midiyo iwm, oo ah waxyaalihii uu ka keenay Masar kuna rabayna in loogu bedelo waxyaalaha laga helo Dhulka Boont (Breasted 1906-II, b.:106). Martida waxaa qaabilay Boqorka Dhulka Boont, naagtiisa iyo saddex canug ay

dhaleen. Caruurta waxay ahaayeen labo wiil iyo hal gabar. Naagta Boqorka Boont waxay ahayd naag buuran suxulo buruurnimada ku darsatay dari waxayna saarnayd dameer ay saddex nimood oo Boont ah ay kaxeenayeen (Breasted 1906-II, b.:107). Waxaa halkaa ka cad in ab-awalada Soomaaliyeed sida abuulankooda haatan nool aad u jeclaan jireen naagaha darileyda ah, waqti sidaas aan u fogayna waaba la cayn jiray ninka qabo naag weyd ah oo daratoolay ah. Siday ahaataba Aayti oo ahayd magaca xaaska uu qabay Boqorka Dhukha Boont iyo caruurteeda iyo ninkeedaba waxay ka hortageen Masaaridii timid, ninka safarka Masaarida ka madaxda ahaana wuxuu Boqorka Dhulka Boont u dhiibay aqoonsigooda iyo farriintii iyo hadiyaddii Boqoradda Hatshepsut u soo dirtay (Naville 1894, b.:24). Boqorka Dhulka Boont waxaa la oran jiray *"Prhw"* (Breasted 1906-II, b.:107). Magacaan *"Prhw"* waxaa Ingiriis ahaan loogu dhawaqay Parohu (Naville 1894, b.:24) ama Perehu (Breasted 1906-II, b.:107), kala duwanaanshahaasna waxaa keenay iyadoo Masaaridii hore qoraaladooda aysan ku muujin jirin xuruufta shaqalada la yiraahdo (Abdalla 1988, b.:112). Magaca Naville oo ah Parohu ayaase xaqiiqda u dhow maadaama uu la mid noqon karo magac ay la bixi jireen dadka dhulkaan deggan oo ah Baroxow. Gabriel Ferrand wuxuu sheegay in Baraxow ahaa nin madow oo ka mid ah dadka Kowshiinta ah ee ku nool Geeska Afrika (Ferrand 1903, b:20). Boqor Baroxow markuu soo dhawaynayay safarka Masaaridaa wuxuu gacanta ku watay qori tuur leh

(boomerang) oo lagu dagaalo, billaawana suunkuu ugu xirnaa. Bilaawahaan wuxuu u ekaa kan maanta Soomaalida isticmaasho (Révoil 1888, b:299; Caniglia 1935, b:29). Waxaa xusid mudan in bilaawayaal u muuqaal bilaawaha uu watay Boqorka Dhulka Boont ay ka mid ahaayeen sawiro qadiimi ah oo ku hardhan meelo ka mid ah Buur Haybe oo ku taal Buur Hakaba agteeda (Graziosi 1940, jaantuuska 1 iyo 2).

Boqorka Boont waxaa lugtiisa ku jiray jijimmo bir jaallo ah ka samaysan looguna tala galay in marka la dagaalayo lugta gaashaan u noqoto. Boqor Baroxow markuu gartay in Masaarida colaad u imaan ayuu safarkii soo dhaweeyay, dadka Dhulka Boontana muujiyeen martisoorka tan iyo haatan lagu yaqaano Soomaalida. Martidaas si joogta ahna ayaa xaflado loogu samayn jiray, ninka badmaaxiintaas ka madax ahaana waxaa la dejiyay guriga martida ee Boqorka Boont (Fiiri kitaabada *"Tarikh as-Sumal"* 1961, b.:7; *"Al-Islam fi-Sumal"* 1973, b.:53). Waxaa la yiri waxaa aad u qurxanaa aragga dabiiciga ah ee meesha la dejiyay martidaas, waxayna ahayd meel taag ah oo dacaladeeda ku yaalaan geedaha laga guro beeyada, maydiga iyo hadiga, waxayna saarnayd badda. Farshaxanadii la socday safarka waxay sawir ku muujiyeen cimila wanaagga Dhulka Boont iyo roobka badan ee dhulkaas ka da'. Waxay cadeeyeen in Dhulka Boont uu waqtigaas ahaa dul doog badan kuna noolaayeen ugaar iyo dugaag kala duwan. Nabaadguurka iyo dhir la'aanta haatan dhulkaas ka muuqato waxaa keenay cimilo gaddoonka waqooyiga Afrika ka dhacay labadii kun iyo shantii boqol oo sano ugu danbeeyay (Ali 1977). Waxay badmaaxinta Masaarida sheegayn in dadka Boont ay deganaayeen aqallo la mid ah kuwa maanta Soomaalidu dhisato walow aqalada qaarkood ay ka dul dhisnaayeen raar korkeeda. Waxaa suuragal ah aqalada raarta ku dul dhisan inay yihiin kuwa beeraha lagu ilaalsho ama dadka beerayda ah ay dul degaan siibana waqtiga roobka da'o oo kaneecada badan tahay. Beerayda Soomaaliyeed ee Dhulka Gabbal deggan ayaa haataan wali dhistaa aqallo noocaas ah. Dadka Boont waxay dhaqan jireen lo' geeso yar yar oo la mid ah lo'da maanta Soomaalidu dhaqato; dameero, daanyeero iyo eeyo. Sawirka Masaaridii hore laga dhaxlay muujin maayo in dadka Boont ay dhaqan jireen geela oo ah xayawaan astaan u ah Soomaalida reer guuraaga ah, waxaase suuragal ah in waqtigaas geela soo gaarin Soomaliya maadaama ay jiraan aragtiyo qaba in Roomaankii hore ay ahaayeen dadkii ugu horeeyay ee Afrika keenay geela, Roomankaasna waa ka danbeeyay Masaarida.

Si loo wanaajiyo xiriirka dhaqaale ee ka dhaxeeya labada dal isla markaasna la xoojiyo kalsoonida dadka Boont u hayaan dadka Masaarida, ayaa



*Doomihii Boqoradda Hatshepsut ee la beecmushtari jiray Dhulka Boont, sawirkoodana ku yaalo darbiga qabri-qasriga la yiraahdo Daar Al-Baxaari ee ku yaal Thebes. Sawirka kore wuxuu muujinaayaa afar doon oo la raray iyo geedaha beeyada oo la rari rabo. Sawirka hoose waa doon rarmada ku socoto oo jawaano beeyo iwm. lagu rarayo. Waxaa kaloo ku raran daayeero (J.H. Breasted 1905).*

badmaaxiinta Masaarida teendhadooda ku soo dhaweeyeen duqowda Dhulka Boont, waxayna u dhigeen qado sharaf lagu cunay noocyada kala duwan ee cunnada Masaarida. *"Gacmo isdhaafay ayay gacalo ku jirtaayee"*, duqowda Dhulka Boont waxay iyagana siiyeen badmaaxyada Masaarida waxyaalo badan oo hadiyo ahaan loogu gaynayay Boqoradda Masar. Hadiyaddaas waxaa loo dhiibay ninkii madaxa ka ahaa safarka Masaarida. Badeeco badan ayay Masaaridii ka qaateen Dhulka Boont waxaana ka mid ahaa labo doon oo laga buuxshay talaalalada xijiga, jawaanno ka buuxaan xabagta udgoon ee maydiga, foolal maroodi, iyo daayeerada waa weyn ee la yiraahdo daaxuur.


Waxaa kaloo loo raray dhis iyo qoryaha ugu wanaagsan ee lagu dhiso guryaha, aleelo ama bocoollo, indho-kuul, eeyo, lo', hargo haramacad ee laga keenay koofurta Dhulka Boont, iwm. Geedaha xijiga ee talaal ahaanta loogu talagalay waxay ahaayeen soddon iyo saddex, lo'da doomaha sii qaadeenna waxay ahaayeen saddex kun iyo saddex boqol (Breasted 1906-II, b.:112). Doomaha waxaa kaloo hor u sii raacay qoysas Boont ah iyo caruurtooda. Doomaha waxaa kaloo la socday duqayda Boont qaar ka mid ah oo loogu tala galay in hadiyadda Boqorka Boont gacanta u gelshaan Boqoradda Hatshepsut. Waxaa la yiri safar noocaan loo sharfay waligiis kama dhicin Dhulka Boont, dad badan oo Boont ahna iyo caruurtooda ayaaba doomahaas sii raacay.



Doomaha markay tageen Masar, duqowda Dhulka Boont oo ay la socdaan badmaaxiintii safarka ka timid ayaa hadiyaddii ku wareejiyay Boqoradda Hatshepsut (Breasted 1906-II, b.:109). Si aan la qiyaasi karin ayay Boqoradda u faraxday, waxaase amakaag iyo waxaysan fillayn ku noqday markay aragtay talaalada geedaha xijiga la yiraahdo oo beeyada laga guro. Waxay Boqorada amartay in geedahaas lagu tilaalo beerta ilaaha la yiraahdo Amon (Naville 1894, b.:24-25), sabab cimilo awgeedse beeridda geedahaas laguma guulaysan. Sawirada ku qoran darbiyada qabriga Hatshepsut ee Daar al-Baxaari waxay kaloo si cad u muujiyeen muuqaalka dadka waqtigaas ku noolaa Geeska Afrika. Waxay sawiradaas ku cad in dad Boont ay isugu jireen dad timo adag iyo kuwo timo jilcan, oo ay wada ahaayeen dad Kowshiin ah (Naville 1894, b.:24; Junker 1921, b.:129; Clark iyo Brandt 1984, b.:179). Arrintaanna waa astaantii ugu horaysay oo muujinaysa in Soomaalidu, jaad kasta ha ahaatee, ay ab-awaladooda waligood ku noolaayeen Geeska Afrika, kana soo wada faracmeen Kowsh Bin Kancaan Bin Xaam Bin Nuux (CS).

Safarkii ballaarnaa ee Hatshepsut kuma dhamaanin xiriirka Masar iyo Boont, ee boqoradii ka danbeeyay waxay sii wadeen xiriirkaas dhaqan-dhaqaale. Waxaa la sheegay in Thothmes III (1479-1447 NCKH) safar u diray Dhulka Boont, safarkaasna uu keenay maydi engegan, 114 dibi iyo qaalmo lo'aad ah, 305 dibiyo waaweyn ah iyo tiro aan la qiyaasi karin oo foolal maroodi ah, dhis, maqaar haramacad iyo waxyaalo kale oo wanaagsan ee laga helo Dhulka Boont (Breasted 1905, b.:305).Waqtigii ay talinayeen Boqortooyadii 19aad ee Boqor Harmhab (1350-1315 NCKH) illaa Boqortooyadii 20aad ee Boqor Remses III (1198-1167 NCKH) safaro badan oo Masaari ah ayaa yimid Dhulka Boont waxayna ka qaadeen waxyaalo qiimo badan (Breasted 1905, b.:485-486). Waqtigaas wixii ka danbeeyay waxaa hoos u dhacay xadaaraddii Masaaridii hore, waxaana yaraaday xiriirkii Masaarida ay la halayd Dhulka Boont. Waxaase suuragal ah in xiriirkaas uu ka socday dhanka Boont maadaama ay jiraan waxyaalo muujinayo in doomo ay leeyihiin dadka Boont ay tagi jireen Masar. N de Garis Daves oo ah nin ku xeel dheer cilmiga raad-awal-aqoolaynta (archeology) ayaa sheegay in dadka Boont ay lahaan jireen doomo dabeesha kaliya ku socdo oo afafkooda wareegsan yihiin (Davies 1935: XXX, II-46-49). Doomahaas waxay ahaayeen kuwo yar yar oo qaado naaquudaha doonta, qofka haya qoriyo doonta lagu kaxeeyo, nin gacan siiya, rakaab labo qof ah iyo alaab.

Dad ayaa isweydiinayaa in haddii Soomaalida haatan joogta ay xadaaradaas lahayn, sidee ab-awaladooda xadaarad taas oo kale u lahaadeen. Su'aashaas jawaabteeda ma adka oo adduunka meeqa xadaarad oo waaweyn ayaa soo martay, faraca dadkaasna ay maanta ka qatan yihiin xadaaraddii ab-awaladooda, oo waatii hore loo yiri *"adduun waa labada galin ee maalinta"*.



*Sawirka doomahii dadka deganaa Dhulka Boont (N. de G. Davies 1935).*



Annaga haddaan Soomaali nahay waxaaba noo dheer qoraal la'aanta afkeenna, oo keenay in sahal lagu hilmaamo wixii tagay; kista la xusuustana ninba siduu rabo u sheego. Dadka sideenna oo kala ee iska hilmaama taariikhdooda, ma horamaraan balse falkii ab-awaladood faleen ayay falaan. Maahmaah Ingiriis ah ayaa tiraah: *"He who forgets the past is condemned to repeat"*.

Maahmaahdaan waxay la mid tahay maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraah: *"Tagte hilmaame, tubtii abkii ka tagow ku talaxyeeyaa"*.

Taasaa ugu wacan in Soomaalidii hilmaantay taariikhda ab-awaladooda inay maanta falaan waxay ab-awaladooda hore ay faleen, amaba ka sii liitaan.

# 4 XIXIIRKA BOONT IYO XADAARADIHII KALE EE ADDUUNKA.

Walow Masaarida ugu horeeysay dadka xiriirka la yeeshay Dhulka Boont, hadana iyaga kaliya kuma ekayn dadka xiisaynayay khayraadka dabiiciga ah ee Alle ku manaystay Dhulka Boont. Waxaa la aaminsan yahay in intay Masaaridii hore u diraysay doomaheeda Dhulka Boont, in dunida ka jireen xadaarado kale oo iyagana waqtigaas dhismayay waxaana ka mid ah xadaaradihii Meesobotaamiya, Faarisiinta iyo Hindiya. Sida boqortooyinkii Masaarida, ayay boqortooyinkaanna waxyaalo badan u baahnaayeen tanoo keentay in doomahooda u diraan wadamada ku yaala Badweynta Hindiya iyo Badda Cas. (Kunz iyo Stevenson 1908, b.:142; Dulac, lama yaqaan goortii la qoray, b.:2).

Waxaa la sheegay boqorkii Faarisiga ahaa ee la dhihi jiray Boqor Narsesh noolaana 293 NCKH uu xiriir la lahaa boqor la yiraahdo *"Zhand Afrika Shah"* oo deganaa bariga Somalia (Monneret 1938, F.G:314-315; Grottanelli 1953, b:44). *"Zhand"* waa eray Faarisi ah oo la micno ah *"madow"*, waana eraygii Faarisiinta waqtigaa noolaa u yaqiineen dadka deggan Geeska Afrika. Erayga *"Zinji"* ay Carabta u taqaanay Geeska Afrika waa isla eraygaas *"Zhand"* oo la Carabiyeeyay (Hourani 1951, b.:38). Boqortooyinkaan waxay xiisaynayeen luulka iyo murjaanka laga helo xeebaha bari ee Badweynta Hindiya iyo Badda Cas. Waxaa la sheegay in 300 NCKH, in Hindida murjaanka gudguduudan ka qaadan jirtay xeebaha waqooyi ee Soomaaliya (Sylvain 1937, b.:412).

Safaradaas Faarisiinta iyo Hindida mooyee, waxaa Geeska Afrika imaan jiray Carabta degta Yeman iyo Cummaan. Waxaa la sheegay in sanadkii 102 NCKH ay koox Reer Ximyar ah ay yimaadeen Muqdishow; waxaana Xamar markaas ka talinayay nin la yiraahdo Garbo (Fiiri kitaabka *"Bugyatul al-Amal"* 1955, b.:36). In kastoo Shariif Caydruus uu yiri *"Garbo"* waa naanaysta nin Carab ah oo la yiraahdo Ascad Ximiiri, hadana *"Garbo"* waa magac Soomaali ah, mana suuragsho inuu ninkaas noqdo Carab. Xiriirka Soomaalida iyo Ximyarta, waxaa cadaynayaa in ab-awalada Soomaaliyeed mid ka mid ah la yiraahdo *"Wacsi Jeelle Warwaaq Ximyar Garfuul Mursi Wardheere"*.

Carabtaan Reer Ximyar ayay u badan tahay inay ahaayeen dadka ugu horeeyay oo baxshay magaca Xamar iyo Muqdisho. Ma cadda sida uu u baxay magaca Xamar, waxaase jiraa sheekoxariiro badan oo ka hadlaya sida magacaas u baxay. Waa la sheegay in halka Xamar maanta ku taalo ay ahayd suuq la keeno geelaha, ariga iyo lo'da. Suuqaas waxaa laga heli jiray geel gudguduudan oo waaweyn oo Carabta ay aad u jeclaayeen. Maadaama



Carabta geelaas u taqaanay Xamar, ayaa suuqa lagu gado loogu baxshay *"Suuqu Xamar"* ama *"Suuqii Geela Gudguduudan"*. Geela noocaas ah oo gudguduudan tan iyo haatan wuxuu ku nool yahay gobolada koofureed ee Soomaaliya; waxaana la yiraahdaa *"Geel Garre"*. Suuqa Xamar waxaa kaloo Carabta ka qaadan jirtay ari tiro badan; sidaas darteed ayaana ari raratada Carabta suuqaas ugu baxsheen magaca labaad ee Xamar loo yaqaan oo ah *"Maqcadu-shaat"* (Goobtii Ariga) ama Muqdishow.

Siday ahaataba safarkii Carabta ee 102 NCKH yimid Soomaaliya Xamar uga sii gudbeen dooxada Wabiga Jubba. Dhulkaas waxay kula kulmeen dad la yiraahdo *Khashaar* (Werner 1915, Elliot 1925-26, b.: 245 F.G.). Sida magaca uu cadaynayo, dadkaan waxay ahaayeen dad qaamo waaweyn; waana sababtaas in qofka qaamaha waaweyn haatan Soomaalidu ugu yeerto *"Khashaar"*, cudurka qaamaha waaweeneeyana loo yiraah *"qaamo khashaar"*. Dadkaan Khashaarka ah waxay deganaayeen dhul ballaaran ee u dhaxeeya Badweynta Hindiya iyo xadka koofureed ee buuraha Xabashida, waana isla dadkaan dadkii ay la kulmeen Carabtii Soomaaliya timid qarnigii 7aad NCKD laguna sheegay *"Al-Kitaab Az-Zinji"*. Dadkaan waxay dhaqan jireen lo' iyo digaag, waxayna tacban jireen gallay, digir iyo masago (Cerulli 1957, b.:254).

Dadkaan Khasaarka oo dhawr iyo toban qabiil ahaa, waxaa ku jiray Riibi, keli iyo Digo oo faracooda wali laga helo Soomaaliya. Boqortooyadii dadka Khashaar waxay u kala go'go'day saddex qayb oo kala ah *"Boqortooyadii Magoosille"* oo caasimad u ahay Yurkut oo ah tuulo Luuq u dhow, *"Boqortooyadii Madanle"* oo reer guuraa u badnaa iyo *"Boqortooyadii Shuunguwaaya"* oo caasimad u ahayd Buur Gaabo oo koofur ka xigta Kismaayo. Riibiga iyo Digada mooyee waxaa dadka Khashaarka ka mid ahaa qabiilka Segeju (ama Sejuu) oo waqtigii Boqortooyada Shunguwaaya loo yaqaanay Kilyo Mohamed. Boqortooyada Shunguwaaya waxaa kaloo ka mid ahaa tolweenayaasha kala ah Garre Maxamed iyo Biimaal Maxamed (Baker 1949, b.:18-20, Grottanelli 1953, b:204-205 F.G. 4). Xiriirka Biimaalka la lahaayeen Boqortooyada Shunguwaaya waxaa cadaynayaa in reer ka mid ah Biimaalka la yiraahdo *"Boraas"* oo lahjadda sawaaxiliga ee dadka Shunguwaayaha qaarkood ku hadli jireen lagu yiraahdo *"Gob"* (Carletti 1910, b.:30 F.G.1).

Isbahaysiga *Magoosille* iyo *Madanle* iyo qaybo ka mid ah Muslimiintii Ummawiyiinta ee xeebaha Benaadir deganaa ayaa qarnigii 12aad ee NCKD, abuuray Boqortooyo la yiraahdo Ajuuraan. Cilmiga iyo farsamada Ummawiyiinta markii lagu xoojiyay xoogga iyo xoolaha Soomaalida ayaa waxaa samaysmay boqortooyo xoog badan oo qarnigii 12aad-17aad ka talinaysay dhammaan koofurta Soomaaliyeed iyo dhulka maanta la yiraahdo NFD (Dhulka Soomaaliyeed oo gacanta ugu jira Keenya). Arsamay waa magaca asal ahaan loo yaqaanay dadka maanta la yiraahdo Ajuuraan

(Carletti 1910, b.:28). Qaar ka mid ah Shunguwaayaha oo la qabsan waayay isbedeladii dhaqan-dhaqaalee ee Boqortooyadii Arsamay waxay qasab ku noqotay inay u guuraan Keenya, maadaama Soomaalida badankeed ku biirtay Boqortooyada Ajuuraan oo maalinba maalinta ka danbayso sii xoogoobaysay.

Dadka Soomaaliya yimid waxaa kaloo ka mid ah Giriigga iyo Roomanka 300 sano NCKH qabsaday dalka Masar, waxayna labadaan dawladood bilaabeen in doomahooda u soo diraan Badda Cas iyo Khooriga Cadmeed si ay u soo qabsadaan maroodiyaal lagu dagaal galo, kana hortago ciidamada moroodiyaasha Siiriya oo waqtigaas Masar qatar ku haayay (Wainright 1947, b.:144). Boqol sano ayay ciidamada Giriigga ee Masar deganaa maroodiyaal ka daldalanayeen Geeska Afrika, wixii intaas ka danbeeyayse waxay bilaabeen inay Geeska Afrika ka qaataan foolasha maroodiga, qolofka diidiinka, foolasha wayisha, maydiga iyo alaab khayriin oo kale ee Geeska Afrika laga helayay (Blumner 1879, b.:375-378). Giriigga iyo Roomanka waxay gaareen inay sameeyaan iskaashatooyin gaar ah oo u qaabilsan beecmushtarka lala leeyahay "Dhulka Fooxa" oo ahaa magacii Giriigga iyo Roomanka u yaqiineen dhulkii hore loo dhihi jiray "Dhulka Boont". Beecmushtarka Giriigga iyo Roomanka kuma ekayn Soomaalida waqooyi kaliya ee waxay beecmushtarkooda ku fidiyeen dhammaan xeebaha Soomaaliyeed ee ku yaal Badweynta Hindiga (Desanges 1978b.:228-229; 299-301).



Eratostene oo noolaa 200 NCKH, isla markaasna ahaa mas'uulka maktabada Aleksandariya (Masar), wuxuu xeebaha waqooyi ee Soomaaliya ku magacaabay *"Costa Cinnamomifera"* ama Xeebta Fooxa (Vicinanza 1910; b:7-8). Akhbaar waafi ah ee la xiriira xiriirka Giriigga iyo Roomanka la lahaayeen Geeska Afrika waxaa laga helayaa qoraaladii ay qoreen rag ay ka mid yihiin Agatharchides oo noolaa 130 NCKH iyo Strabo oo noolaa 20 sano NCKD. Raggaasi waxay sheegeen in Geeska Afrika ay deganaayeen Kowshiin la muuqaal ah dadka haataan deggan Soomaaliya, waxayna intaas ku dareen in dadkaasi ay isugu jireen kuwo dhaqda eeyaha, qaar cuna malayga, qaar cuna ayaxa, qaar cuna hilibka maroodiga iyo qaar kaloo cuna diidiinka. Waxaa jiray dad ku nool hilibka xoolaha kaliya cabana dhiigga xoolaha. Soomaalidaas ma cuni jirin hilibka doorada ama digaagga. Waxaa jiray dad qaaqaawan iyo dad xiran maqaar watanna gaashaan. Dadkaasi qaarkood waxay u gudnaayeen sidii Masaaridii hore. Agatharchides wuxuu kaloo sheegay in dadka Geeska Afrika u deganaayeen reer reer, reer kastana uu lahaa nin kulul oo madax u ah. Ninkii la galmooda xaaska ninka madaxa reerka ah waxaa lagu casaarayay neef ido ah. Duqowda reerka waxay cabi jireen biyo lagu daray malab, halka dadka kale ay ka cabi jireen biyo laga soo miiray dhirta. Agatharchides wuxuu yiri haweenka Geeska Afrika waqtigaa ku noolaa si qurxoon ayay indhaha u kuulan jireen, qoortana waxay ku xiran jireen aleelo. Aalaaba ragga waxay ku dagaali jireen daaqa oo marka hore waa isfeeri jireen ka dibna dagxaan ayay isku tuuryeen jireen. Haddiise dagaalka kululaado, haweenka ayaa ragga soo dhexgali jiray raggana ka codsan jiray inay dagaalka joojiyaan ee nabadda la soo celsho. Agatharchides wuxuu sheegay in dadka Geeska Afrika ay meedkooda duugi jireen, qofka dhintayna waxay madax iyo minjiba kaga duuduubi jireen mayrax, ka dibna waxay dusha ka saari jireen dhagxaan iyagoo yoomaya ama hadalo sheegaya. Qofka marka la duugo waxaa qabriga korkiisa la saari jiray geeso ari, markaas ka dibna ayay dadka kala tagi jireen. Dadka deganaa Geeska Afrika waxay safri jireen habeenkii, haddii aysan safar ahaynna waxay habeenkii gaar fadhiisan jireen dabka waxayna iyagoo heesayo ilaalin jireen xoolahooda (Huntingford 1989b.:36-37).

Qoraal kan Agatharchides ka danbeeyay oo isna aad u xiiso badan waa kii la qoray dhammaadka qarnigii koowaad ee dhalashada NCKD. Qoraalkaan oo cinwaankiisu yahay *"The Periplus of the Erythrean Sea"* ama "Badmeerka Badda Cas" wuxuu si ballaaran uga hadlayaa xiriirka beecmushtari ee ka dhaxeeyay Roomaanka degay Masar iyo Geeska Afrika (Schoff 1912, b:22-28). Qoraalkaan waxaa la qoray waqti uu dib u soo xoogaystay beecmushtarka ka jiray magaalo furdooyinka Soomaaliya. Qiimaha ballaaran uu qoraalkaan leeyahay awgeed ayaan waxaan halkaan idinkugu soo koobaynaa xubnahiisa ugu muhiimka ah:



*Hor iyo horaanba, waqti ku aadan 30 ama 70 sano NCKD, ayay maraakiibta Roomanka ka tageen magaalo furdo la yiraahdo "Myos Hormus" oo loo malaynayo inay u dhowdahay magaalo furdada haatan la yiraahdo Abu Sha'ir oo 27° 23' Waqooyi ka xigto Dhulbaraha, 33° 35' Bari ka xigto loolka London. Barta ay ku taalo magaaladaan waxaa loo qori karaa 27° 23' W, 33° 35' B iyadoo xarafka "W" uu ka taagan yahay waqooyi ka xigto Dhulbaraha, xarafka "B" uu ka taagan yahay bari ka xigta loolka London. Wixii haatan ka danbeeyana waxaan bar juqraafiyeedka magaalooyinka ku tilmaamaynaa xuruuftaas.*

*Safarkaas Roomanka ah si toos ah uma soo aadin Geeska Afrika ee waxay ku xiranayeen magaalo furdooyinka ku yaalo Badda Cas. Magaalo furdada Soomaaliyeed ee ugu horaysay oo ay ku soo xirteen waxay ahayd "Awal" oo ku taalay meesha haatan la yiraahdo Zaylac (11° 22' W, 43° 28' B). Waxaa haatan jirtaa tuulo yar oo Zaylac waqooyi ka xigta walina wadata magaca Awal. Eraygaan Awal waxaa kale uu yahay magac ka mid ah raggii ab-awalada Soomaaliyeed ahaa, faracooduna haatan ku nool yihiin waqooyiga Soomaaliya.*

*Waqtigii Roomanka imaanayeen, magaalada Awal ma lahayn furdo wanaagsan sidaas darteed doomaha yar yar oo kaliya ayaa ku soo xiran karay furdadeeda. Awal waxay lahayd suuq lagu iibiyo alaabo kala duwan oo isugu jira kuwo dhalo ka samaysan iyo cabitaan laga miiray miraha canabka ee laga keenay Diopolis (Thebes). Waxaa kaloo suuqaas lagu iibin jiray dhar xul ah, haruur iyo daasado yar yar. Waxaa kaloo la sheegay in dadka deggan Awal ay aadi jireen Ocelis iyo Muza (oo*

*haatan la yiraahdo Mookha), meelahaasna gayn jireen beeyada, foolasha maroodi oo yar yar, qolofka diidiinka iwm.*

*Magaalada labaad ee Soomaaliya uu safarkii Roomanka ay tageen waxay ahayd* **Malao** *oo haatan loo yaqaano Berbera (10° 25' W, 45° 05' B). Dadka ku nool Malao waxay la mid ahaayeen kuwa ku nool Awal, walow kuwaas ay ka deganaayeen kana xeer ilaalin badnaayeen. Suuqa Malao waxaa lagu gadi jiray alaab la mid ah kuwa lagu iibsho suuqa Awal, waxaase Malao laga helayay daawooyin badan, koobabka biyaha lagu cabo, dahab, qalin iyo jaakado nadiif ah oo midabaysan lagana keenay Arsinoe oo ku taalay Masar. Dadka Malao deggan waxay dhoofin jireen xabagta xudayga iyo maydiga (Watt 1889 b.:336-369).*

*Safarkii Roomanka markay ka tageen Malao labo barina badda ku sii jireen ayay ku xirteen jasiirad yar oo waqooyi ka xigto magaalofurdo la yiraahdo* **Mundu**. *Waxaa hubaal ah in magaalda la sheegayo ay tahay Xays (10°53' W, 46°54' B) maadaama waqooyiga Xays ku taalo jasiiro yar oo la yiraahdo Jasiiradii Xays. Astaamaha cadaynayo in Roomankii ay yimaadeen magaalada Xays, waxaa kaloo lagu ogaaday iyadoo magaaladaas laga helay dhariyo iyo alaab kale ay Roomaanta isticmaali jireen qarnigii koowaad illaa kii shanaad ee NCKD ka dib (Chittick 1981, b.:187-188). Ugu badnaan quraaradaha laga helay waqooyiga Soomaaliya waa kuwii la isticmaali jiray qarnigii koowaad ee NCKD, waxayna isku xilli yihiin waqtigii Roomanka ay yimaadeen waqooyiga Soomaaliya. Mundu waxaa laga dhoofin jiray xabagta moxorka.*

42 *Markuu safarkii ka tagay Mundu wuxuu saddex ama afar bari ka dib gaaray* **Mosyllon** *oo maanta loo yaqaano Raas Xantara (11°28' W, 49°35' B). Mosyllon waxay waqtigaas ahayd magaalo furdo weyn leh, kuna caan ah beeyada, maydiga iyo moxorka. Waxaa ku soo xiran jiray maraakiib waa weyn waxaana laga dhoofin jiray noocyo kala duwan oo xabag ah, qolofka diidiinka, foolasha maroodiga, iwm. Magaaladaan waxaa dibedda uga imaan jiray alaabta ka samaysan naxaasta, xadiidka, dhagxaanta laysku qurxiyo iyo alaabo la mid ah kuwa laga helo magaalooyinkaan hore u soo sheegnay.*

*Safarkii markuu ka tagay Mosyllon uuna labo bari badda ku sii jiray, waxay arkeen wabi ay u baxsheen "Wabigii Naylka Yaraa". Waxay kaloo arkeen il biyo macaan ka soo burqanayaan iyo banaan yar oo ay ka baxayaan geedo waaweyn oo ah kuwa xididada ka soo deysta laamaha. Intaa ka dib waxay sii mareen madaxa waqooyi bari ee Soomaaliya oo la yiraahdo Maroodiile iyo khoori yar oo saaran. Wabi la yiraahdo "Wabigii Maroodile" ayaa khoorigaa badda uga shubaa. Khoorigaas waxaa saaran dhul ballaaran ay ka baxayaan geedaha laamaha xidid ka daysta, waxaana halkaas ku yaalay magaalo furdo la yiraahdo Akannai.*

*Waxaa la yiri wabiga Roomanka ay ku magacaabeen "Wabiga Naylka Yar" uu haatan engegay iskuna bedelay tog la yiraahdo Togweyne (11°30' W, 49°55' B) oona ag mara Jebel Haima. Banaanka yar oo ay ka baxayaan geedaha waaweyn ee xididada ka soo deysta laamaha, una dhow wabiga waa Bandar Muriya (11°40' W, 50°25' B). Meesha maroodile lagu magacaabay waa Cape Guardafui ma Raas al-Fiil. Magaalofurdada Akannai waxaa haatan la yiraahdaa Caluula (12°00' W, 55° 42' B) maadaama meel Caluula u dhow ku yaalo balli ay ka baxaan geedaha laamaha xididka ka daysta (Bretzl 1903, b.:112-113) Akannai waxaa laga dhoofin jiray xabag udgoon oo aad u fiican.*

*Marka Akannai la dhaafo xeebta dhanka koofureed ayay u leexanaysaa waxaana la tagayaa suuqa lagu kala iibsado xabagta udgoon oo la yiraah* **"Spice Market"** *ama Suuqa Fooxa. Aad bay u adkayd ku xirashada furdada magaaladaan, waayo waxaa ka dhacaa dabaylo iyo duufaano xoog badan badan. Dadka deggan magaalofurdadaan way yaqaaneen marka ay duufaanta soo socoto oo biyaha hoose ee badda ayaa calaw isku bedeli jiray. Astaanta duufaanka marka la arko, dadkoo idil waxay u yaaci jireen buur magaalada u dhow, buurtaasaana laga dugsan jiray dabaylaha iyo duufaanta xoogga badan. Magaca buurtaas wuxuu ahaa* **Tabae**, *oo ka yimid erayga "Tabay" oo la micno ah "xeeleeyay". Dugaalidda buurtaas waxay ahayd xeelada lagu yareenayay dhibaatada duufaanta iyo dabaysha.*

*Halka Roomanka ku tilmaameen magaalo furdada "Spice Market" waa Daamo, buurta Tabae la yiraahdana waa Raas Shenaghef. Baaris raad-awal-aqoolaynis (archeological research) ee lagu sameeyay halkaasna waxaa lagu helay dhariyo la mid ah kuwii Roomanka isticmaali jireen (Chittick 1976, b.:124; 1981, b.:188). Sida aan hore u soo sheegnay Daamo waa halkii ay ku soo xirteen safarkii Masaarida oo ay soo dirtay Boqoradii Hatshepsut, waana halkii uu ku noolaa Baraxow oo ka mid ah ab-awalada faracooda maanta ku nool yihiin dhul ballaaran ee ku yaal Geeska Afrika. Sababta waayihii Roomanka imaanayeen Daamo u ahayd "suuq" hase yeeshee u ahayn "magaalo" waxaa ugu wacnaan karay dadka oo dhib ku qabay duufaanada joogtada ah ee halkaas ka jiray. Dhibaatooyinka duufaanadaas waxaa sii cusleeyay nabaadguurka iyo roob yarida dhulkaas ku dhacay wixii ka danbeeyay safarkii Masaarida. Arrin kale oo xiiso leh waa iyadoo "Godka Baroora" ee Soomaalida qaar aaminsanyihiin inay tahay halkii ab-awalkooda ku soo xirtay markuu Carabta ka yimid ay ku taalo meel ka mid ah Buurta Cadde ee u dhaxayso Daamo iyo Beyridà (Ferrand 1903, b:68). Ab-awalkaan waxaa la aaminsan yahay inuu guursaday gabar uu dhalay nin la yiraahdo Daameedle Aji (Zoli 1927, b.:261), oo sida magaciisa muujinayo uu ku jiro erayga Daame oo ah oday kale oo ka mid ah ab-awalada Soomaaliyeed. Siday ahaataba, halkaan waxaa nooga cad in Daamo iyo degaanka u dhow Soomaalida muddo dheer deganaayeen isla markaasna degaankaas si wanaagsan looga yaqaanay dhulka Carabta. Daamo waxa laga doofin jiran beeyada, moxorka iyo maydiga ugu wanaagsan waxayna dibadda ka keensan jirtay waxyaabaha magaalooyinkii hore aan u soo sheegnay dibadda ay ka keensan jireen (Casson 1980, b.:496; 1984, b.:228-229).* 43

*Safarkii Roomanka markii Tabai ay ka tageen cabbaarna sii socdeen ayay waxay ku xirteen magaalofurdo la yiraahdo* **Opone** *oo haatan loo yaqaano Xaafuun (10°25' W, 51°25' B). Magaca Opone wuxuu ka imaan karaa "Hoboone", ka tagidda xarafka "H" na waxaa ugu wacan iyadoo dadka Roomanka ah aysan karin xarafka "H". Qof kasta oo ajnabi ah wuxuu si sahlan isugu khaldi karaa dhawaqa "haboone" iyo*

*"hoboone", labadana waxay cadaynayaan meel ka wanaagsan meelaha u dhow. Maadaama magaalada Opone ay ka dabeel yareed Daamo, kana qarar yar tahay dhulka ka koofureeyo ama galbeedka ka xiga, ayaa waxaa suuragal ah in lagu magacaabay "Haboone" ama "Hoboone".*

*Baaris raad-awal-aqoolayn (archeological research) ee lagu sameeyay Xaafuun waxaa laga helay alaabo la mid ah kuwii ay isticmaali jireen Roomanka qarnigii koowaad illaa kii saddexaad ee NCKD (Chittick 1976, b.:120-122), arrintaanna waxay cadaynaysaa in dadka halkaas deganaa xiriir la lahaayeen Roomanka. Opone waxay ka mid ahayd furdooyinka waqtigaas Geeska Afrika ugu caansanaa oo ay ku soo xiran jireen doomo ka yimaada Carabta iyo Hindiya, laguna kala bedesho badeecooyinka. Opone sida magaalofurdooyinka kale ee Soomaaliya waxaa laga heli karay badeecooyinka Roomanka, Carabta, Hindida iyo kuwa Soomaalida. Sidaas darteed doomaha ka yimaada Hindiya oo sida bariidka, subagga, saliidda sisinta, qasabka sonkorka iwm, waxay alaabtoodaas ku bedelen jireen alaabta Roomanka ama Carabta ama Soomaalida ee laga helo suuqyada magaalo furdooyinka Soomaaliya. Badmaaxiinta Roomanka oo iyagana alaabtooda keeni jirey Soomaaliya, waxay suuqyada Soomaaliya ka qaadan jireen alaab Hindiya laga keenay oo taalay Soomaaliya. Safarkii Roomanka markay Opone ka tageen oo lix maalmood koofur u shareecayeen ayay waxay tageen xeebo ay ku magacaabeen* **"Small and Great Bluffs"** *ama "Xeeb-qaraleyda Yarey iyo Xeeb-qaraleyda Weeyney". Dhulkaan waxay Soomaalida u taqaan "qaraley" oo la mid ah magacii Roomanka u baxsheen degaanka u dhaxeeya Eeyl iyo halka togga Xolob badda ka galo. Dhulkaan wuxuu ahaa lama degaan mana lahayn furdooyin.*

*Safarkii Roomanka markay xeebaha Qaraley ka tageen oo ay sii socdeen lix bari ayay mareen degaanno xeebahooda ciid ama xaano wada ah; waxayna degaankaan ku magacaabeen* **"Small and Great Beaches"** *(Xeebxaano Yaray iyo Xeebxaano Weyney). Xeebahaas xaanada ah waa kuwa u dhaxeeya Raas al-Khyl iyo Warshiikh (2°18' W, 45°48' B). Foggaanta guud ee u dhaxayso Xaafuun iyo Warshiikh oo ah 600 oo maylka badda ah wuxuu la'eg yahay qiyaasta 12ka maalmood oo ay Roomaanka ku qaadatay inay isaga safaraan inta u dhaxayso Xaafuun iyo Warshiikh (F.G. halka mayl ee badda waa 1.852 kiloomitir, sidaas darteed Xaafuun iyo Warshiikh waxay isku jiraan 1111.2 km).*

*Marka Warshiikh ay dhaafeen, safarkii Roomanka wuxuu arkay ama la kulmay dhul aad iyo aad u furdo badan, degaankaana waa kii Farisiintii hore ku magacawday Benaadir. Erayda Benaadir waa jamaca erayga Bendar oo afka Faarisiga ah lagu yiraah "furdo". Carabtii Soomaaliya timid Faarisiinta ka dib, ayaa iyagana dhulkaas ku magacaabay magacii Faarisiga ahaa ee "Benaadir". Furdadii ugu horeesay ee Benaadir oo ay Roomanka ku xirteen waxay ahayd* **"Serapion"** *oo ku tiil meesha maanta ay ku taalo Xamar ama Muqdishow. Magaca "Serapion" wuxuu ka yimid "Seerebiyoon" (soohdin biyo leh). Sababta deegaankaan "Seerebiyoon" loogu baxshay waa iyadoo bacadka galbeedka ka xiga Xamar uu soohdin u yahay dhuldeexeedka Xamar iyo dooxada Wabiga Shabeelle. Maadaama Wabiga Shabeelle*



*uu ag marayay bacadkaan soohdinta ah, bacadkaas wuxuu ahaa mid biyo cabban oo sahal biyaha looga helo. Degaanka uu ku yaalo bacad soohdimeedka biyaha leh ayaa waxaa la yiraahdaa "Seera-biyoon" oo ah magacii uu ka yimid "Serapion".*

*Ku magacaabidda dhulkaan loogu magacaanay "Seerebiyoon" waxaa kaloo laga fahmi karaa taariikhda juqraafiga iyo jiyoolojiyada ee dhulka u dhow Xamar. Waxaa cilmiga jiyooloojiga lagu ogaaday in Wabiga Shebeelle uu ku dul yaalo dhulqarar (fault) ka yimaada Gabbal, soo dhex maro Hiiraan iyo Shabeelaha Kore, Xamar waqooyigiisa baddana ka galo (Rapolla ikk. 1995, b.:266, Sommavilla ikk. 1993, b.:389-396). Maadaama Wabiga Shabeelle uu ku dul samaysmay dhulqararkaas, wuxuu isna badda ugu darsami jiray Xamar waqooyigiisa. Markuu bilawday nabaadguurka dhulka, bacaadna fadhiista dhuldeexeedka, waxaa si tartiib ah u oodmay meeshii wabiga badda uga darayay, biyaha wabigana qaar waxay u leexdeen koofur inta kalana washaaqo ahaan ayay u biyeeyeen bacadkii kala galay badda iyo dooxada wabiga. Bacaadkaas Xamar ku agyaalo oo soohdinimadii ku darsaday washaaqanimo ayaa waxaa la yiraahdaa "Seerebiyoon". Degaanka u dhow Warshiikh ee la yiraahdo "Ciidda Bashaqle" ayaa micno ahaan u dhow erayga "Seerabiyoon", waxaana suuragal ah in Warshiikhba ahayd halkii ay safarkii Roomanka ku tilmaamayn Seerabiyoon (Caniglia 1935, b.:19). Erayga "war" ee ku jiro magaca "Warshiikh" wuxuu cadaynayaa in deegaankaas hore ugu yaalay "war" si joogta ah biyo looga helo. Wartaas oo haatan bacadka duugay, waxay ka mid ahayd meelihii Wabiga Shabeelle uu ku biyo shubi jiray markii uu ka xirmay halkii badda uu uga darmi jiray (Xaqiiqdase Allaa Og).*

*Roomanka markay ka tageen Serapion waxay durbaba gaareen magaalofurdo kale oo la yiraahdo* **"Nikon"** *oo haatan la yiraahdo Baraawe. Magaaladaan waxay ahaan jirtay meel uu dego mid ka mid ah ab-awalada Soomaaliyeed oo la xushmeeyo, waana sababtaas in magaaladaas loogu yeero "Bar-aaw". Dhulka Nikon ama Baraawa koofur ka xigo wuxuu ahaa dhul wabiyo badan oo illaa todobo wabi lahaa. Wabiyadaas tirada badan waxaa keenay roobabka badan oo dhulkaas ka da'i jiray iyo iyadoo Wabiga Shabeelle oo ka soo leexday Xamar ku fatahay togag badan oo koofurta ku yaalay qaarkoodna badda ku biyo shubi jiray. Togaggaas oo haatan engegay ama engegi raba waxaa ka mid ah Wabi Goof, Fardheere iyo Majeera oo dhammaantood ku yaala Shabeelaha Hoose. Farta Majeere waxay badda uga dari jirtay meel Rakhshey (04° W, 52' B) bari uga aadan. Saddexdaan tog ee kor ku qoran waxaa weheliyay Wabiga Jubba iyo saddex tog oo kale ee ku yaal Kismaayo koofurteeda. Togaggaan ee haatan engegay waxaa Laaq Badan, Caanoole iyo Hola Wajeer (Grottanelli 1953, b.:1). Roomaanka markay wada mareen xeebaha Soomaaliyeed waxay u gudbeen xeebaha Keenya iyo Tanzaaniya waxayna gaareen magaalofurdo la yiraahdo* **Rhapta** *oo haatan loo yaqaano Dar al-Salam.*

Safarkii Roomanka mar uu ka hadlayay dadka deggan Geeska Afrika wuxuu sheegay in magaalooyinka waqooyi ka xiga **"Spice Market"** (Daamo) ay deganaayeen dad "Barbar" ah wixii halkaas koofur ka xigana deganayeen dad ay ku magacaabeen "Azania". Dadkaan waa ka jir waaweynaayeen

Barbarka hase yeeshee muuqaalkooda kalama duwanayn, waxayna wada ahaayeen Kowshiin. Sababta Roomanka ugu magacaabeen *"Azania"* dadka Damo iyo wixii ka koofureeya deggan waa iyadoo erayaasha Azan iyo Zinji ka yimideen Zhand oo ah magacii Faarisiinta u yaqiineen dadka deggan Bariga Afrika. Taariikhyahanka la yiraahdo Murdock (1959, b.:205) wuxuu qabaa in farqiga u dhaxeeyay Barbarka waqooyiga lagu tilmaamay iyo Azaniyiinta koonfurta uu yahay mid dhaqan-dhaqaale. Wuxuu yiri Soomaalida Barbarka lagu tilmaamay ay xirfad iyo aqoonba la mid ahaayeen dadka run ahaanta Barbarka la yiraahdo oo deganaa waqooyiga Afrika, halka Soomaaliga Azaniga ah ay ahaayeen Kowshiin ku nool nolosha bidaa'iga ah (megalithic cushites). Farqiga dhaqan-dhaqaale ee Barbarka iyo Azaniga waxaa keenay iyadoo Soomaalida Barbarka lagu tilmaamay ee waqooyiga deggan muddo dheer xiriir la lahaayeen xadaaradaha adduunka waqtigaas ugu waaweynaa sida xadaaraddii Faraaciinta, Faarisiinta, Hindida, Giriigga iyo Roomanka, halka Soomaalida Azaniga ah ay dhifdhif ula kulmayeen dad ka socda adduunka waqtigaas horumarsanaa. Farqi la'aanta barbarka iyo Azaniga waxaa kaloo cadeeyay Abdul Hassan Ibn Hussein Ibn Ali Al-Mas'udi oo ka mid ahaa ragga Carabta ah oo Waqtiyadii Dhexe looga danbeeyay aqoonta Soomaaliya. Al-Mas'udi wuxuu sheegay in dadka Zinjiga oo Roomanka u yaqiinayn Azania ahaayeen dad badan oo uu barbarka ka mid yahay, farqina uma dhexayn iyaga iyo Zinjiga (Davidson 1959, b.:153).

Dadka jirka waaweyn ee bariga iyo koofurta Soomaaliya Roomanka ku arkeen waxay noqon karaan faraca Yahaabuur Samaale (Collucci 1924, b.: 90-91, 112) oo sida magacooduba tilmaamayo ahaayeen dad ka waaweyn dadka la jaadka ah (Yaasiin C. K. 1976, b.:472).Ab-awalda Soomaaliyeed mid ka mid ah oo magaciisa la yiraahdo Goweydi ayaa la sheegaa in uu ahaa nin aad iyo aad u xoog badan, oo isaga kaligiisa awooday inuu dilo oo afar boqol oo qof; wuxuuna kaligiisa cuni karay hal geela, markaasna ka dibna dhami jiray afar haan oo caano (Kirk 1904, b.:103)! Luigi Robecchi wuxuu sheegay inuu gobolka Bari uu kula kulmay oday Soomaali ah oo qoday xabaalaha dadkii hore ee ku yaal meel u dhow Waadi Abgaal, xabaalahaas gudahoodana uu ku arkay qolfoolyada dad ka waaweyn kuwa Soomaalida maanta nool (Robecchi 1903, b.:357-358). Sheekoxariirada Soomaaliyeed waxay kale oo sheegaan rag ay ka mid yihiin Xabad Ina Kamas, Biriir Ina Barqo iyo Gannaje oo ahaa rag aad iyo aad u xoog badan lahaana jirwaaweyn (Ahmed 1988, b.:42-43), walow sheekooyinkaan ay ku jiraan hadalo runta ka fog, hadana waxay tilmaamayaan in dalkaan ay ku noolaan jireen Soomaali ka jir waaweyn kuwa maanta jooga.

Badmaaxinta Roomanka waxay kaloo sheegeen in dadka Geeska Afrika deggan ay lahayn maamul guud oo laga wada danbeeyo. Waxay ahaayeen beelo badan oo mid kasto iskiisa u madaxbanaan yahay mid kastana duqiisa



gaar ah uu lahaa.

Safarkii Roomanka ka dib illaa laga soo gaarayay soo ifbaxa Islaamka, waxaa aad u yaraa akhbaarta laga hayo Geeska Afrika. Teobaldi Filesi wuxuu qabaa in qarnigii labaad ee NCKD, xeebaha koofureed Soomaaliya ay ahaayeen meel ay soo maraan doomaha ka yimaado Jasiiradaha Jaafa iyo Sumutara ee ku yaal Induniisiya, marka doomahaas ay u socdaan Jasiirada Madagascar (Filesi 1961: b:5-6).

Qoraal la qoray qarnigii lixaad NCKD oo la yiraahdo *"Topographia Christiana"* ayaa isna ka hadlay gobolkaan. Buuggaan oo uu qoray nin la yiraahdo Cosmos Indicopleustes wuxuu ku sheegay in dhulka maydiga ka baxo ee Soomaaliya ay deganaayeen qabiilo la yiraahdo Raawsi iyo Soolate (Cosmos wml, I-b.:14; Paribeni 1908, b.:439-572; Huntingford 1989, b.:41-47). Magaca Raawso wuxuu asalkiisa ka imaan karaa *"Raawis"* oo ah *"bir tumid"* (Yaasiin C. K. 1976, b.:358). Sidaas darteed erayga *"Rawsi"* wuxuu noqon karaa magac kale ee loo yaqaan dadka birta tuma. *"Soolate"* oo ah qabiilka kale uu Cosmos kula kulmay Soomaalida waqooyi waxay noqon karaan dad dhaqan u lahaayeen hilib solashada; waxaa kaloo suuragal ah inuu halkaa ka yimid magaca gobolka *"sool"*.

Cosmos wuxuu kale uu sheegay in dhulka Soomaaliyeed ee bariga ka xiga Dhulkoraad Xabashida waqtigaas loo yaqiinay Gabal. Erayga Cosmos ku maqlay *"Gabal"* wuxuu noqon karay *"Gabbal"* oo micnahiisu yahay meesha ama dhulka cadceedda leh. Dhulka Soomaaliyeed ee bariga ka xiga Dhulkoraadka Xabashida wuu ka kulul yahay kan Xabashida sidaas darteed ayaa degaankaas loogu magacaabi jiray Gabbal. Dadkaan *"Gabal"* la yiraahdo waxay soo gaareen qarnigii 13aad NCKD, markaas oo Soomaalida la dagaalaysay Boqortooyada Xabashida ee uu madax u ahaa Amda Syon (Cerulli 1957, b:113-114). Qoraalada dagaaladaas ka hadlayay waxay madaxda dadka Gabal ku magacaabi jireen *"makuannenta Gabal"* (Doresse 1971, b:184).

Cosmos wuxuu kaloo ka hadlay sida ay wax u kala iibsan jireen Soomaalida iyo dadka ajnabiga ah oo aysan is af aqoonin. Caadudo waxay ahayd in qof kasta waxa uu iska gadayo meel banaan dhigo ka dibna in yar ka fogaado. Qofka ajnabiga ah ee badeecadaas gadan raba ayaa badeecadaas kor saari jiray lacag ama shey kale oo uu rabo in badeecada loogu bedelo. Qofkii Soomaaliga ahaa haddii uu ku qanco waxa xoolihiisa loo dulsaaray markuu soo dhaqaaqo ayuu isagoon hadlin qaadanayay lacagtii ama badeecadii tiisa looga bedeshay. Qofka ajnabiga ah wuxuu qaadanayay badeecadii uu gatay. Qofkii ku qancin wixii xoolihiisa la dulsaaray sooma dhaqaaqo illaa wuxuu ku qanco loo saaro. Sidaas ayayna isku af garan jireen dadkaan is af aqoonin (Crindle 1897, b.:39 iyo 59).

# DIIMIHII HORE IYO QAABBDHISKA BULSHADA SOOMAALIYEED

5

Waxaan ka fahannay xiriirka Soomaalidii hore la lahayd ilbaxnimooyinkii Masaarida, Giriigga iyo Roomanka, in dalka Soomaaliyeed ay waqtiyadaas ka jiri jirin maamul iyo xeer guud oo dadkoo idil ka danbeeyaan, hase yeeshee koox walba lahayd duq iyaga u gaar ah, duqaas ayaana dadkaas matalayay markay calaaqaad la yeelanayaan dad kale, dadkaasi ha ahaadaan Soomaali ama ajnabi. Habkaan dhaqan-dhaqaale, walow uu yahay mid bidaa'i ah, hadana wuxuu ahaa nidaam si wanaagsan u shaqaynayay, haddiiba uu isku xiray xiriirka dhaqaale iyo dhaqan ee Soomaaliya iyo dadyowga kale ee adduunka. Si nidaam noocaas ah u jiro waa in haba yaraatee ay jirtaa wax dadka ay ku kala danbeeyaan; iyo xeerar qof kasta oo ka mid ah uu ilaalsho, uusanna ku xadgudbin. Waxa kaliya oo nidaam noocaas ah samayn karay waa caqiidadaha dadkaas badaa'iga ah ay aaminsanaayeen. Sida aan hore u soo sheegnay Soomaalida waa dad Kowshiin ah oo kumanaan sano la noolaa dadka kale ee Kowshiinta ah, sidaas darteed waa lagama maarmaam in caqiidooyinka Soomaalidii hore la mid ahaadaan kuwa Kowshiinta la jaal iyo jaadka ah. Soomaalida sida Kowshiinta kale waxay aaminsanaayeen kana wada danbeeyeen ilaaha cirka oo ay ku magacaabaan *"Waaq"* (Trimingham 1873, b: 257-258; Lewis 1984, b:127). Ka heebaysiga ilaaha cirka waxaa keenay iyagoo aaminsanaa in ilaaha cirka uu leeyahay awood uu shar iyo kheyrba ku keeni karo. Awoodda uu ilaahaas cirka ku maamulayo wax kasta oo yaala dhulkana waxaa loo yaqaanay *"Ayaan"*. Ayaamaha way kala duwan yihiin, waxayna leeyihiin kuwo wanaagsan iyo kuwo xun. Waxaa jiraa ayaan cudur keena iyo ayaan wax fiyoobeena, waxaa jiraa ayaanka tabarta iyo kan tabar darrida. Waxaa jiraa ayaanka labka iyo kan dhedigga, waxaa jiraa ayaanka da' yar iyo ku da' weyn, iwm.

Si aan u ogaanno sida aaminaadda ayaamaha gacan uga geysatay samaysanka xeerarka iyo kala danbaynta Soomaalida Kowshiinta ah waxaan u kuur galaynaa sida ayaanka tabarta iyo xayinimada ee la yiraahdo *"ab"* u saameeyeeyay dhaqanka iyo nolosha bulshada Soomaaliyeed. Dhammaan erayaasha Soomaaliyeed ee ka bilawda *"ab"* waxay cadaynayaan in eraygaas leeyahay astaan ama dhaqan ka duwayo waxyaalaha la jaadka ama la jaalka ah. Erayaasha *"ab"* ama *"aab"* waxay tilmaamaan ayaan bedela dhaqanka qofka ama sheyga, waana la kala dhaxlaa, wuxuuna isku xiraa dad kala duwan. Intaa aan galin sida *"ab"* iyo *"aab"* u dhalshaan isku xirnaanta reerka, qoyska, tolka, tolweynta, tolwadaagga, tololiskaashiga iwm, waxaan soo qaadanaynaa erayaal



Soomaalida aad u isticmaasho kuna jiraan *"ab"* ama *"aab"*:

<u>Ab</u>yan: wuxuu ka kooban yahay *"ab"* iyo *"yan"*. Erayga *"yan"* wuxuu tilmaamayaa wax aad iyo aad u yar. Marka *"yan"* uu raaco *"ab"* oo ah erayga ayaanka tabarta iyo xayinimda wuxuu noqonayaa *"abyan"* wuxuuna tilmaamayaa wax lala yaabo, ama lala amakaago yaraantiisa iyo xoog badnidiisa. Waana sababtaa in caruurta jinka yar laakiin sidoodaas ku firfircoon kuna xoog badan loogu baxsho magaca *"abyan"*.

<u>Ab</u>waan: wuxuu ka kooban yahay *"ab"* iyo *"waan"*. Erayga *"waan"* wuxuu ka yimid *"waano"* . Israacinta *"waan"* iyo *"ab"* wuxuu tilmaanayo ayaan tabareed oo markaan xoojinayo hadalka qofka ayaanka "ab" wata, qofkaasna ka dhigayo mid hadalkiisa dadka badankiisa ay ka helaan oo talo iyo tusaale laga faa'ido. Qofka leh ayaan noocaan ah ayaa waxaa la yiraahdaa *"abwaan"*. <u>Aab</u>i: micnahiisu waa gardarro; gardaradana waxaa la aaminsanaa inay tahay hab ayaanka xoogga badan ee *"aab"* uu ku daadaansanayo ayaan ka tabar yar ee ku jira qof kale.


<u>Ab</u>uur: micnahiisu waa miraha uu ku kaydsan (ama urursan) yahay ayaanka tabarta iyo xayinimada ee *"ab"*. Miraha noocaan ah waa kuwa haddii la beero dhalanayaan, maadaama gudahooda ama uurkooda ku jiro ayaan xayyi ah oo waxtarkiisa muujin karo. Miraha bololay lama yiraahdo *"abuur"*, maadaama aysan lahayn ayaanka xayyinimada ee *"ab"*. Baaris noocaan ah ayaana lagu samayn karaa erayaasha kale ee ka bilawdo *"ab"* ama *"aab"*, sida <u>Ab</u>aahi, <u>Ab</u>aar, <u>Ab</u>aqaal, <u>Ab</u>aydin, <u>Ab</u>baar, <u>Ab</u>ris, <u>Ab</u>hin, <u>Ab</u>ley, <u>Ab</u>oodi, <u>Ab</u>oor, <u>Ab</u>guri, <u>Ab</u>eeso, <u>Ab</u>sax,iwm.

Waxaase xiiso leh haddaan si gaar ah u eegno sida ayaanka tabarta ee *"ab"* ama *"aab"* gacan uga geysto dhismaha dhammaan <u>unugyada bulshada Soomaaliyeed</u> isla markaasna u keeno xurmo iyo xeer lagu kala danbeeyo. Bulsho kasta waxay ka dhisantaa unug la yiraahdo ***"qoys"***, qoyska ugu yarna wuxuu ka kooban yahay nin iyo naag isqaba. Qoyska labadaan qofood oo kaliya ka kooban ayaankooda tabarta ee*"ab"* ama *"aab"*, ma soo ifbaxin sidaas darteed ayaa ninkana loo dhihin *"<u>aab</u>o"*, ragga la dhashay naagtana loogu yeerin *"<u>ab</u>ti"*. Haweenka da'da yar ma laha ayaan tabar waxaase gudaheeda ku kaydisan ama ku kaydsami karaa ayaanka qoyska ay ka dhalatay iyo qoyska ay u dhaxdo.

Ninka iyo naagta isqabo markay isla galmoonayaan way is <u>ab</u>aahinayaan oo ayaanka *"ab"* ee ninka ayaa ku alalaxaa naagta gudaqarsiimadeeda (farjigeeda), sidaas darteed ayaa iskutagga lab iyo dhedigga geeluba loo yiraahdaa "<u>ab</u>aahin. Caruurta yar oo ka dhasha "<u>ab</u>aahinta" ninka iyo naagta waxaa la yiraahdaa "<u>ab</u>aydin" ama kuwii ayaanka *"ab"* ka wada nuugay ama ka wada aydaamay hooyadooda. Naagta la qabo maadaama ay tahay <u>hoygii</u> ay isugu darsameen kuna keydsameen ayaanka qoyskii ay ka dhalatay iyo ayaankii uu ku alalaxiyay ninkeeda si caruurta uga nuugaan ka dibna <u>ab</u>aydin u noqdaan ayaa naagta ilmaha dhasho loo yiraahdaa

*"hooyo"* ama tii caruurteeda u keydinaysay ayaanka qoyskii ay ka dhalatay iyo kii ay u dhaxdayba. Dadka ku hadla lahjadda Mayda waxay kaloo hooyada u yaqaanaan *"aay"* (Massey 1987, b.:215) oo ah eray ka yimid *"aayid"*. Sababta naagta la qabo loo yiraah *"aay"* waa iyadoo ayaanka waxtarka leh ee reerkii ay ka dhalatay iyo kii ninkeeda ku alaalixiyay keydiso si caruurteeda ugu aayaan ama uga faa'ideystaan. Dadka kale oo ayaan iyaga u gaar ah lahayn oo sida naagta la qabo u ah "aay", waa ayaayada, ayeeyada, aysinka iyo wixii *"aay"* ama *"ay"* ka bilaabto. Tusaale erayga aygarad wuxuu la micno yahay qofka ayaan ama wax uusan u jeedin garto. Erayaasha kale ee "ay" ka yimid waxaa ka mid ah *"Ayo?"* iyo *"Aynab"*. Ayeeyda da' awgeed u yeelata ayaanka *"ab"* waxaa yiraahdaa *"abooto"*.
Sidey ahaataba waxaan halkaan ka aragnaa in naagta caruurta leh, hala yiraahdo *"aay"* ama *"hooyo"* ay tahay hoygii aayatiin u keydinayay ayaanka qoyskay naagta ka dhalatay iyo kan ay u dhaxday, isku jirka ayaamahaas ayayna u gudbisaa caruurta caano nuugga ah. Canugga naas goyska gaaray waa canug wada nuugay ayaamihii hooyadiis lagy keydiyay sidaas darteed ayaa canuggaas loo yiraahdaa abaydin ama *"kii wada aydaamay ayaanka ab"*. Waxaan aragnaa in unugga bulshada ee *"qoyska"* uu isku keeno ayaanka labo qoys oo kala duwan, ayna soo saaraan caruur wada leh ayaanka qoyska aabahooda iyo qoyska hooyadooda. Sidaas ayuuna canug kasta oo Soomaali ah u ogyahay inuu ayaankiisu yahay ayaanka labo qoys oo kala duwan, qoysaskaasna uu ixtiraamo.

Caruurta abaydinka ah markay koraan, waxaa iyagana isku xiraa ayaanka tabarta oo ay hooyadood ka iidaameen ama ka nuugeen sidaas dartood ayayna u noqdaan *"abaayo"* (oo la micno ah ab keydiso) iyo *"aboowe"* (oo la micno ah ab awoowe wate). Qoyskii gaar u deggan oo ka kooban aabe, hooyo, caruurta ay dhaleen iyo xoolaha ay dhaqdaan waxaa la yiraahdaa ***"Jees"***. Qoyska ama jeeska waxaa bulshada inteeda kale ku xirayaa ayaanka *"ab"*. Dadka ugu horreeya ee uu jeeska ama qoyska ku xirmayo ama uu xushmaynayo waa kuwa ayaankooda *"ab"* ay aad isugu dhow yihiin sida **abtiga**, labada **abkow** iyo labada **abooto** oo ninka iyo naagta isqaba dhalay. Magacyada abkow iyo abooto waxay dadka qaar u qaataan da'weynida, maadaama ayaanka qof kasto uu sii xoogoobo markii da'da sii korortaba; sidaas darteed ayaa Soomaalida u dhawrtaa dadka da'da waaweyn yaysan dhalasho wadaaginee.
Waxaan hore u soo sheegnay in haweenka aysan lahayn ayaan iyaga u gaar ah laakiinse yihiin hoy ayaanka lagu keydiyo illaa ay ugu gudbiso caruurteeda. Ayaanka ugu xoog badan ee haweenka keediyaan oo ayna sii gudbiyaan waa kan ninkeeda, sidaas darteed ayay Soomaalida ku ayaan tirsataa (ama abtirsataa) ayaan ka yimid xagga aabaha. Tusaale dadka isku ***abkowga*** ah waxaa la yiraahdaa waa ***"Waraso"*** waana dadka isdhaxla. *"Warasdu"* waa unugga labaad ee bulshada Soomaaliyeed, sidaad u aragtaanna waxaa isku xirayaa xubnaha warasada waa ayaanka tabarta ee ku jira erayga *"abkow"*. Abkow kasta wuxuu ayaankiisa ka dhaxlay abkii dhalay. Abka dhalay abkowga waxaa la yiraahdaa ***"absaxan"***; dadka isku absaxanka ahna waxaa la yiraahdaa waa isku ***"Jilib"***, dadkaanna way deegaan iyo daaq wadaagaan. *"Jilibka"* waa unugga saddexaad ee bulshada Soomaaliyeed, dadka isku jilibka ahna waxaa mar kale isku xiraa ayaanka tabarta ee *"ab"* oo ku jira erayga *"absaxan"*.
Absaxan kasta wuxuu ayaankiisa ka dhaxlaa absaxankii uu ka yimid. Absaxankaasna waxaa la yiraahdaa ***"abisir"***. Dadka isku abisirka ah waxay ugu yaraan wadaagaan afar oday waxaana la yiraahdaa waa isku ***"Laf"***. Dadka isku lafta ah waa dadka mag iyo diyo wadaaga. *"Lafta"* waa unugga afaraad ee bulshada Soomaaliyeed, dadka isku lafta ahna waxaa mar kale isku xiraa ayaanka tabarta ee *"ab"* oo ku jira erayga *"abisir"* Abisir kasta wuxuu ayaankiisa ka dhaxlaa abisirkii uu ka yimid. Abisirkaanna waxaa la yiraahdaa ***"absuul"***. Dadka isku absuulka ah waxay ugu yaraan wadaagaan sideed oday waxaana la yiraahdaa waa isku ***"reer"***. Dadka isku reerka ah waa dadka dhiig iyo dhalasho wadaaga. *"Reerka"* waa unugga shanaad ee bulshada Soomaaliyeed, dadka isku reerka ahna waxaa mar kale isku xiraa ayaanka tabarta ee *"ab"* oo ku jira erayga *"absuul"*.




*Laamolaamaynta qaabdhiska unugyada bulshada Soomaaliyeed.*

Absuul kasta wuxuu ayaankiisa ka dhaxlaa absuulkii uu ka yimid. Absuulkaasna waxaa la yiraahdaa ***"ab-ka-ab"***. Dadka isku ab-ka-abka ah waxaa la yiraahdaa waa isku ***"qolo"***. Halka dadka isku reerka ah ay hubaan inay isdhalasho wadaagaan, dadka isku qolada ah ma hubaan inay dhalasho wadaagaan, waxayse hubaan inay isku dhiig iyo isku qiiro wadaagaan maadaama ayaanka *"ab"* ee ku jiro erayga*"ab-abka"* uu isku xirayo. *"Qolada"* waa unugga lixaad ee bulshada Soomaaliyeed, waxaan mar kale aragnaa in dadka isku qolada ah uu isku xiro ayaanka tabarta ee *"ab"* oo ku jira erayga *"ab-ka-ab"*.

Unugga bulshada ee*"Qolo"* ayaa ah unugga u weyn oo ayaan ahaan isku xiro Soomaalida. Waxaan halkaan ka cad sida ayaanka *"ab"*, ee ku jiray unugga koowaad ee bulshada Soomaaliyeed (qoys ama jees) uu qoys kasta oo Soomaali ah ugu xirayo unugyada kale ee bulshada, iyo sida unugyadaan waaweyn ee bulshada ugu xiran yihiin qoyska.

Dadka saan isugu xiran waxaa ka dhaxeeyay xeer iyo xushmo; waana nidaamkaan bidaa'iga ah kan suuragelshay inay Soomaalida dawlada la'aan muddo dheer isku maamusho. Saldhigga dhismaha iyo hawlgalka unugyadaan bulshada waa aaminaadda kal iyo laabta ah ee dadku aaminsanaayeen ayaanka iyo waxtarkiisa; iyo dhibaatada qofka ku imaan karto haddii uu ka baxo unugga bulshada uu ka mid yahay. Qofkii u gafo unugga bulshadeed ee uu ka mid yahay waa la goyn jiray ama waa la casaari jirey. Arrimahaan waxay keeneen in qof kasta maadda ahaan iyo niyada ahaan ku xirnaado dadka ay isku *"abka"* yihiin; waxaana baxay maahmaahyo iyo halku dhegyo ay ka mid yihiin:

*"Dadkaada iyo kabtaada dhexdaa looga jiraa"*.

*"Fiqi firkii kama jano tago"*.

Qaabdhiskaan unugyada bulshada ee ku salaysan *"ayaan abtirsiga"* wuxuu gacan ka geestay maamulka bulshooyinka bidaa'iga ah, hase yeeshee uma ogolaan in Soomaalidii hore samaysato maamul guud ay wada hoos yimaadaan. Kooxaha bulshada ee Soomaaliyeed qaar ka mid ah ayaa aaminsanaa ayaan ka xoog badan kan *"ab-ka-abka"*, ayaankaas oo loo yaqaanay "Eebe" oo ah ayaanka waaqa. Sida aan dib ugu sharxidoonno, dadbaa ama qolooyin tiro badan ayaa ku midoobay dadka leh magaca ama astaanta lagu yaqaano *"waaq"*, hase yeeshee ma ahayn mid dadkoo idil hoos imaanayeen. Samawaaq oo ah magacii Islaamka ka hor loo yaqiinay ab-awalka la yiraahdo Samaale ayaa ka mid ah magacda ay isugu yimaadaan qolooyin badan oo ayaankoodu "ab" ay kala duwan yihiin hase yeeshee uu mideeyo ayaanka weyn oona wanaagsan ee lagu nisbeeyay qofka la yiraahdo Samawaaq (Samaale). Walow gaashaanbuursigaan ay ku jireen ugu badnaan dadka deggan Geeska Afrika, hadana waligiis kuma guulaysanin inuu dhiso maamul dadka uu ku midoobaan, sababtana waa iyadoo gaashaanbuursigaan uu ahaa mid dadka iska aaminsanaayeen oo



waxqabadkiisu yar yahay.

Markuu dadku bato, ama daaqa yaraado, ama colaad iyo iska horimaad dhaco, dadka wey kala guuraan, oo qofba wuxuu aadaa meesha uu isaga iyo xoolahiisa ay ku nabad galayaan, waxaana suuragal ah inuu la dego qolo ama reer kale. Baxaaliga adag ee nolosha baadiyaha iyo baahida guud ee dadkaas isdhex degay ayaa keenaa inuu samaysmo nidaam bulshadeed cusub oo ka duwan kan dhalashada iyo dhiig wadaagga ku yimid. Nidaam bulshadeedkaan cusub waxaa la yiraahdaa *"tol"*.

Dadka isku tolka ah waa dad isku baahi ama isku dan ah, waxayse ku kala duwanaan karaan sida dantaas loo gaari karo. Soomaalidu waxay tiraahdaa *"tol waa tolane barse ka taxan"*, oo micnaheedu yahay in dadka isku tolka ah ay isku xiran yihiin ha yeeshee meel kaliya isaga xiran yihiin meeshaas oo ah danta guud ee tolka. Maadaama la yiraahdo*"Dani waa seeto"*, dadkaas kala qolada ama kala reerka ah way toloobaan oo wixii u dan ah ayay wadajir u sameeyaan. Isdhexgalka noocaan ah, waligii waa jiray wuxuuna sameeyay iskaashatooyin toleed oo waa weyn. Dadka cusub ee reerka ku soo biira waxaa la yiraahdaa *"galti"*, dadka iyaga uga horeeyayna waxaa loo yaqaan*"guri"* (Zoli 1927, b.:177). Qofka *"galtiga"* ah ee raba inuu si buuxda uga mid noqdo dadka lagu magaacaabo *"guri"* waa inuu marka hore taloobaa. Xeerarka lagu toloobo way kala duwan yihiin, waxaase ugu badan xeerka uu qofka galtiga ah uu u tagayo duqowda reerka ama qolada, markaasna ka codsadnayo inuu toloobo. Si qofka u toloobo waa inuu duqowda reerka ama qolada u geeyaa xoolaha iyo badarka tolaynta, ka dibna hortooda ku dhaartaa isagoo leh:

*"Anigoo ah hebel hebel, ka mid ahaa tol hebel, reer hebel, laf hebel, ugaaskayga ama islawgayga (iwm) uu yahay hebel hebel, waxaan cadaynayaa in maanta wixii ka danbeeyo tolkayga uu yahay tolkiina hebel hebel, kana sii ahay reer hebel, laf hebel, ugaaskayga ama islawgayga (iwm) cusubna waa hebel hebel. Dhiigayga tolkaanbaa leh, abaar iyo aaranna tolkayga waa tolkaan, nabad iyo colaad tolkayga waa tolkaan. Waan ka tanaasulay tolkii hore oo aan ka mid ahaa iyo laftii hore aan ka mid ahaa..."*.

Qofka ballantaas sameeyay waxaa la siiyaa meel uu dego, haddii tolka uu soo galayna ay yihiin beeray, waxaa kaloo la siiyaa dhul uu tacbado. Dadka lagu soo biiray haddii ay yihiin ugaarato, waxaa qofkaas la siiyaa qaanso qurxan iyo fallaar la yiraahdo *"xundhur"* (Zoli 1927, b:.210, F.G 1).

Qofka sidaan u talooba wuu ka tagaa abtirsigiisa hore, wuxuuna qaataa abtirsiga dadka uu la toloobay. Abtirsiga qofka toloobay loo ogol yahay waa kan jilibkiisa iyo warasdiisa kaliya, wixii ka danbeeyase wuu ka tagaa. Ninkii jabiyo balantii uu galay wuxuu durbaba lunshaa dhulkii iyo xuquuqdii la siiyay. Qofka dhowaan tolka ku soo biiray waxaa la yiraahdaa *"dheh"*. Wixii *"dheh"* ka horeeya qofka waa *"galti"*. Qofka *"dhehda"* ah haddii muddo dheer uu tolka la sii joogo, wuxuu noqdaa *"sheegat"*. Qofkii tolkaas dhexdiisa ku ilmo dhalo, ilmahaasna aysan jabin ballankii aabahooda uu

galay, waxaa ilmahaas la yiraahdaa *"duhun"* ama *"dahan"*.

Qofka ku jiro waqtiga *"dhehda"*, si buuxdo ugama qayb qaato shirarka xasaasiga ah ee tolka, walow natiijada shirarkaas ay ku waajib tahay inuu raaco. Sidoo kale qof *"dheh"* ah ma laga dhigo abbaanduulka ciidan duulayo (Lewis 1969, b.:59-77). Waxyaalaha gaabin karo ama soo yarayn karo waqtiga uu qofka taloobay uu *"dheh"* yahay waxaa ka mid ah, isagoo naag ka guursada cidda uu la toloobay, ama gabadhiisa ku dara ragga tolka uu la taloobay. Dadka dhawr jiil tolka ka mid ahaa oo marnaba jabinin heerka tolka, waxaa la yiraahdaa *"dhalad"*. Si loo kala saaro dadka asal ahaan dhaladka u ah iyo dadka jiilal ka dib dhalad noqday, ayaa qolada asal ahaan dhaladka ahaa la yiraahdaa *"xudun"*. Reerka qolada *"xudunta"* ah ugu da"weynna waxaa la yiraahdaa *"curad"*.

Sida loo aaminsanaa in qofba, qofkuu ka da'weyn yahay uu ka ayaan adag yahay, ayaa waxaa la aaminsanaa in reerba reerkuu ka curadsan yahay uu ka ayaan xoog badan yahay. Nin ka dhashay reerka curadka ah ama reerkaas habar-wadaagaan, isla markaasna leh ayaan reerkiisa iyo tolkiisa ka wada danbeeyaan ayaa wuxuu noqon jiray madaxa reerka ama qolada ama tolka. Magaca qofkaas la siinayo waxay ku xiran tahay sida uu yahay ayaanka qofkaas lagu yaqaano. Haddii qofkaas uu yahay mid ayaanka looga danbeeya yahay hanti ama xoolo uu dadka isugu keeno waxaa ninkaas loo baxshaa *"Boqor"*, oo watay Soomaalidu tiraah:*"dadka dibno la xiriirsho ayay leeyihiin, ee dib la xiriisho ma leh"*. Afka caadiga ah *"boqor"* waxaa la yiraahdaa duub maro ah oo dumarka sida suun dhexda ugu xirtaan (Yaasiin C. K. 1976, b.:40). Qofka sifada maradaas leh, ee isku xiro caloosha dadka ama hungurigooda ayaa waxaa isna la yiraahdaa *"boqor"*. Halkaan waxaa nooga cad in waxa ugu muhiimsan ee isku xira tolka iyo boqorka ay tahay hantida, boqorkii hanti beelana waxaa ku qasab ah inuu magaciisa baaba'o ama magacii laga boobo, ama raadsho si kale uu hanti badan si deg deg ah ugu helo. Maadaama hantida mar la helo marna la waayo, Soomaalida badankeeda waxay madax ka dhigtaan dad ay dhalasho wadaagaan ama leh sifo ama ayaan aan marnaba ka guuraynin qofka, sida geesinimada iyo bayaxownimada. Middaan ayaana ugu wacan inay Soomaalidu badankeeda aysan la bixin magaca *"boqor"*, dadka noocaas ahna qiimo yeeshaan goortii jeebkoodu uu buuxo kaliya. Tanaa boqorada badankooda ku qasabtaa inay xalaal iyo xaaraanba ku raadshaan hanti looga danbeeyo, waxaana suuragal ah in arrintaan ugu wacan tahay inay qaarkood la heshiiyaan dad ama dawlado Ajnabiga ah si ay u helaan hanti iyo lacag dadka kale aysan haysan; sidaasna magacooda iyo tabartooda ku xoojiyaan ( Pankhurst 1951).

Sidaan hore u soo sheegayse, Soomaalida inteeda kalese waxay muhimadda siiyaan dhalashada iyo ayaanka qofka. Tusaale, ninka reerka curadka ah ka dhashay oo leh ayaanka abwaanimo iyo aragti dadkiisa isugu xiro waxaa loo baxshaa*"Garaad"*. Ninka ka dhasahay reer curad ah, arrintaasna ku



darsaday awood abbaanduul iyo geesinimo uu tolkiisa ku maamulo waxaa loo baxshaa *"Ugaas"*. Erayga *"ugaas"* wuxuu ka yimid *"igaas"* oo lahjadda Boonta ku ah *"dilaa"*. Dadka ayaanka curudnimada kaliya tixgalsha waxay qofka u madax noqonaayo ku magacaabaan *"Islaaw"* oo ka yimid *"Isla-aw"* ama *"isku aabe"*. Qofka Islawga ah aalaaba waa nin isku wada haysto jagada siyaasadeed iyo tan abbaanduulba (Cassanelli 1982, b.:219).

Dadka ayaanka curudnimada iyo ayaanka bishaarada waaberka looga danbeeyo waxaa la yiraahdaa *"Wabar"*. Dadka ugaaratada waxay madax u doortaan qofay aaminsan yihiin inuu ayaankiisa ka *"hareeyo"* dad *"gaan"*. Qofka ayaankaas oo kale lehna waxaa loo baxshaa *"hargaanti"*. Raacidda laba xaraf ee *"ti"* ay raaceen *"hargaan"* waxay tilmaamaysaa in dabeecadda hargaanimada ay tahay mid u gaar ah qofka lagu tilmaamay (Dhoorre 1994, b.:4).

Hadalada iyo farriimaha raggaan madaxda ah xeer ahaan ayaa loo dhawri jiray, tuftooda waa la barakaysan jiray inkaartoodana waa laga cabsan jiray. Raggaan madaxda reerka ah ayay ahaayeen kuwa reerahooda matala marka reeraha kale arrimo laysku haysto, hase yeeshee iskooda uma go'aamin karaan duulaanka reerka iyo sida duulaankaas loo qaadayo. Markaan oo kale, ugaaska ama islawga (iwm) waa inay la tashadaan duqowda ama *"dhilliinka"* tolka (Zoli 1927, b.:183). Halka islawga ama ugaaska (iwm) ay ka yimaadaan reer curad ah, golaha duqowda ama dhilliinka tolka waxaa noqon karaa qof kasto oo da'diisa ay ka weyn tahay 48 sano. Dadka noocaan ah waxaa la yiraahdaa *"laf-jebis"* oo da'da awgeed ayaa hadalkooda loo tixgaliyaa. Dadka *"laf-jebiska"* ah waxaa loo qaybshaa afar qaybood (Zoli 1927, b.:193):

-*"Boobe"* (ama seef labood)= waa dadka da'dooda u dhaxayso 48 iyo 55 sano.
-*"Boombi"* (ama dooshaan)= waa dadka da'dooda u dhaxayso 56 iyo 63 sano.
-*"Meeja"* (geed magaciisa)= waa dadka da'dooda u dhaxayso 64 iyo 71 sano.
-*"Muuli"* (oo ah nooc mas)= waa dadka da'dooda ka weyn tahay 72 sano.

Dadka Gobolka Bay waxay laf-jebiska u yaqaanaan *"Gobta"* ama *"Irid-roog"* (Massey 1987, b.: 62).

Duqowda tolka waa kuwa ansaxiya doorashada boqorka ama ugaaska (iwm); waa kuwa go'aansha dagaalgalinta ama nabad raadinta reerka; waa kuwa doorta abbaanduulka reerka; waa golaha gacansiiya madaxa reerka siibana haddii islawga ama ugaaska (iwm) uu ka yar yahay 15 sano.

Dadka ka yar 48 sano waxaa la yiraahdaa *"Ilgiir"*. Ilgeerka labka ah waxaa loo qaybshaa: Caruur (0-7 jir); Kuray (8-15 jir); Gaashaanqaad (16-20 jir); Barbaar (21-30 jir); Garmadoobe (31-40 jir); Ulmadoobe (41-48 jir).


Ilgeerka dheddigga ah waxaa loo qaybshaa: Caruur (0-7 jir); Foodley (8-15 jir); Sindheer (16-20 jir); Shaashley (21-30 jir); Mindidhoob (31-40 jir); Xusullobaruur (41-48 jir).

Ilgiirka labka ah oo da'doodu weyn tahay waxay ka mid noqon karaan

duqowda reerka ama tolka ama waxay noqon karaan wakiil ugaaska ama islawga ama duqowda tolka u xilsaaraan deegaan ama hawl ama abbaanduul ciidameed. Qofka noocaan ah, oo madaxa ama duqowda reerka ka wakiil ah ayaa la yiraahdaa *"Sagaalle"* . Qofka sagaalaha ah wuxuu isna samaysan karaa xubno hawsha ku gacansiiya oo la yiraahdo *"geedellay"* (Zoli 1927, b:.188-199).

Sagaalaha ama geedellayda waxay tuulooyinka ama beelaha ka sameeyaan kooxo yar yar oo dhalinyaro ah oo la yiraahdo *"soddon"* ama *"Xirin"* (Zoli 1927, b:.206-210; F.G. 1). Dadka isku soddonka ah ama isku xiranka ah waxay gacan iska siiyaan hawlaha beeraha ama ugaarashada ama guryo dhiska ama arooska ama duugta ama abaabulka dagaalka. Xirinta ugaarada ah waxaa ka madax ah nin la yiraahdo *"hargaanti weyne"*, kaaliyayaashiisana waxaa la yiraahdaa *"hargaanti guul"* (Zoli 1927, b:.210; F.G. 1).

Waqtiga nabadda lagu jiro qofka sagaalaha ah wuxuu noqon karay qof nabadgelyada degaanka qaabilsan, hase yeeshee waqtiyada dagaalka waa inuu abaabulaa *"soddonka"* ama *"xirinka"* uu madax ka yahay. Kooxda *"soddonka"* ah waxay ka kooban tahay dadaan ka yareen soddon qofood. Ururkii dadkiisa ay ka kooban yihiin 50 sagaalle waxay hoos imaan jireen oday la yiraahdo *"oolay"*. Ururkii ka kooban labo nin oo *"oolay"*, iyo 100ka sagaalle oo labadaas nimood ay madaxda ka yihiin waxay iyagana hoos yimaadaan oday la yiraahdo *"Dafaraan"* ama *"malaakh"* . Sidaas darteed, ninka *"dafaraanka"* ama *"malaakha"* ah wuxuu xukumaa 100 sagaalle. Ciidankii ka kooban 100 sagaalle (ama 3000 oo qofood) waxaa la yiraahdaa *"Gaan"*, waxaana hoggaaminayaa nin daffaraan ama malaakh ah. Labadii dafaraan ama malaakh iyo ciidamadooda waxay iyagana hoos imaanayeen oday la yiraahdo *"Udumo"* oo ah ninka ka madaxda ah col gaarayo labo




♦ *Laamolaamaynta dhallin-goobeynta Soomaalida.*



gaan (200 sagaalle ama 6000 oo dagaalyahan). Labadii *"Udumo"* iyo ciidamadooda waxay iyagana hoos tagayaan Islawga oo ah abbaanduulka reerka (Carletti 1910, b.:7, 68, 71, 117). Sidaad u aragtid ciidamada Islawga waa afar gaan ama 400 sagaale ( ama12000 dagaalyahan). Maadaama reeraha ama tololka qaar ay leeyihiin dagaalyahanno ka badan afar gaan ama 12,000 oo qofood, ayaa waxaa dhici kartaa inay lahaadaan dhawr islaw. Dagaalyahanada tiradooda gaarto shan gaan ama 15,000 oo dagaalyahan waxaa ka madax noqdaa oday la yiraahdo *"gaan-shan-le"* (ama gaashaanle). Reerkii leh dagaalyahanno gaarayo shan gaan waxay u gaashaanka u daruuri kareen ciddii ku soo duusha sidaas darteed ayaa odayga *"gaan-shan-laha"* ah ayaa mararka qaar lagu magacaabaa *"gaashaanle"*.

Ciidankii ka *"labo gaanshanle"* ama 30,000 oo dagaalyahan waxaa la yiraahdaa *"Guda"*. Ciidanka waa *"guda"* loogu baxshay iyagoo u adag sida geedka yicibta laga guro oo la yiraahdo *"guda"*.. Reerkii leh dagaalyahanno gaarayo *"Guda"* waa reer adag oo kara in dagaalyahanadiisa qaar u diro qabsashada iyo degidda deegaan cusub isagoo isla markaas wiiqin awoodda difaac ee reerka. Ciidankii ka kooban labo *"guda"* ama 60,000 oo dagaalyahan waxaa la yiraahdaa *"Gaas"*. Reerkii dagaalyahanadiisu gaaraan *"Guda"* ama *"Gaas"* waxay u badan tahay inay degaanka ku kala guuraan oo ay noqdaan qolooyin iyo tolol cusub, middaan ayaana keentay inaan la helin reer hal meel deggan oo *"gaas"* ama *"gud"* dagaalyahan u haysta isdifaaciisa.

Markiise dadka ka baxayn xilligii isbahaysiga reerka ayna dhalatay ummad Soomaalinimo ama islaamnimo isku bahaysato, ayaa waxaa samaysmay dagaalyahanno gaaraya *"Guda"* iyo *"Gaas"*, kana kala yimid reero kala duwan. Tan ayaa keentay in magacyada *"Guda"* iyo *"Gaas"* ay adeegsadeen maamulayaashii midaynayay Soomaaliya sida maamulkii Arsamay (Ajuuraan); tii Awdal, tii Daraawiishta iyo tii dawladda Soomaaliyeed. Tusaale, ciidamada dawladda Soomaaliyeed waxay lahaayeen darajooyin laga soo dhanbashay gaanshaanle, guda iyo gaas waxaana la mid ah gaashaanle, sareeye guuto iyo sareeye gaas.



Beerayda Soomaaliyeed waxaa intaan u dheer iyagoo leh ururo kala duwan oo hawlaha beeraha, ceel qodidda ama eeg qodidda iska kaashada. Ururadaas waxaa ka mid ah:

- *Goob ama gacanjiid*: waa dad deris ah oo codsi mid iyaga ka mid ah uga yimid awgii, maalin ama dhawr bari ka shaqeeyo beerta qofkaas. Qofka loo shaqaynayo wuxuu bixinayaa qadada dadkaas kaliya. Goobta waxay noqon kartaa *"goob laan beer"*, ama *"goob galabay"*. *Goob laan-beer* waa midda qofka laga gacan siinayo diyaarinta dhulka beerta iyo abuuridda miraha. *Goob-galabay* waa tan la qabto galbihii kaliya (Massey 1987, b.: 69-70, 79).
- *Hiraabay*: waa koox tabcato ah oo galinka hore ee maalinta wadajir uga shaqeeyo beerta qof iyaga ka mid ah, galinka danbese qofba beertiisa gaar uga shaqeeya (Massey 1987, b.:70-71).

- *Daabsaar*: waa koox tabcato ah oo galinka hore ee maalinta qofba beertiisa gaar uga shaqeeya, galinka danbese guud ahaan maalinba laga shaqeeyo beerta qof iyaga ka mid ah (Massey 1987, b.:70-71).
- *Daab-wareeg ama korsaar*: waa koox tabcato ah waa maalinba ka shaqayso beerta qof iyaga ka mid ah, sidaasna hawsha loo wareejiyo illaa beerahooda oo idil la wada beero, la wada falo lana wada gooyo. Xubnaha "daabwareegga" sabab la'aan hawsha ugama maqnaan karaan, qofkii maqnaadana qof kale oo bedelkiisa ah ayuu soo dirayaa (Massey 1987, b.:70).
- *Fatiir*: waa koox tabcato ah oo wadajir meel uga qota ceel ama eeg. Fatiirta ceelaha waxaa loo yaqaanaa *"suun"*, tan eegaggana *"yagoor"*, hawsha koowaad ee ceel qodka ama eeg samaynta waxaa la yiraahdaa *"xinshillesiib"*, qofka iska meesha ceelka ama eegga laha qodayana waxaa la yiraahdaa *"Aw-dhul"*.
Ceelka ama eegga ay fatiirta qoday waxaa ka biyo cabi karaa qofkii kooxda fatiirta ka mid ah, waana kooxdaan tan si joogta ah u dayactirto ceelka ama eegga (Massey 1987, b.: 62-63, 100).
- *Barbaar ama raan:* waa koox dhalinyaro ah oo u kaalmaysa qof kasta oo dhibaataysan, curyaan ah ama jiran. Waxay dadkaas uga shaqeeyaan beeraha, waxay u ururshaan tabarucaad ama waxay geeyaan halkuu rabo ama meel lagu daaweeyo (Massey 1987, b.:70-71).
Barbaarta badankooda waa wiilal dhalinyaro ah waxaase ka mid noqon karaa gabdho. Hawlmaalmeedkaan mooyee, barbaarta waxaa isku xiraa cayaaraha iyo caweysyada (Massey 1987, b.:71)..



Soomaalidu sidaas ayay nabad iyo dagaal isku maamuli jirtey isagana danbayn jirtay. Raggaan madaxda ka ah xubnaha bulshada Soomaaliyeed, siday rabaan wax uma maamuli jirin oo waxay aaminsanaayeen in ayaankooda xoogga badan oo dadka ka wada danbeeyaan uu ka xoog yar yahay ayaanka *"waaqa"* oo ah ayaanka cirkaas tiir la'aan halkaas ku haya. Ayaankaas cirka oo ah ayaanka ayaamaha oo idil ayaa waxaa la yiraahdaa *"Eebe"*. Waana sababtaan in dadkoo idil yar iyo weyn, wadaad iyo waranlaba ay ka heebaystaan waaqa iyo ayaankiisa la yiraahdo *"eebe"*. Erayaasha *"waaq"* iyo *"eebe"* waa lagu dhaaran jiray, waa laysku inkaari jiray, waxaana lagu dari jiray magacyada dadka laga heebaysto. Dadka qaar ayaa tan iyo haatan ku dhaarta weedho ay ka mid yihii *"Eebaa i og"*, ama isku inkaaraa *"Waqaa hoogtaa"*! Waxaase xiiso leh maqalka gabay uu Nuur Cabdulle Kebed ku inkaarayay dad colaad ka dhaxayso kuna yiri:

*Sida tuug la xiray, waqay toban codleeyaane*
*Sidee teys la qawracay, waqay tuduc u yaaliine*
*Tunka waqay ku qaadaan, caruur taxarro dhaadheere*
*Tahna nimaan u dhiibeyn, gacmaha waqay u taagaane*
*Haday tiro badnaadaan, waqay toban ahaadaane*
*Intay toobad seegaan cadaab, waqay ku taahaane*
*Tanaad iyo faqiir waqay, macluul tubaha u yaalaane*

Gabayga hoos ku qoran isna gabyaaga wuxuu adeegsaday erayga "waaq" waana:

*Tabo xaal qarsoon iyo ninkii tuugo igu maagay*
*Oo waliba tiiqtiiqsigii iyo kibir la soo taagan*
*Tankiisu ha cajabshee waqii tiisa haw boge e*
*Kolay timiri waa tii laflahee, taa hala ogaado.*

Gabayada kaliya ma ahee erayga "waaq" wuxuu ku jiri karaa heesaha, sida ku cad heestii *'Calaacal"* ee 1970kii uu qaadi jiray fanaanka caanka ah ee Cumar Dhuule, qayb heestaa ka mid ahna waa tan:

*Wehey waaqlaan u baxayo*
*Cidlaan weehaabayaaye*
*Markii aan ku waayey waashee*
*Had maynu is weheshandoonna?*

Eraygaa *"waaq"* waxaa kaloo ku jiraa noocyada mingiska ee la yiraah Alwaaq iyo Awaaqow. Sidoo kale booranaha nooc ka mid ah ayaa la yiraahdaa Shimbiro-waaq (Mohamed 1992, b:48, 53).
Aaminaadda iyo qiimaha Soomaalidii hore ay siin jirtay waaqa waxaa kale oo laga garan karaa in ab-awalada Soomaaliyeed qaar ka mid ah lahaayeen magacyo lago lifaaqay *"waaq"* Ab-awaladaas waxaa ka mid ah:
*Aarwaaq* (Abgaal Wacbuudhan, waxaa kaloo la baxaa Caligeri Dhulbahante), *Amartiwaaq* (Xuudaan Majeerteen), *Atwaaq* (Abgaal), *Barwaaq* (Abgaal Cabdullaahi, waxaa kaloo la baxaa Ogaadeen), *Biddewaaq* (Jidle Dalcawstir Cadde), *Caabudwaaq* (Tolomoge Ogaadeen), *Ciqwaaq* (Abgaal Harti), *Dardarwaaq* (Majeerteen), *Dalwaaq* (Caleemo Geledi), *Danwaaq* (Harti), *Diintiwaaq* (Lo'doon Xawadle, waxaa kaloo uu ka mid yahay taxa abtirsiga Hiraab oo ah Hiraab Diintawaaq Berdaale Sariire Baraxaw Raage Daame), *Gaalwaaq* (Yebedhaal Hilibi), *Guddoonwaaq* (Xasan Talareer Majeerteen), *Galadwaaq* (Daadow Biyomaal), *Gumarwaaq* (Reer Xasan Mareexaan), *Guudwaaq* (Samatalis Agoon Xawadle, waxaa kaloo la baxaa Tolomoge Cabdalla Ogaadeen iyo Cabuudwaaq Haaruun Ogaadeen), *Ibraahinwaaq* (Reer Xasan Mareexaan), *Jidwaaq* (Dubleys Warsangali, waxaa kaloo la baxaa Absame), *Kalwaaq* (Ab-Idig-Mooblayn), *Lixdawaaqle* (Hadaamo), *Maganwaaq*, *Miyirwaaq*, (Hiraab Mundulood Darandoole Hiilabi), *Isxijiswaaq* (Fool culus-Waadeere), *Siinwaaq* (Tolomoge Ogaadeen), *Samawaaq*, *Siwaaqroon* (Xuseen Talareer Majeerteen), *Tagaalwaaq* (Ogaadeen), *Talawaaq* (Hiraab Mundulood Maxamed), *Tiirwaaq*,, *Warwaaqjecle* (Raadmiir Mareexaan), *Waaqbare ama Waaqbarow* (Dabarre), *Waaqbiyo* (waxaa la baxaa Garwaale iyo Shiidle), *Waaqdoorre* (Lixda Caleemo Geledi, waxaa kaloo la baxaa Hadaamo iyo Eelay), *Waaqjire* (Madarkicis Sacad Cawareere), *Waaqmadi* (Daldoori Dabarre), *Waaqle* (Walaalmooge Yibidhaan Shiidle, waxaa kaloo la baxaa Ajuuraan), *Waaqmaade* (Daldoore Dabarre), *Waaqheew*

(Dabarre), *Waaqmahadle* (Jidle Dalcawstir Cadde, waxaa kaloo la baxaa Reer Xasan Mareexaan), *Waaqmahadshe*, *Waaqnuurqabe* (Waladjabuur Majeerteen), *Waaqroone* (Muuse Cali Tanade), *Waaqsheen* (Ajuuraan Tunni), *Warwaaq* (Madarkicis Cayr Habar Aji; waxaa kaloo la baxaa Mursi ama Mursal Waadeere), *Warwaaqjecel* (Raadmiir Mareexaan),, *Warwaaqsame* (Majeerteen), *Xijiwaaq* (Suul Harti Abgaal), *Yuusufwaaq* (Reer Xasan Mareexaan) iwm.

Ab-awalada kor ku qoran waa qaar ka mid ah ab-awalada Soomaaliyeed ee magacooda la xiriiray magaca *"waaq"*, hase yeeshee waxaa jiraa ab-awalo kale oo magacyadooda la xiriiro dad ayaan adag lahaa. Ab-awaladaas waxaa ka mid ah Xayaak oo ah ab-awalkii tumaalaha, Xanfalay oo ah xaaska odagay ka soo farcameen Yibirta; Goweydi oo ahaa ab-awalka Midgaha. Mid kasta oo saddexdaan ab-awal ka mid ah wuxuu lahaa ayaan lagu yaqaano, waxaanse halkaan ku soo qaadanaynaa ayaanka looga danbayn jiray Yibirta waxa keenay.

Erayga *"Yibir"* wuxuu ka yimid labada eray oo kala ah *"Yib-ir"*. Erayga *"Yib"* waa cayaar sida shaxda ah oo labo iyo toban ku god leh, erayga raacsan oo *"ir"* waa erayga afka mayga ah lagu yiraahdo *"cir"*. Isugeynta labada eray ee *"Yib"* iyo *"ir"*, wuxuu la micno noqonayaa *"cir ka shax"* ama *"cir ka yib"*. Qofka *"cir ku shaxa"* ah waa kan ka dheela meel dadka kale aysan ka dheeli aqoonin, oo samadda ka odorasa falka qofka la dheelaya uu rabo inuu sameeyo, ka hor dago sidaasna uga raaya. Maadaama qofka *"cir ka*



*shaxa"* ama *"cir ka yibka"* ah aan laga reen jirin waxaa la aaminsanaa inay ayaamo la shaqeeyaan ayaankoodana ka xoog badan yahay ayaanka dadka caadiga ah. Sidaas darteed dadka leh ayaanka *"cir ka yibka"* ah loogu baxshay *"Yibir"*.

Awoodda odorisidda ee Yibirka kuma ekayn midda shaxa kaliya ee wuxuu lahaa awood uu ku odoraso waxa ku dhaci doono dadka, xoolaha iyo cimilada; fanka noocaan ahna waxaa la yiraahdaa *"faal"*. Awoodda odorisidda Yibirka waxay keentay in dadkii hore war iyo waano, dil iyo daawo u doontaan Yibirta, lana aamina in ayaanka Yibirta ka xoog badan yahay ayaamaha kale. Taasaana ugu wacan in Yibirada u noqdaan dad looga danbeeyo faalka iyo falka, tuftoodana la barakaysto inkaartoodana laga baqo (Heine 1978, b.:8). Dadka waxay aaminsanaayeen in Yibirku dhib iyo dheefba keeni karo, inuu dadka ka saari karo ayaamaha cudurada keena, inuu saadaalin karo siday cimilada noqonayso iwm.

Yibirka da' iyo aqoon gaarsiisay inuu ayaanka xun ka saaro dadka ama odoroso dhacdooyinka kala duwan ayaa waxaa la dhihi jiray *"Yabar"* ama *"Yabaro"*, falka ayaanka xun lagu saarana waxaa la yiraahdaa *"Yabaree"* (Zorc iyo dad kale 1991, b.:524).

Waayihii hore, fanka saadaasha waxay gaar u ahayd Yibirada; hase yeeshee waayihii danbe ayaa dad kale bartay fankaasi oo sida Yibirka wax u saadaalin jiray. Ab-awalada Soomaaliyeed oo aan asal ahaan Yibir ahayn hase yeeshee fanka saadaasha Yibirka bartay waxaa loo bixin jiray magacyo ay ka mid yihiin *Yibir* (Madoobe Barsane-Gaaljecel iyo Soraante-Gaaljecel), *Yibirdhige* (Absuge-Wacaysle Abgaal), *Yabar* (Galmaax-Wacbuudan Abgaal, waxaa kaloo la baxaa Mataan Ciise-Mareexaan iyo La hube-Doorwaaq), *Yabargaab* (Cadalla Agoonyar-Abgaal), *Yabarow* (Mucle-Cayr Habargedir, waxaa kaloo la baxaa Reer Moorye- Digiini Reer Shabeele iyo Sheekhaal Loobogey-Martiile Hiraab), *Yaber* (Gasar Kunle-Reer Shabeelle, waxaa kaloo la baxaa Dige Samatalis-Xawaadle, Ciise Dige-Xawadle, Ilkagaduud Maalin-Wacdaan iyo Abuukar Maalin-Wacdaan), *Yeber* (Ilkoole-Dabarre) *Yeberow* (Agoon Dige-Xawaadle), *Yebergaab* (Gasar Kunle-Reer Shabeelle), *Yabedhaale* (Yeraan-Gelidi) iwm.

Soomaalidu xoolo ayay u qali jirtay ayaamaha siibana marka caruur u dhalato. Xoolaha marka caruurta dhashaan ayaanka loo qali jiray waxaa la dhihi jiray *"waqlal"* ama *"waqdhaac"* oo la micnaha ah xoolahii waaqa loo diray ama loo qalay. Markii Soomaalidu Muslimtay, magacii waqlalka waxaa loo isticmaalay xoolaha sunno ahaanta loo qalo marka caruurta dhashaan. Waaqa mooyee, qaar Soomaalida ka mid ah ayaa caabudi jiray dabka sida ka muuqato gabaygaan uu nin ku leeyahay nin kale:

*Eebihii eebayaasha dhamaan, Aabahooda ahaa*
*Ee adiga ku aduudaybaa, Eebahayga ahee*
*Adiguna dabbaad ololisaa, ku ag wareegtaaye*
*Arin kuma heshiinee war hooy, maanu kala aallo.*



Ab-awalada Soomaaliyeed qaarkood ayaa aaminsanaa ilaahyo la mid ah kuwa dadka Saamiinta ah ay aaminsanaan jireen. Saamiinta oo ka soo faracmay wiilkii Nabi Nuux (C.S) ee Saam waa dadkuu Alle ka soo saaray nabiyo iyo rusullo dadka ku booriyo aaminaadda Alle kaliya. Carabta iyo Yuhuudda oo ka mid ah Saamiinta waxay ilaah u yaqaaneen *"Eela"*, waxayna sanamadooda u bixin jireen magacyo asalkooda ka yimid erayga *"Eela"* sida *"Eelohim"*, *"Eellaat"*, *"Eelah"* iyo *"Allaah"* (Ka fiiri kitaabka *"Ruuxu Ad-Diin Al-Islaamiyyi"* bogga 81). La bixidda Soomaalida qaar ay la baxday *"Eelay"* oo asal ahaan ka yimid *"Eela"*, waxay cadaynaysaa in Geeska Afrika ku noolaayeen dad caabuda ilaahyo la mid ah kuwa Carabta caabudi jireen Islaamka ka hor (Mohammed 1992, b.:93-94).

# XIRIIRKA SOOMAALIDA IYO MUSLIMIINTA

Waxaan hore u soo sheegnay in wixii ka danbeeyay Safarkii Roomaanka uu hoos u dhacay xiriirka Soomaalida la lahayd dunida inteeda kale, waxaase qarnigii 7aad soo ifbaxay diinta Islaamka oo wax weyn ka bedeshay nolosha, dhaqanka iyo taariikhda adduunka gaar ahaan tan dadkii diintaas qaatay. Si loo fahmo sida soo ifbaxa Islaamka raad ugu yeeshay taariikhda dadka Soomaaliyeed waxaan si kooban uga hadlaynaa sidoo Islaamka ku bilawday, ku kobcay, ku xoogaystay ka dibna ugu soo fiday Geeska Afrika. Islaamka waa diinta Ilaah ku soo dejiyay *Maxammed Bin Cabdullaahi Bin Cabdulmudalib, Bin Haashim, Bin Cabdulmunaaf, Bin Qusayya, Bin Kalaab, Bin Murah, Bin Kacab, Bin Luwwi, Bin Gaalib, Bin Fahar, Bin Maalik, Bin Nadhar (Qураysh), Bin Kanaanah, Bin Khuzaymah, Bin Madrakata (Caamir), Bin Ilyaas, Bin Madar, Bin Nizaar, Bin Macaad, Bin Cadnaan...* wuxuuna abtirsigaan galayaa Nabi Ismaaciil (CS).

Nabi Maxammed (SCW) wuxuu ku dhashay Makka waabarka maalin Isniin ah bisha Rabiicul Awalna tahay labo iyo toban. Waxay maalintaas ku beegan tahay 20 Abriil 571 NCKD. Nabiga (SCW) wuxuu ku dhashay agoonnimo, waxaana naas nuujisay naag la yiraahdo Xalimah Bintu Du'ayb Al-Sacdiyyah. Hooyadiisa oo la yiraahdo Aaminah Bintu Wahab Bin Cadulmunaaf Bin Zuhrata Bin Kalaab... waxay dhimatay isagoo lix jir ah; waxayna ku geeriyootay meel la yiraahdo Abawaa', oo u dhaxayso Makka iyo Madiinah. Waxaa markaa Maxammed (SCW) kafiil ka noqday awowgiisa Cabdulmudalib, oo isna geeriyooday labo sano ka dib. Abuu Daalib, oo ahaa Nabiga (SCW) adeerkiisa ayaa markaa ka dib kafiishay Nabiga (SCW) gacantiisana ku soo korshay. Nabiga (SCW) walow uu kuray yar ahaa, hadana adeerkiisa gacanbuu siin jiray oo ariga ayuu u raaci jiray; markuu 12 sano gaarayna, wuxuu adeerkiisa ula safri jiray Shaam.

Nabiga (SCW) oo ku caan baxay aamin iyo wanaag ayaa dadkoo idil jaclaadeen, taasna waxay keentay in 25 jirkiisa lagu aamino hantida naag taajirad ahayd oo Makka deganayd. Naagtaas oo ahayd *Khadiijah Bintu Khuwaylad* waxay Nabiga (SCW) u xilsaartay in xoolaheeda uu ku beecmushtaro, markii ay aragtay aaminaaddiisa iyo wanaaggiisana ka codsatay inuu guursado; Nabigana (SCW) wuu ka ogolaaday. *Khadiijah* oo markuu Nabiga (SCW) guursanayay afartan jir ahayd waa naagtii dhashay dhammaan caruurta Nabiga (SCW) waxaan ka ahayn Ibraahim oo hooyadiisa ahayd *Maariyah Bintu Al-Qibdah..* Nabiga (SCW) wuxuu kaloo intuu noolaa guursaday sagaal naagood oo kale, waxayna kala yihiin: *Zaynab Bintu Jaxsha oo ah reer Banii Asad Bin Khuzaymah, Ummu Xabiibah Ramlah Bintu Abuu Sufyaan, Xafsah Bintu Cumar Bin Al-Khadaab, Safiyyah Bintu Yaxyaa,*



*Sawdah Bintu Zamcah, Jooryatah Bintu Al-Xaarith Al-Musdalqiyah, Caa'isha Bintu Abuu Bakar As-Sadiiq, Ummu Salmah Hindi Bintu Abii Umayyah iyo Maymuunah Bintu Al-Xaarith Al-Hilaaliyah.*

Sanadkii afartamaad, ayaa Alle Maxammed u doortay nabinimo, wuxuuna ka dhigay rusulada Alle kii ugu danbeeyay. Mas'uuliyadaan diiniga ah, waxay colaad dhex dhigtay Nabiga (SCW) iyo dadkiisa, waxaana bilawday cadaadis iyo dhibaato joogta ah in loo gaysto Rasuulka (SCW) iyo ciddii rumayso. Arrintaan waxay kaliftay inuu Nabiga (SCW) asxaabtiisa faro inay u safraan dalka Xabashida, halkaas oo markaas ka talinayay boqor Xabashi ah oo caadil ah, aakhirkiina Muslimay. Safarkii Koowaad ee Xabashida soo aaday waa kii dhacay sanadkii 5aad ee nabinimada, waxaana ka madax ahaa Jacfar Bin Abuu Daalib, waxayna ka koobnaayeen toban rag ah iyo shan haween ah. Saddex bilood ka dib, way soo laabteen ka dib markay maqleen hadal been ah oo sheegayo in Nabiga (SCW) iyo dadkiisa ay heshiiyeen. Markiise Makko ku soo laabteen, waxay la kulmeen cadaadis kii hore ka daran, taasoo qasabtay inay mar kale ku laabtaan dhulka Xabashada. safarkaan danbe oo baxay sanadkii 6aad ee nabinimada wuxuu ka koobnaa 83 rag ah iyo 18 haween ah. Walow dhibaato lagu hayay, Nabiga (SCW) wuxuu si joogto ah u waday dacwada Islaamka wuxuuna tagay Daa'if, halkaas oo ah halkii Nabiga (SCW) caruur ku dhagaxaysay illaa korkiisa ka wada dhiigo.

Sanadkii shanaad ee nabinimada, waxaa Nabiga (SCW) loo dheelmiyay samadaha Allana ku soo faray tukashada shanta salaad ee maalin kasta. Dheelmitaankaas wuxuu dhacay habeen Isniin ah bisha Rajabna tahay labaatan iyo todobo. Arrintaan waxay sii kordhisay dooddii ay gaalada ku beeninayeen nabinimada Nabiga (SCW), illaa markii danbe go'aansadeen in Nabiga (SCW) ay dilaan. Ilaahse ayaa Nabiga (SCW) u balan qaaday in gaalada uu ka celinayo. Sanadkii 13aad ee nabinimada ayaa Nabiga (SCW) la faray inuu aado Yathrib halkaasna ka dhiso maamulkii ugu horeeyay ee Islaamka, maadaama Muslimiinta Yathrib ku nool ay ka badnaayeen kuwa Makko jooga. Alle wuxuu kaloo faray in qof kasta oo Muslimo uu aado Yathrib. Guurista Nabiga (SCW) iyo inta raacsan u guureen Yathrib ayaa waxaa la yiraahdaa Hijrah, waana hijradaas midda Muslimiinta taariikh ahaan ay uga qiyaas qaataan. Dadka reer Nabiga (SCW) la soo haajiray waxaa la yiraahdaa *"Muhaajiriin"*, dadka reer Yathrib oo soo dhaweeyay Nabiga (SCW) iyo asxaabtiisa waxaa iyagana la yiraahdaa *"An-Saar"*.

Nabiga (SCW) wuxuu Yathrib soo gaaray maalin Isniin ah, labo iyo tobanka Rabiicul Awal, wuxuuna meesha Quba la yiraahdo ka dhisay masjidkii ugu horeeyay oo ay Muslimka dhistaan. Masjidka Quba oo ka mid ah masaajidda sunnada ah in la tago marka la booqanayo Masjidka Rasuulka (SCW), waxaa kaloo la yiraahdaa *"Masjid Al-Qiblatayn"* maadaama uu yahay masjidka kaliya oo gudahiisa lagu tukaday salaado qaar ka mid ah la tukaday intii

qiblada Muslimiinta ahayd Baytul Maqdas, inta kalana lagu tugaday salaado loo jeesanayo qiblada cusub ee Muslimiinta ee Makka (Kacbada). Waqtiga qiblada laga bedelay Baytul Maqdis lagana dhigay Makka waxay ahayd sanadkii labaad ee Hijrada.
Quba ka dib, Nabiga (SCW) iyo asxaabtiisa waxay degeen bartamaha Yathrib, magaca magaaladaasna wuxuu noqday *"Madiinatu An-Nabiyi"* ama *"Madiinah"*. Bisha Shacbaan ee sanadkaan ayaa waxaa farad laga dhigay soonka Ramadaan iyo Zakaatul Fidriga. Waxaa kaloo sanadkaan la suneeyay tukashada salaadaha labada ciid ee Muslimiinta. Sanadkaan waxaa isguursaday Sayidinaa Cali iyo Faaduma Bintu Rasuulallaah (SCW). Faaduma waxay markaa jirtay 15 sano Calina 21 sano.
*Sanadkii saddexaad* ee Hijrada, waxaa la dhalay Al-Xasan Bin Cali, *sanadka afaraad*na waa sanadkuu dhashay Al-Xuseyn Bin Cali. *Sanadka shanaad* waxaa la waajibiyay xajka. *Sanadka lixaad* waxaa Muslimiinta iyo gaalada dhex maray dagaalo iyo gulufyo badan. *Sanadka todobaad* waxaa dhacay dagaalkii Khaybar. *Sanadka sideedaad* waxaa la furtay Makka. Shan bari ka dib ayaa Nabiga (SCW) diray Khaalid Bin Waliid iyo 30 fardoolay ah si ay u dudumiyaan sanamkii ugu weynaa ee Kacbada yaalay lana dhihi jiray *"Al-Cuzzaa"*. Nabiga (SCW) wuxuu kaloo Cumar Bin Caas u diray inuu soo dudunsho sanamkii *"Suwaac"* ee ku yaalay meel saddex kiilomitir u jirto Makka. Sacad Bin Zayd Al-Ash-hali iyo labaatan fardoolay oo la socotay ayaa iyagana dudumiyay *"Manaat"* oo ah sanamkii reer Aws iyo Khazraj. *Sanadka sagaalaad* waxaa dhacay duulaankii Tabuuk; walow wax iska hor imaad dagaal ah uusan dhicin. *Sanadka tobanaad* ayaa Nabiga (SCW) u diray Khaalid Bin Waliid iyo afar boqol oo fardoolay ah Yeman si Islaamka u gaarsiiyaan Reer Banii Al-Xaarith. Sayidinaa Cali iyo saddex boqol oo fardoolay ah, iyagana waxaa loo diray Reer Banii Madxaj oo iyagana Yaman deganaa. Sanadkaa wuxuu Nabiga (SCW) iyo boqol iyo afar kun oo saxaabi ayaa ka tageen Madiina una xajiyeen Makka. Xajkaas waxaa la yiraahdaa *"Xajul Widaac"*. Nabiga (SCW) waxaa kaloo la socday dhammaan xaasaskiisa wuxuuna Xajkaas ku bireeyay boqol halaad oo geel ah. Lixdan geelaan ka mid ah Nabiga (SCW) gacantiisa ayuu ku qalay, inta soo hartayna waxaa faray inuu Cali qalo. Nabiga (SCW) toban beri ayuu Makka joogay, kuna gutay dhammaan waajibaadka Xajka. Markaas ka dib, wuxuu ku soo laabtay Madiina. Dhamaadkii bishii safar ee sanadka kow iyo tobanaad, Nabiga (SCW) waxaa ku bilawday xanuun, waxaana la oofsaday maalin Isniin, bisha Rabiicul Awalna tahay labo iyo toban, sanadkii kow iyo tobanaad ee Hijriyada. Waxaa la duugay Arbacadii ku xigtay, maamulka Islaamkana waxaa madax ka noqday Abuu Bakar (Cadullaahi) Bin Abuu Qaxaafah. Waxaa dulliga gaalnimada laga xoreeyay meelo ka mid ah Shaam iyo Ciraaq, wuxuuna Abuu Bakar geeriyooday Jamaad Ath-Thaani sanadkii saddex iyo tobanaad ee Hijrada. Waxaa lagu ag duugay qabriga Nabiga (SCW).



Khilaafada waxay u wareegtay Cumar Bin Al-Khadaab, waxaana waqtigiisa la xoreeyay meelo ka mid ah Shaam, Ciraaq, Qudus, Masar, Faaris iyo Armeeniya. Waa ninkii jideeyay samaynta diiwaanada dawladda iyo tirokoobka dadka. Wuxuu faray in la dhiso magaalooyinka ay ka mid yihiin Basrah iyo Kuufah si Muslimiinta u degaan. Markuu toban sano iyo bar xukunka haystay, ayaa waxaa dilay nin la yiraahdo Abuu Lu'lu', waxaana lagu duugay qabriga Abuu Bakar As-Sadiiq dhiniciisa.
Sanadkii 23 Hj. waxaa khilaafada Islaamka qabtay Cuthmaan Bin Cafaan, waxaana waqtigiisa la xoreeyay Qubrus iyo waqooyiga Afrika, waxaana dagaalo xoriyo duun ah ka dhacay Qisdandiin iyo Andulus. Waxaa kaloo la dhamaystiray xoraynta Faaris, Armeeniya iyo Aleksandariyah. Sayid Cuthmaan wuxuu taliska hayay labo iyo toban sano waxaana dilay dad ah Thawaarayn iyo Khawaarij, markii la dilayayna wuxuu jiray sideetan iyo labo sano. Waxaa la dilay maalin Arbaca ah, casirka ka dib, isagoo akhrisanayo Qur'aan, waxaana la duugay maalin sabti ah, 18ka bisha Dul Xajja sanadkii 35 Hj. Waxaa lagu duugay beerta Al-Baqiic, meesha la yiraahdo *"Xash kawkab"*.
Khilaafada Islaamka waxay ku wareegtay Cali Bin Abuu Daalib, waxayna Reer Banii Ummayah oo uu la socdo Macaawiye ku shireen Shaam waxayna Cali weydiisteen dhiigga Cumar. Cali wuxuu kaloo ka war helay in Dalxah iyo Zubayr iyo Caa'isha iyagana ku shireen meel Makko u dhow oo la yiraahdo *Gowgaa'*, waxayna iyagana weydiisteen dhiigga Cuthmaan. Sayidina Cali, wuxuu goobtaa u diray ciidan waxaana ka dhacay dagaalkii *"Al-Jamal"*. Ciidankii Caa'isha wadatay waa laga gacan sareeyay, hase yeeshee wax dhibaato ah lama gaarsiinin. Zubayr dagaalkaas kama qayb qaadan, waxaase lagu dilay meel goobta dagaalka ka baxsan. Dalxah dhaawac ayaa dagaalka ku gaaray, aakhirkiina wuu dhintay.
Ciidanka Sayidinaa Cali, waxay u gudbeen Shaam si Macaawiye iyo inta raacsan loola dagaalo. Waxaa labada ciidan ku kulmeen meel la yiraahdo *"Safiin"*. Sayidinaa Cali afar sano iyo sagaal bilood ayuu xukunka hayay, wuxuuna Islaamka ka maamulayay Kuufah oo Ciraaq ku taalo. Waxaa lagu dilay Basrah, waxaana dilay nin la yiraahdo Khanjar Bin Cabulraxmaan Bin Muljam. Sayidanaa Cali waxaa la dilay subax maalin jimco ah, bisha soonka ahna tahay sagaal iyo toban, sanadkii afartanaad ee Hijrada. Wuxuu jiray 65 sano waxaana lagu duugay Kuufah, meel u dhow Masjidu Ar-Raxbah. Maamulka Islaamka waxaa la wareegay Al-Xasan Bin Cali wuxuuna taliska hayay lixbilood ka dibna sumayn ayuu u dhintay. Waxaa la oofsaday 15ka Muxaram sanadkii 49aad ee Hijrada, wuxuuna jiray 47 sano. Waxaa lagu duugay beerta Al-Baqiic ee Madiina.
Markuu Al-Xasan dhintay, reer Ciraaq waxay ka codsadeen in Al-Xusayn Bin Cali uu ka soo tago Madiina uuna la wareego jagadii walaalkiis uu ka tagay; aragtidaase waxaa hor istaagay Ummawiyiinta; ciidan Ummayiin

ahna ayaa Al-Xusayn ku dilay Bakar Balaa', tobanka Muxaram sanadkii 61aad ee Hijriyada; wuxuuna jiray 56 sano.

Maamulka Islaamka waxaa la wareegay Macaawiye Bin Abuu Sufyaan, wuxuuna dhisay khilaafadii Ummawiyiinta. Khilaafadaan oo ka koobnayd 14 khaliif waxay jirtay illaa sanadkii 132aad ee Hijriyada. Raggii u talinayay Khilaafadii Ummawiyiinta waxay ahaayeen:

*1- Macaawiye Bin Abuu Sufyaan (41-60 Hj)*
*2- Yaziid Bin Macaawiye (60-64 Hj)*
*3- Macaawiye Bin Yaziid (64-64 Hj)*
*4- Marwaan Bin Al-Xakam (64-65 Hj)*
*5- C/malik Bin Marwaan (65-86 Hj)*
*6- Al-Waliid Bin C/malik (86-96 Hj)*
*7- Sulaymaan Bin C/malik (96-99 Hj)*
*8- Cumar Bin C/caziiz (99-101 Hj)*
*9- Yaziid Bin C/malik (101-105 Hj)*
*10- Hishaam Bin C/malik (105-125 Hj)*
*11- Waliid Bin Yaziid Bin C/malik (125-126 Hj)*
*12- Waliid Bin Yaziid Al-Awal (126-126 Hj)*
*13- Ibraahim Bin Waliid (126-127 Hj)*
*14- Marwaan Al-Jacdi (127-132 Hj).*

Ummuwiyiinta ka dib, khilaafada waxay ku soo laabtay Cabaasiyiinta, waxayna khilaafadaan socotay illaa sanadkii 656 Hj. Khilaafadaan oo ka koobnayd 37 khaliif, waxaa ka mid ahaa:

*1- Abuu Cabbaas C/laahi As-Safaax (132-136 Hj)*
*2- Abuu Jacfar Al-Mansuur (136-157 Hj)*
*3- Maxamed Al-Mahdi (157-169 Hj)*
*4- Muusa Al Haadi (169-170 Hj)*
*5- Haaruun Ar-Rashiid (170-193 Hj)*
*6- Maxammed Al-Amiin (193-198 Hj)*
*7- C/laahi Al-Maa'muun (198-218 Hj)*
*8- Abuu Is-Xaaq Maxamed Al-Muctasim (218-227 Hj)*
*9- Abuu Jacfar Haaruun Al-Waathiq (227-232 Hj)*
*10- Jacfar Al-Mutawakal Calallaah (232-247 Hj)*
*11- Maxamed Al-Muntasir (247-248 Hj)*
*12- Abuu Cabbaas Axmed Al-Mustaciin (248-252 Hj)*
*13- Abuu Cabdullaahi Al-Muctazi (252-255 Hj)*
*14- Maxamed Al-Muhtadi Billaah (255-256 Hj).*
*15- Axmed Al-Muctamidi Calallaah (256-279 Hj)*
*16- Axmed Al-Muctadid Billaah (279-289 Hj)*
*17- Cali Al-Muktafi Billaah (289-295 Hj)*
*18- Jacfar Al-Muqtadir Billaah (295-320 Hj)*
*19- Abuu Mansuur Maxamed Al-Qaahir (320-322 Hj)*



*20- Abuu Al-Cabbaas Axmed Ar-Raadi (322-329 Hj)*
*21- Ibraahim Al-Mutaqi Lillaah (329-333 Hj)*
*22- C/laahi Al-Mustakfi Billaah (333-334 Hj)*
*23- Al-Qaasim Al-Mudiic Lillaah (334-363 Hj)*
*24- Abuu Bakar Ad-Daa'ic Lillaah (363-381 Hj)*
*25- Axmed Al-Qaadir Billaah (381-422 Hj)*
*26- C/laahi Al-Qaa'im Bi-Amrillaah (422-467 Hj)*
*27- C/laahi Al-Muqtadi Bi-Amrillaah (467-487 Hj)*
*28- Axmed Al-Mustad-hir Billaah (487-512 Hj)*
*29- Fadlu Al-Mustarshid Billaah (512-529 Hj)*
*30- Al-Mansuur Ar-Raashid Billaah (529-530 Hj)*
*31- Maxamed Al-Muqtafi Li-Amrillaah (530-555 Hj)*
*32- Yuusuf Al-Mustanjid Billaah (555-566 Hj)*
*33- Xasan Al-Mustadii'u Bi-Amrillaah (566-575 Hj)*
*34- Axmed An-Naasir Lid-Diinillaah (575-622 Hj)*
*35- Maxammed Ad-Daahir Bi-Amrillaah (622-623 Hj)*
*36- Mansuur Al-Mustansir Billaah (623-640 Hj)*
*37- C/laahi Al-Muctasim Billaah (640-656 Hj).*

Khaliifada Ummawiyiinta iyo Cabbaasiyiinta mooyee waxaa jiray Khaliifada Al-Faadimiyah oo wadamada Maqrib ee waqooyiga Afrika ka jirtay. Khilaafadaan waxaa aasaasay nin la yiraahdo Cabiidullaah Al-Mahdi oo nasabkiisa galayay Cali Bin Abuu Daalib. Wuxuu ninkaan geeriyooday sanadkii 322 Hj; xukunkana waxaa uga danbeeyay wiilkiisa Al-Qaa'im Maxamed Nazaar oo isna geeriyooday sanadkii 333 Hj. Ka dibna faraciisa ayaa xukunka iska dhaxli jiray, caasimadoodana waxay ahayd Qaahira. Khilaafada Al-Faadumiyah waxay jirtay illaa sanadkii 567 Hj. Waxaa xukunka kala wareegay khilaafadii Al-Ayuubi oo iyadana jirtay illaa sanadkii 648 Hj.

Halkaan waxaan ka aragnaa isbedelka ku dhacay maamulka Islaamka ee lixdii boqol oo sano ugu horeeyay dunida ka jiray. Isbedeladaan qaarkood waxay keenayn iska hor imaadyo iyo dagaalo dadka ku qasbay inay ka tagaan Jasiiradda Carabta una guuraan dhul nabad ah. Dadkaan soo qaxay qaarkood ayaa soo aaday xeebaha Geeska Afrika. Waxaa la aaminsan yahay in qaxootigii ugu horeeyay inuu Soomaaliya soo gaaray inta Nabiga (SCW) uu noolaa, Soomaaliyana ka mid noqotay Daarul Islaam. Middaan ayaa keentay in Cabdulmalik Ibnu Marwaan (65-86 Hj) uu Soomaaliya u soo diro ciidamo uu hogaaminayay Amiir Muusaa Bin Banii Khathcam, gacan weyna ka geystay sidii Qur'aanka iyo diinta loo bari lahaa dadka Soomaaliyeed. Dagaal la'aan ayaa diinta loo qaatay, durbana waxay ku faaftay wadanka oo idil (Fiiri kitaabka *"Bugyatul al-Amal"* 1955, b.:37, Cerulli 1957, b.:266).

Sanadkii 122 Hj, waxaa xeebaha Benaadir yimid safar uu hoggaaminayay

in Sayidinaa Cali ay is xigaan oo la yiraahdo Zayd Bin Cali, waxayna degeen Xamar, Marka iyo Barawa (Stigand 1913, b.:6; Caniglia 1935, b.:20). Safarkaan waxaa ku xigay mid kale oo dhacay 149 Hj, qaxooti badan oo Carab ahna ku yimaadeen Xamar iyo Marko. Safarkaan waxaa ka mid ahaa nin wadaad ah oo la yiraahdo Yahya Bin Cumar Al-Canaazi oo khaliifka Cabbaasiyiinta oo waqtigaas jiray (Abuu Jacfar Al-Mansuur) u soo xilsaaray wacdinta dadka deggan Bariga Afrika iyo inuu dadkaas ka codsado in zakada xoolahooda u diraan maamulka Cabbaasiga ah oo markaas dunida Islaamka ah u talinayay. Arrintaas waa lagu heshiiyay, Muslimiinta Soomaaliyeedna waxay ayideen siyaasadda khilaafada Cabbaasiyiinta. Safar kale oo Cabbaasiyiin ah ayaa Xamar yimid waqtigii uu maamulka Islaamka hayay Haaruun Ar-Rashiid (170-193 Hj). Cabbaasiinta Benaadir ku soo badanaysay waxay keentay in sanadkii 330 Hj. Ummawiyiinta hore dalka u joogtay u guuraan baadiyaha Benaadir oo ay is guursadaan, dhaqanna wadaagaan dadka Soomaaliga ah ee halkaa ku noolaa (Stigand 1913, b.:8). Faraca Ummawiyiinta waxay xidideen dadka la yiraahdo Arsamay (Ajuuraan) waxayna sameeyeen boqortooyo wada xukunta dhammaan koofurta Soomaaliya (Nello 1937, b.:17). Benaadir waxaa kaloo yimid qaxooti reer Makhzuum ah (Fiiri kitaabka *"Intishaar al-Islaam wa al-Curuubah fii maa yalii as-Saxraa al-Kubraa sharq al-Qaarah al-Ifriiqiyah wa qariibahaa"*, 1957, b.:127;*"Taariikh as-Sumal"*, 1961, b.:27, Ali 1977, b.:78-79, 84-87;*"Bugyatul Amal"* boggiisa 42). Benaadir waxaa qarnigii 12-13aad soo gaaray Faarisiin reer Niisaabuur ah iyo Shaashi (Fiiri kitaabka: *"Bugyatul Amal"*, bogagga 36, 42, 46). Isla qarniyadaas ayaa Muslimiin ka timid Masar soo degtay Muqdisha, Kismaayo iyo Marka (Fiiri kitaabka: *"Bugyatul Amal"*, bogagga 85, 100-101).

Carabtaan waxay ahaayeen dadkii Soomaalida muddo gaaban ku gaarsiiyay midnimo iyo isku xirnaan aan hore loo arag. Soomaaliga Muslima waxaa laga arkayay naxariis iyo beernugal aysan lahayn dadka iyo madaxda cawaanta ah. Tusaalana waxaa u soo qaadan karnaa doodii dhexmartay oday cawaan ah ee lagu magacaabo Bucur Baciir iyo wadaad Muslim ah ee la yiraahdo Aw Barkhadle. Halka Bucur Baciir uu dadka iyo xoolaha waraabka iyo daaqa ku canaadi jiray, Aw Barkhadle wuxuu dadka ku boorin jirey inay isku naxariistaan daaqa iyo biyaha dadka ay wadaagaan. Sidaas ayay dad badan u soo raaceen Islaamka waxaana si nabad gelyo ah looga xoog batay odayaashii cawaanta ahaa. Si isku hor imaad iyo isqoomid u dhicin, culumadii Islaamka ahayd waxay odayaashii cawaanta ahaa u ogolaadeen in wiilkii dhashaba samanyo laga siiyo. Arrintaan waxay dadajisay islaamidda odayaashii cawaanta ahaa iyo islaamaynta falalka iyo magacyada cawaaniga ah ee Islaamka ka horeeyay. Tusaale magacii ab-awalka abawalada Soomaalida ee ahaa *"Samawaaq Hiil"* waxaa lagu bedelay *"Sama-Alle Hiil"* oo markii danbe carrabka ka dhigay *Samaale Hiil*.



Dad badan ayaa aaminsan in magaca haatan Geeska Afrika loo yaqaano oo ah *"Soomaaliya"* uu ka yimid magaca ab-awalka la yiraahdo *"Samaale"* oo ugu badnaan dadka Soomaaliyeed ay ku abtirsadaan (Mohamed 1993, b.:8). Waxayse u badan tahay in erayga *"Samaale"* uu isku bedelay *"Soomaali"*, ka dib markuu Islaamka dhex dhigay dadka walaaltinimo iyo isjeceel keenay in qofkii Muslimnimo laga dareemo la soo dhaweysto oo caano uu cabo loo ***soo-maalo.*** Qofkii Muslim ah oo caano la siiyo kaligii caanaha ma cabi jirin ee wuxuu isugu yeeri jiray dadka siibana masaakiinta iyo caruurta markaas ayay hal meel ku wada cabi jireen. Arrintaan waxaa ugu wacnaan karaa iyadoo diinta Islaamka ah ee dadkaasi aaminsanaayeen ay dadkaasi fartay in raashinka la wadaago ama meel lagu wada cuno ka barako badan yahay kan qofka kaligiisa cuno; waxaana daliil u ah xadiith Waxshi Bin Xarbi ka soo xigtay aabihiisa oo isna ka soo xigtay awowgiisa oo yiri: *"Ninbaa yiri Rasuul Allow wax waan cunnaa mana dharagno? Nabiga (SCW) wuxuu yiri: ma gaar gaar baad cunto u cuntaan ? (Saas ha yeelina) ee isla cuna raashinka, bisinka Allana u qabsada, Alle waa idiin barakaynayaaye"*.

Waxaa soo wariyay Abuu Daawuud, Ibnu Maajah, Ibnu Xabbaan, Al-Xaakim iyo Axmed. Dhaqankaan Muslimiinta dalka ku noolaa ay caanaha isugu maali jireen kuna wada cabi jireen ayaa Geeska Afrika ku faafay heer dadka falkaas sameeyo loo baxshay *"soo-maal"*. Halkaan waxaan ka heli karnaa in qeexidda dhabta ah ee erayga Soomaali uu yahay *"dad deggan Geeska Afrika oo diintooda Islaam tahay isla markaasna leh xeer qofka uu ictiqaadsan yahay in xoolihiisa iyo xooggiisa lala wadaago"*. Qeexiddaan waxaa ka muuqdaa inay isleeyihiin waxyaalaha diinta Islaamka dadka ku booriso, iyo micnaha dhabta ah ee Soomaalinimada. Farqiga kaliya oo u dhaxeeyo waa iyadoo Soomaalinimada tilmaamayso dad deggan Geeska Afrika.

Aydiyoolojiyadaan Soomaalinimada ah waxay ka bilaabatay xeebaha dadkooda Muslimay waxayna si tartiib ah ugu faaftay dhammaan Geeska Afrika, heer qarnigii 14aad ugu badnaan dadka deggan Geeska Afrika ay isku yaqaaneen magaca *"Soomaali"*. Isku dhafnaanshaha Islaamnimada iyo Soomaalinimada waxay keentay heer Soomaalidu ku maahmaahdo *"Islaam li' waa Soomaalinimo li'"*. Maadaama waxa ugu muhiimsan oo qofka Muslimka ah looga baahan yahay tahay salaadda, tukashada salaadana ku xiran tahay daahirnimada qofka jirkiisa iyo dharkiisa, ayay culumada dadka ka reebi jireen inay sida geela u kaadiyaan. Qofkii lagu arko inuu istaag ku kaadiyana waxaa la dheli jiray *"Ma gaalbaa tahay"* oo la mid ah *"Ma geelbaa tahay"*. Erayga *"geel"* marka loo isticmaalayo sifo ahaan wuxuu isku bedelaa *"gaal"* oo ah eray dhammaan dadka Kowshiinta ah u yaqaanaan *"geela"*. Erayga *"gaal"* ma tilmaami jirin dad gaar ah ee waa sifo lagu yaqaan qofka sida geela habeedda ama raadka kaadida lugihiisa ku yaalaan. Qofka habeedda leh waa *"gaal"* waayo sida *"gaalka"* (ama geela) ayuu habeed u leeyahay. Lahaanshaha habeeddana waxay cadaynaysaa in qofkaas ma

tukado yahay. Sida la ogyahayna qofka aan tukaninna waa kaafir. Halkii Soomaalida qofka noocaas ah kaafir dhihi lahayd waxay tiraah: *"Qofkaasi waa gaal "* ama sida geela ayuu kaadida iskugu seeraa.

E. Cerulli, I.M. Lewis iyo rag ka danbeeyay oo qoraaladooda raacay ayaa erayga *"gaal"* u qaatay inuu tilmaamayo dadka *"Oroomada"* la yiraahdo, iyagoo hilmaamsan in Oromada Muslimka ah sida Soomaalida u diidaan in lagu yiraahdo *"Gaal"*. Dhammaan dadka Oroomada ahna isku aqoonin *"Gaal"* oo magaca ay isku yaqaanaan yahay Orma. Lewis (1961), ka dib markuu maqlay inay Soomaaliya ku yaalaan qabuura la yiraah *"qabuuro gaalo"*, ayuu ku degdegay inuu yiraahdo Soomaaliya waxaa deganaan jiray dad *"Gaala"* la yiraahdo, uuna markaas ka wado waxaa Soomaaliga deganaan jiray dad Oroomo ah. Waase in la ogaadaa in Soomaalida xabaashaasi u bixisay *"qabuuro gaalo"* ka dib markay Muslimtay, maadaama waqtigaas ka hor qabuuraha dadkii hore loo yaqaanay *"Xawaal Ajaagle"* (Robecchi 1903, b.:112-113). Khaladnimada aragtidaan waxaa kaloo xaqiijisay culumo badan, culumadaasna waxaa ka mid ah Prof. Abdalla (1988), Dr. Ali (1977), Dr H.S. Lewis (1966).

Herbert S. Lewis wuxuu si cad u muujiyay in Oroomada waligood aysan degin Soomaaliya, wixii ka horeeyay 1530kiina ay si joogta ah u deganaayeen harooyinka ku yaala koofurta Xabshida (Lewis H.S. 1966). Inay Oroomo waligeed dhulkaan imaanin waxaa kaloo cadaynayaa in afka iyo degaanka Soomaaliyeed laga helaynin eray la mid ah ama u dhow erayda *"Orma"* ama *"Orooma"*; halka afka Soomaaliga iyo degaanka Soomaaliga ahba ay leeyihiin erayaal iyo magacyo ciiddaa ka badan oo uu ku jiro erayga *"gaal"* oo la micno ah *"geel"*. Erayaashaas waxaa ka mid ah:

*Abgaal (ab-awalada lahaa ayaanka geela, waana tolweyne magaciisa, waxaa kaloo la yiraahdaa waadi u dhow Xaggeri ee ku yaal Bari )*
*Abaq Gaalaat ( Abaqa geela, waana meel magaceeda, waxay ku taal Dooyga)*
*Afagaalle (xiddigo leh qaabka afka geela)*
*Aw Gaalle (Awowgii geela, waana tol magaciisa: Dirmedow- Dabarre)*
*Baargaal (tuurka ka baxa tuurta geela, waana meel magaceeda - Bari)*
*Dabagaalle (xayawaanka seentiisa u egtahay seenta geela)*
*Gaallahagoog (waa meel u dhow Buurta Garaalle ee Bari ku taallo)*
*Gaalboor (geel booray, waana tol magaciisa-: Yarre-Eelay)*
*Gaaldabar (geel dabar, waa nooc ka mid ah cawska ka baxo beeraha)*
*Gaal-eri (geel raacdeen, waa magaca dagaal geel lagu kala dhacay)*
*Gaalgala (waqtiga geela soo galo, ama fiid danbe, waana tol magaciisa)*
*Gaaljacel (dadkii geela jeclaa, waana tolweyne magaciisa)*
*Gaaljeel (dadkii geela jeclaa, waana tol magaciisa-: Seddi Olyeri-Hadami)*
*Gaaljire (waa qofka geela la jira, waana tol magaciisa: Naasiye -Eelay)*
*Gaalmidowle (geel madoobe, waana tol magaciisa-: Hariin)*
*Gaal-ood (geel ood, waa magaca meel koofur ka xigta Xaafuun)*



*Gaal-oog (dadka geela toosiya ama og, waana tol magaciisa-: Liiban-Begedi)*
*Gaal-soori (dadka geela ku martisoora, waana tol magaciisa-: Orsi- Laysaan)*
*Gaalxawaal (waa geel la qalo marka qofweyn uu geeriyoodo)*
*Gaalwaaq (geela waaqa, waana tol magaciisa: Yebedhaal Hilibi)*
*Goygaal (reebidda ma goysmada geela, waana tol magaciisa- Tunni),*
*Gaalkacyo (halkii geela ka kacay, waana meel magaceeda - Mudug)*
*Gaallays (nooc ka mid ah midiyada geela lagu qalo)*
*Gaallayf (nooc ka mid ah midiyada geela lagu qalo)*
*Haruubgaal (haruubka geela lagu liso)*
*Laxowgaal (urug ama TBda ku dacdo geela)*
*Mataangaalle (la dhashay geella, waana tol magaciisa- Tunni)*
*Malkagaalle (halka uu geela maro, waana meel magaceeda - Jubbada Hoose)*
*Maroode-gaalle (moorada geela, waana tol magaciisa-Reer Timirre)*
*Naasogaalle (naaso-geel, waa magaca labo xidig oo dadka qaar u yaqaanaan dirirday)*
*Sangaalle (tixri gala sanka geela)*
*Urgaale (leh shirif geel, waana tol magaciisa - Foolculus)*
*Wangaal (caanaha geela)*

Waxaan halkaan ka aragnaa in *"gaal"* asal ahaan ahayn *"kaafir"* ee uu yahay *"geel"*. Muddo ka dibse, eragaan "gaal" waxaa si gaar ah loogu tilmaami jiray dadka kaafiriinta ah. Qof kasta oo Soomaali ah wuu diidaa in *"gaal"* la yiraahdo, qofkaas haba aaminsanaado shuuciyadda. Sababta taa ugu wacanna waa iyadoo qof kasta oo Soomaali ah ay Islaamnimada liifka uga jirto yuusan ku dhaqminee. Arrintaan waxaa kuu muujinayaa arrin sideetameeyadii dhexmartay laba wiil oo ciyaal maroodi ah (caruurta banaanka seexato) iyo wadaad masiixi ah ee Xamar joogay. Waxaa la sheegay in odaygaas masiixiga ah uu soo watay labadaas canug uuna siiyay waxay cunaan iyo meelay jiifsadaan. Dhibaatada caruurtaas haysato isagoo ka faa'idaysanayo ayaa odaygii masiixiga ahaa wiilashii ku yiri:

*"Waad aragtaan sidaan u fiicanahee, maad diintayda qaadataan?"*

*"Diintaada ma ka duwan tahay Islaamka?"* ayuu yiri mid caruurta ka mid ah. Intuusan ninkii masiixiga su'aasha ka jawaabin ayaa wiilkii kale yiri:

*"Kan waa gaal, diintiisana waa gaalnimo"*.

Ninkii masiixiga ahaa ayaa markaa yiri:

*"Diinteyda gaalnimo ma aha, Islaamna ma aha laakiin waa diinta masiixiga"*.

Wiilka markii hore hadalka la soo booday ayaa markaa yiri:

*"Annaga Soomaali ayaan nahay, gaalnimana ma rabno"*.

Ninkii masiixiga ahaa ayaa markaa yiri:

*"Waad saxan tihiin oo Soomaali ayaad tihiin, laakiin diintayda qaata"*.

Wiilasha kii u roonaa ayaa istaagay oo yiri:

*"Maya, mayaay, jaaw sinyoore"*. Wuuna iska tagay.

Ninkii masiixiga ahaa ayaa wiilkii haray ku yiri:

*"Iska dhaaf markuu soo baahdo ayuu imaandoonaaye".*
Wiilkii yaraa isagoon u jawaabin ayuu gaalkii la sii joogay, gaalkiina wuxuu is yiri kan wuu ka wanaagsan yahay kii horee bal tijaabi in daacad uu kuu yahay iyo in kale. Maalintii kale ayuu u yeeray kuna yiri:
*"Hebelow, buugaan qaad oo warqadihiisa ku tirtir miisaska iyo dariishadaha".*
Wiilkii yaraa wuxuu qaaday buuggii markuu kala feedayna wuxuu arkay inuu Carbi ku qoran yahay, bogga ugu horeeyana ku taal Suuradda Faataxa oo markuu dugsi dhigan jiray uu bartay. Wiilkii wuxuu gartay in boogaasi yahay kitaab Qur'aan ah, markaasuu meel dhigay, hawshii loo dirayna qabtay. Gaalkii ayaa arkay kitaabkii oo fayow iyo hawshii oo la qabtay wuuna gartay inuu wiilka ogolayn in Qur'aanka la googooyo. Markaas ayuu wiilka u yeeray kuna yiri:
*"Hebelow, aniga iyo adiga isku diin ayaan nahay, waana in daacad isku ahaannaa. Si daacadnimadaada aan ku garto ku istaag kitaabka".* Wiilkii yaraa kitaabkii ayuu ku istaagay. Odaygii gaalka ahaa wuu yaabay wuxuuna isweydiiyay sababta wiilkaan kitaabka u jeejeexiwaayay laakiin ugu dul istaagay. Si tijaabadiisa u sii wado ayuu wiilkii ku yiri:
*"Kitaabkaan jeexjeex".*
Wiilkii oo xanaagsan ayaa yiri:
*"Gaal ma ihi; kitaab intaan jeexjeexi lahaa jidkaan jiifanaa ee jaaw".* Wuuna ka tagay.
Soomaalida waa sidaas, oo kan diinta aqoon markii si toos ah diintiisa wax looga sheego, waa ka guban. Si aan mar kale idiin dareensiiyo isku xirnaanta Soomaalinimada iyo Islaamnimada waxaan idiin soo qoray hees-hawl oo ka mid ah heesaha Soomaalida qaaddo marka ay xoolaha ay shubayaan ama hawl adag hayaan. Hees-hawleedkaasna waa:

*Yaa tallaahi galay, Yaa tallaahi galay*
*Oo tolkay noqon, Oo tolkay noqon*
*Oo tol aan tagin, Oo tol aan tagin*
*Taagi ii noqon, Taagi ii noqon.*

Hees-hawleedkaan waxay tilmaamaysaa in tolka dhabta ah oo aan kaa taggayn uu yahay kan tallaahida (ama Islaamnimada) wadaagtaan. Runbuuna sheegay ninkii yiri Islaamnimada waxay ka mid tahay waxyaalaha lagu garto Soomaalinimada dadka (Schlee 1988, b.:3).



# 7 CADOWGA KOOWAAD EE SOOMAALINIMADA

Dhalashada dad Kowshiin ah ee isku xiran oona aaminsan diinta Islaamka uma cuntamaynin guud ahaan gaalada gaar ahaan boqortooyada masiixiga ah ee Xabashida. Xabashida oo ah Saamiin Afrika yimid 500 NCKH, waxay lahaayeen qoraal iyo nidaam dawlo oo ka duwan nidamka tol tolka ah ee Kowshiinta lahaayeen. Arrimahaanna waxay keeneen inay Xabashadu noqoto quwad xoog leh oo qatar joogto ah ku hayso dadka Kowshiinta ah. Xabashida waxay qoraaladeeda ku sheegtay in wixii madax madow ee Geeska Afrika deggan ay iyadu ka mas'uul tahay, mana ogolayn in dadka Geeska Afrika deggan aayahooda ka taliyaan.
Xabashida aragtidaas qabtay, isla markaasna dabada ka soo riixayeen masiixiyadda adduunka ayaa si toos ah uga hortimid dhalashada maamul iyo nidaam ururinayo dad Kowshiinta, siibana markuu maamulkaas yahay mid Islaam ah. Xabashida waxay si gaar ah u cadaadin jirtay Kowshiinta degta waqooyiga Dhulkoraadka Xabashida,waxayna halkaas ka samaysatay boqortooyo la yiraahdo Aksum (Rossini 1928, b.:285-286). Xabashida ma ogoleen in xukunka boqortooyadaas loo soo dhaweeyo qofaan Carab ku asal sheegan oo Saami ahayn. Qarnigii 12aad, maruu boqortooyadaas ka madax noqday nin Kowshiinta Aqawga ah waxaa durba jagadii ka qaaday Xabashiga Saamiga ah ee la yiraahdo Yekun Amlak. (1270 ee NCKD). Waxaa la yiri in sababta loo afganbiyay boqorka Aqawga ahaa ee Zagwa (1137 NCKDb) la dhehi jiray ahayd, iyadoo Boqor Zagwe waxba ka qabanin Kowshiinta Islaamtay ee gobolka Shawa ka samaysatay boqortooyo madaxbanaan. Dhismaha boqortooyadaan Kowshiinta ah waxaa markii ugu horeeyay ka danbeeyay Reer Makhzuuma oo ahaa dadkuu ka dhasay geesigii iyo saxaabiga caanka ahaa ee Khaalid Bin Waliid. Boqortooyadaan waxaa caasimad u ahaa magaalo la yiraahdo *"Walaala"* oo sida magaca uu sheegayo ah meel lagu walaaltinimaynayo dadka. Boqortooyada Makhzuumiinta waxaa ka mid ahaa qof kasta oo Muslim ah, qofkaas ha ahaado Carab ama yuusan ahaanin (Couq 1981, b.:121). Boqortooyadaan waxaa la aasaasay sanadkii 283 ee Hijriyda (ama 896-7 NCKD), waxaase cadaadis badan ku hayay Xabashida. Dhibaatadaas xagga dibadda uga imaanaysay iyo mid waayihii danbe gudaheeda ka dhacay ayaa dhaciifinayay tabarta boqortooyadaan (Huntingford 1989, b.:76), keenayna in si buuxdo aysan uga soo bixin waajibaadkeeda Islaamiga ah.
Si boqortooyadaas loo xoojiyo, ayaa qarnigii 12aad maamulkeeda gacanta ku dhigay nin Soomaali ah oo la yiraahdo Cali Cumar Duunyoxus (Ali Omar Dunya-huz). Waxaa jiraa aragtiyo qaba in Cali aabihiisa uu ahaa ninkii ugu horeeyay ee maamulka kala wareegay Boqortooyadii Makhzuumiinta.

Waxayse u badan tahay in Cumar Duunyoxus uu diiwaan haye u ahaa Makhzuumiinta sidaas darteedna mararka qaar loo yiraahdo Cumar Kaatib Sacaad Daa'uud Ciise Alladir Uturayn. Magacyada *"Duunyoxus"* iyo *"Kaatib"* waa neenaas, waxayse muujinayaan in Cumar ahaa qof aqoonta diinta looga danbeeyay darajo fiicanna ka haystay maamulkii Makhzuumiinta.

Siday ahaataba wiilkiisa Cali ayuu ahaa qofkii magaca ka bedelay Boqortooyadii Makhzuumiinta una baxshay" *Boqortooyada Walaasma"*. Erayga *"Walaasma"* wuxuu neenaas u noqday boqor Caligii aasaasiddeeda ka danbeeyay, sidaas darteed ayaa waxaad la kulmi kartaan qoraalo qorayo Cali Walaasma halka laga dhehi lahaa Cali Cumar Duunyoxus. Boqortooyada Walaasma oo ay Xabashida u taqaan Ifaat, waxay sanado yar ku midaysay Muslimiinta deggan Awdal (Adal), Moora (Mora), Hoobat (Hobat) iyo Jidaaya (Jidaya).

In kastoo Yekun Amlak la socday xoogaysiga boqortooyada Soomaaliyeed ee Walaasma hadana ma rabin dagaal libtiisa uusan isku hubin inuu isku biimeeyo.

Boqorkii ka danbeeyay ee la dhihi jiray Yagbèa Syon ayaa 1285 NCKD dagaalo isdaba joog ah ku soo qaaday qaybo kala duwan ee boqortooyada Walaasma ka mid ah, arrintaan waxay keentay in Muslimiinta deggan Boqortooyada Walasma qaarkood waanwaan la galaan Xabashida, lana dhigteen heshiis Xabashida ku joojinayso burburinta masaajidooda, Muslimiintase canshuur laga qaadayo. Heshiiska waxaa kaloo ka mid ahaa in gabar Muslim ah sanad walbo la siiyo Boqorka Xabashida, iyo inay Muslimiinta kooro isticmaalin markay fardaha fuulayaan.

Soomaalida arrintaan waa u cuntami weyday, waxaana bilawday ololo weyn ee lagu ururinaayo ciidan caabiya handadaadda joogtada ah ee Xabshida. Sanadkii 698 Hj. (ama 1297-8 NCKD) ayaa Shiikh Maxamed Cali Cabdalla ee Reer Awdal ah diyaarshay ciidan ka badan boqol kun oo nin. Raggaan oo ku hubaysan fardo, warmo, gaalleyfto iyo gaashaaman ayaa weerar ku qaaday ciidanka Xabashida, kuna qasbay boqorkii Xabashida ee Yagbèa Syon inuu ka cararo dhul hore uu Muslimka uga qabsaday. Jabkaas Xabashida lagu dhigay ayaa dib u soo celshay niyadda Muslimiin badan waxaanna xoriyad helay Muslimiin badan oo markii hore ku hoos jiray xukunka iyo cadaadiska Xabashida.

Sanadkii 1314kii boqortooyada Xabashida waxaa qabsaday Amda Syon I, wuxuuna u qaylo-dhaan dirsaday wixii masiixi ah oo dibed iyo gudahaba jooga. Wuxuu diyaarshay ciidan xoog badan wuxuuna weerar ballaaran ku qaaday dhammaan dhulka Soomaalida degto ee bariga ka xiga buuraha Xabashida. Waxaa la yiri wuxuu weerarkiisa gaaray Caluula iyo Garbacaddo (oo ah meel koofur galbeed ka xigta Cape of Guardfui) wuxuuse la kulmay dagaal uu faraha kaga gubtay. Waxaa duruus wacan siiyay dad





dagaalyahanno ah oo ay ka mid yihiin reer Warjeex (Ceruli 1957, b:114) oo ka yimid Soomaalida degta dhulka bariga ka xiga dhulkoraadka Xabashada (Huntingford 1965, b.:56-57). Waxay u badan tahay in boqortooyadii Arsamay (Ajuuraan) ee waqtigaas ka talinaysay gobolada koofureed iyo koofur galbeed ee Soomaaliya, xiriir fiicanna la lahayd Boqortooyadii Makhzuuma iyo tii ka danbaysaba, inay u direen ciidamo sooma jeestayaal ah oo ka tallaabay wabiyada Jubba iyo Shabaylle, dagaal lagu hoobtayna la galay ciidamada masiixiga ah ee qatarka ku hayay dhammaan Muslimiinta gobolkaan deggan. Dagaaladaas Xabashida faraha uga gubteen waxaa ka loo ka qayb qaatay Soomaalida la yiraahdo Harlà, sida ay qabaan Paulitiscke iyo Doresse ahaayeen qayb ka mid ah tolweynaha Abgaal walow aysan kala sheegin inay yihiin Abgaalka Ciise ama Abgaal Cismaan (Paulitscke 1893-1896, I; b:56, Doresse 1971, b:183). Ninkii qarnigii lix iyo tobanaad qoray buuggii Futuuxul Xabash uu magaciisu ahaa Shihaabuddiin Axmed ayaa isna sheegay in Harlaha waqtigaas ahaayeen tol weyn oo ay ku jireen dad ay ka mid yihiin Sambuura, Barsare, Yaaqle iyo Gassar, waxayna degnaayeen meel la yiraahdo Zerba (Chihab-Eddin 1897-1901, b:111, 118,170-171). Harlaha waxay ahaayeen dad dagaalyahanno ah oo jirkooda u waaweynaa sida Yaahaaburtii xeebaha Soomaaliyeed ay kula kulmeen badmaaxiinta Roomankii hore ee Soomaaliya yimid. Dadkaan Harla' la leeyahay waa dadkii dhisay taalooyinka burburay ee ku yaal agagaarka Jigjiga (Huntingford 1989, b.:92). Harlaha maanta joogo aad ayay u yar yihiin waxayna degaan meel koofur Galbeed ka xigto Dodab iyo meel la yiraahdo Gorar-ribi oo koofur ka xigto Harar (Doresse 1971, b:183, Cerulli 1957, b:114). Waxay Harlaha ku hadladaan lahjad iyaga u gaar ah, inta yar oo ka hartayna waxaa lagu biirshey Koombe kablalax (Cerulli 1957, I; b:114, Doresse 1971, b:184).

Amda Syon kuma caalqaadan dagaaladii kululaa uu la galay Soomaalida, ee sanadkii 1328 NCKD, mar kale ayuu weerar ku qaaday Boqortooyadii Walaasma oo markaas uu xukumaayay nin la yiraahdo Sabruddiin Maxamed Cali Cumar Duunyoxus. Xabashida waxay bilaabeen inay beeraha iyo tuulooyinka gubaan. Dagaalkaan muddo dheer ayuu socday, ciidamada Xabashidana waxaa gaaray qasaarooyin aysan ka soo waaqsan karin. Ciidamo ballaaran oo uu xoggaaminayo Sabruddiin Maxamed Cali Cumar Duunyoxus ayaa daqaadiqaha ka dhigay ciidamadii Xabashida, waxaana la waayay askari danbe ee Xabashi ah oo dagaal soo hawaysta. Waxaa ciidan ballaaran oo Muslimiin ah xoreeyeen dhulkii hore Xabashida u qabsatay oo ay ka mid ahayd Awdal. Waxaa Xabashida laga saaray Dawaaro, Baali, Haadiya, Arababni iyo Sharkha (Bari).

Jabkii Amda Syon loo gaystay wuxuu keenay in 1344 NCKD, taliska Xabashida uu la wareego Sayfa Ar'ad, wuxuuna durbaba weerar ku qaaday dhulkay Soomaalidu fadhiday. Waa wax wadkiisa wadee, 1372NCKD, Sayfa

Ar'ad oo ciidamo badan wato ayaa weeraray meelo ka mid ah Boqortooyada Walaasma; waxayse asaga iyo ciidankiisa ku dhaceen dabin lagu hasuuqay, wuxuuna noqday boqorkii Xabashida ugu horeeyay oo ay Soomaalida dhegta dhiigga u darto. Taliska Xabshida Sayfa Ar'ad ka dib waxaa qabtay Boqor Dawit I.

Guulahaan isdabjoogga ah, siibana kii lagu dilay boqorkii Xabashida waxay kalsooni ballaaran siisay Muslimiinta, taasna waxay keentay in yara lays dhigto oo jihaadka iyo arrimahiisa aan la xiisaynin. Waxaa bilaabatay in madaxtinimadii lagu tartamo, nin kastana sheegto inuu isaga ka danbeeyay libta ama guulihii Xabashida laga soo hooyay. Waxaa boqortooyada Walaasma ka bilawday xurgufyo keenay hoos u dhaca feejignaanta Muslimiinta. Waxaa waqtigaas taliska Boqortooyada Walaasma hayay wiil la dhashay Haqqudiin oo la yiraahdo Abuu Barakaat Maxammed Cali Cumar Duunyoxus. Sida walaakiisa ayuu isna aad u jeclaa xoriyadda mana ogolayn in Xabashida loo carab laalaadiyo. Sanadkii 788 Hj (1386-7 NCKD), Imaam Abuu Barakaat wuxuu ku shahiiday dagaal uu la galay ciidamada Xabashida, waxaana maamulka la wareegay Sacaaduddiin Abuu Barakaat Maxammed Cali Cumar Duunyoxus. Dilkii Imaam Barakaat ayaa dib u soo dhisay niyadda Xabashida waxayna weerar kala goys lahayn ku soo qaadeen Boqortooyadii Walaasma, arrintaan oo markii danbe keentay in Sacaaddudiin iyo ciidankiisa ku soo ururaan jasiirad yar ee u dhow Zaylac.



Boqor Yeshaq (1414-1429) oo xukunka uga danbeeyay Dawit I, ayaa u qaylo dhaan dirsaday masiixiinta adduunka siibana Alphonso V (1416-1458), wuxuuna la galay xashiis gaashaanbuursi oo uu ku rabo in Islaamka laga tirtiro Geeska Afrika. Si uu xashiiskaas u ogolaado waxaa la yiri Boqorka Xabashida naag reer boqor ah ayuu ku daray Alphonso V (Roncière 1924-25, II, b.:116). Xashiisyadaan waxay keeneen in kaalmo militari oo tiro badan la siiyo Xabashida, weeraradana lagu kululeeyo Soomaalida, waxaana dagaaladaas ku dhintay Sacaddudiin.

Soomaalida dib ayay isku habeeyeen waxaana la qaaday dagaal aan loo kala harin, waxaana Xabashida iyo xulufadeeda masiixiinta ahaa laga saaray dhulka Soomaaliyeed waxaana dib loo dhisay boqortooyadii Walaasma. Si weerarada maraakiibta Boortaqiiska looga fogeeya xarunta Boqortooyada Walaasma ayaa xaruntii laga raray Zaylac lana geeyay meel Daqar (Dakar) la yiraahdo oo koofur bari ka xigta Harar una dhow Fiyaambiire. Sababta Daqar xarunta Walaasma looga dhigay waxaa kaloo ugu wacnaa iyadoo ahayd xudunka dhulka Boqortooyada Walaasma isla markaasna waxaa ku heeraarsanaa dhul ay degaan Soomaali wada dagaalyahanno ah. Daqar waxaa laga dhisay qalcad adag oo aan cidi soo dhaafi karin, magaca Boqortooyadii Walaasmana waxaa lagu bedelay *"Boqortooyada Awdal"*. Boqorkii koowaad ee Awdal wuxuu ahaa Arwe Badalaaye (Arue Badlai) Sacaaduddiin Abuu Barakaat Maxammed Cali Cumar Duunyoxus (1434-1445). Waxaa dib u bilawday dagaaladii lagu xorayn lahaa dhulka Islaamka laga qabsaday (Cerulli 1934, b.:105-109). Arwe Badalaaye wuxuu la dagaalay Zara Yacob oo ahaa boqorka Xabashida ee xilligiisa, wuxuuna boqorkaas iyo ciidamo uu wato ka raacdeeyay dhammaan gobolka Dawaare. Sanadkii 849 Hj (1445 NCKD) ayaa Arwe lagu dilay dagaal ka dhacay meel la yiraahdo *"Cayfaras"* (Ayfaras). Dagaalkaas waxaa sii waday Garaad Mahiiqo (Mahiko), oo isna muddo yar ka dib dhintay (Huntingford 1989, b.:102).

Markii uu shahiiday Arwe Badalaaye waxaa maamulka boqortooyada Awdal la wareegay walaalkiisa Maxammed Badalaaye Sacaaduddiin Abuu Barakaat Maxammed Cali Cumar Duunyoxus, wuxuuna maamulka hayay inta u dhaxaysay sanadihii 1445 illaa 1475 NCKD. Maxamed Badalaaye wuxuu go'aansaday in waanwaan nabadgelyo la galo boqorkii Xabashida ee Zara Yacob ku xigay lana oran jiray Ba'eda Maryam (1468-1478 NCKD). Xishiiskaas wuxuu sheegayay in gabar iyo in cansuur koodhi ah sanad walba la siiyo Boqorka Xabashida. Gabadha Muslimka ah intaan Xabashka guursan waxaa ku qasab ahaa inay gaalowda, gabdhaha la gaaleeyay ee boqorada Xabashida ay guursadeenna waxaa ka mid ah Romane-warq iyo Helena. Romane-warq waa naagtii dhashay Boqorka Xabashiga ah ee la yiraahdo Eskender, boqortooyadana ka dhaxlay Ba'eda Maryam. Helenana oo uu dhalay Garaad Abuun Cadash oo ahaa amiirka Dawaaro, waa naagtii uu guursaday boqorka Xabashiga ah ee la yiraahdo Na'od (1494-1508 NCKD), waxayna u dhashay Lebna Dengel oo isna Xabashida boqor u noqday.



Xishiisyadaan Maxamed Badalaaye la galay Xabashida waxay aad iyo aad uga caraysiisay culumada iyo rag badan oo magac ku leh Soomaalida dhexdooda, laakiin qof walba ma rabin dagaal dhiig sokeeye lagu daadsho. Sanadkii 1471 NCKD waxaa geeriyooday Maxammed Badilaaye, waxaana xukunka la wareegay wiilkiisa Shamsuddiin Maxammed Badalaaye Sacaaduddiin Abuu Barakaat Maxammed Cali Cumar Duunyoxus. Shamsuddiin ma raacin wadadii aabihiisa wuxuuna cadeeyay inuu la jihaadidoono Xabashida. Baaqiisa waxaa durbaba ku taageeray Amiir Ladhaay Cusmaan oo markaa ahaa maamulaha gobolka Zaylac. Amiirka wuxuuna ballan ku qaaday in hiil iyo hooba ku taageero ciddii rabta inay u aarto Arwe Badalaaye oo Xabashida ku dishay dagaalkii Cayfaras. Sanadihii 1473 iyo 1474 NCKD, ciidan uu Amiir Ladhaay uu hoggaaminayo ayaa dib u waabiyay labo weerar oo ay soo qaadeen ciidamo huwan ah uu hogaaminayay Ba'da Maryam.

Markuu geeriyooday Shamsuddiin, maamulka Boqortooyada Awdal waxaa la wareegay nin la yiraahdo Maxammed Azharuddiin (1488-1518 NCKD), maamulkaanna wuxuu mar kale la heshiiyay Xabashida. Muslimiinta guud ahaan, gaar ahaan Soomaalida ma rabin in waanwaan cadaaladda ka fog lala galo Xabashida, maamulka Boqortooyada Awdalse waxay ka fakarayeen dadka tirada badan ee ku la'day dagaalada afarta boqol sano ka dhex socday

Xabashida iyo Soomaalida. Dadka Soomaaliyeedse arrintaas ma rabin oo waxaa u kacay Amiir Muxammed Abibiker oo reer Harar ahaa wuxuuna amar la'aan weeraray Xabashida fadhiday gobolka Fatajaar, Ifaat, Dawaaro iyo Shawo. Amiir Maxamed waxaa dagaalkaas ku gacansiiyay Garaad Abuun oo ahaa amiirka Dawaare, isla markaana ahaa ninkii gabartiisa uu boobay Boqorka Xabashiga ah ee la yiraahdo Na'od.

Dagaalada Soomaalida ay ku haayeen Xabashida waxay keentay in Boqor Na'od u qaylodhaan dirto masiixiinta caalamka oo idil isagoo leh haddaan layga soo gaarin masiixi kale Geeska Afrika lagu arkimaayo. Bortugiiska oo waagaa ka mid ahaa dawladaha quwadda badda ugu xoog badan ayay Yurub u xilsaartay in maraakiib iyo ciidan u diro Geeska Afrika, maraakiibtaasna garaacaan dhammaan magaalo furdooyinka Soomaaliya. Sadexada Janaayo 1494 NCKD ayaa ciidan uu hoggaaminayo Vasco de Gama soo gaareen Soomaaliya waxayna weerarkooda ka bilaabeen magaalooyinka Baraawe iyo Muqdishow oo ahaa furdooyinka ugu waaweyn ee sahayda iyo saanadda gaarsiinayay mujaahidiinta Soomaaliyeed ee gumaysiga Xabashida la dagaalayay. Ciidankaas Bortuguuska oo wali ka caraysan sida Soomaalida u laayeen Pedro da Covilha iyo ciidankiisa ayaa barri iyo badba ka garaacay magaalada Baraawe. Ciidamada masiixiinta reer Yurub waxay isku dayeen inay gacanta ku dhigaan Baraawe, hase yeeshee sida uu sheegay Vasco De Gama waxay

78 la kulmeen dagaal kulul waxayna dantii bidday inay naftooda la baxsadaan (De Gray Birch 1884, b.:44-45, Hamilton 1951, b.:58-59). Jabkii masiixiinta reer Yurub ku gaaray Baraawe waxay keentay inay wax ka bedelaan qorshahoodii hore oo ahaa inay wada qabsadaan magaalo furdooyinka Baraawe, Muqdishaw iyo Zaylac.

Ciidamadaas Bortugiiska u badnaa waxay ka cabsadeen in cag soo dhigaan Muqdishu, sidaas darteed ayay magaalada badda ka garaaceen. Jabka dagaalkaas ka raacay awgeed, muddo sideed sano ah, markab Boortugiis iyo reer Yurub leeyihiin kama soo ag dhawaanin xeebaha Soomaaliyeed. Sanadkii 1507 ayaa Boqor Emanuellaha Bortigiiska Geeska Afrika u soo lix markab oo kuwa dagaalka ah. Admiraalka maraakiibtaas wuxuu ahaa Tristano da Cunha, abbaanduulka ciidankuse wuxaa ahaa nin la yiraahdo Alfonso d'Albuquerque (De Gray 1875, I-b.:44). Afar boqol oo ciidamada cagta ee Bortaqiiska ah ayaa ku soo duushay Baraawe madaafiicda maraakiibtana hoobiye ayay ku garaaceen magaalada. Lix kun oo ciidamada Soomaalida ah ayaa ka hortagay afartii boqol oo masiixiinta ah, waxaana dhacay dagaal xun oo lagu hoobto (dal Verme 1889, b.:36). Ciidamada masiixiinta waa la jabshay, waxayna dan baday inuu ku cararaan maraakiibtooda; mid maraakiibtaas ka mid ahna dab ayaa la suray. In kastoo meelo magaalada ka mid ah madaafiicda laga soo ridayay ay burburiyeen, hadana wuu yaraa khasaaraha gaaray Soomaalida.


Difaac kan Baraawa ka daran ayay Soomaalida dhigtay Moqdishow, Bortugiiskana naftaa siin weysay inay xeebta Muqdishow cag soo dhigaan. Dhowr madaafiic oo gootin-fulay ah ayay badweynta ka soo tuurtuureen, ka dibna meeshii ka carareen. Hooggaan ka dib, maraakiibta Bortugiiska waxay aad iyo aad uga fogaadeen xeebaha Soomaaliyeed waxayna saldhiga ka samaysteen Jasiirada Soqotara oo u dhow xeebta Soomaaliyeed ee gobolka Bari. Maraakiibtaas waxay qashqashaadi jireen doomaha u soo socda Soomaaliya, laakiin kuma dhicin inay yimaadaan carrada Soomaaliyeed.

Soo galidda tooska ah uu Bortugiiska iyo xoogagga masiixiga adduunka soo galeen dagaalka u dhaxeeya gumaysiga Xabashida iyo dadka xoriyadoonka ah ee Soomaaliyeed waxay qiiro iyo isku xirnaan dheeri ah galisay dhammaan Muslimiinta Geeska Afrika, gaar ahaan dadka Soomaaliyeed. Jabka Soomaalida koofureed u gaysteen ciidamadii huwanka ahaa uu Bortugiiska watay waxay astaan cad u ahayd sida Soomaalida meesha ay joogaanba hiil iyo hoo u garab istaagnaayeen dagaalada xoriyodoonka ah ee Amiir Maxammed ku diidanaa adoonsiga Xabashida. Amiir Muxamed wuxuu xoojiyay dagaalada uu ku hayay xabashida, wuxuuna 1516 NCKD qabsaday Fatijaar.

Intay Amiir Maxammed iyo ciidamadiisa ku maqnaayeen dagaalka Fatijaar, ayaa maraakiib dagaal uu Bortugiiska leeyahay dhuumaal ku timid Berbera, meelo magaalada ka mid ahna gubtay. Weerarkaan dhacay intuu Amiirka 79
Zaylac ka maqnaa waxay cadaysay in maamulka Boqortooyada Awdal ka dan lahayn difaaca dalka iyo dadka Soomaaliyeed, waqtigiisana ku baabi'iyay beecmushtar iyo arrimo adduunyo. Arrimahaanna waxay keeneyn badashada eedda dadka ay u jeedinayaan maamulka, waxaana sii yaraatay kalsoonida maamulka iyo dadka ka dhaxaysay. Waxaa daciifay awoodda difaac ee Boqortooyada Awdal, sanadkii 1518kiina dagaal gaadmo ayaa lagu dilay Amiir Maxammed Abibeker. Masiixiinta oo idil siibana Xabashida iyo Bortugiisa waxay aad ugu farxeen geerida Amiir Maxammed, isla sanadka uu Amiirka dhintayna maraakiibta Bortugiiska waxay ku dheeradeen inay gubaan Berbera, wixii yaalayna bililiqaystaan. Geerida Amiir Maxamed iyo weerarka Berbera waxay keeneen iska hor imaad sokeeye, shan qofoodna ayaa labo sano ka yar isku kala bedeshay maamulka Boqortooyada Awdal.

Qalalaasahaan waxaa ka soo dhexbaxay Garaad Abbuun Cadash (Adash) oo ahaa gacan hayihii koowaad ee Amiir Muxammed Abibeker, saddex sano gudaheedna dalka oo idil nabaddii ku soo celshay. Wuxuu dalka ku soo celshay ku dhaqanka sharciga Islaamka, muddo yar ka bacdina dib u soo dhismay niyadda iyo dhaqaalaha dadka (Fiiri kitaabka *"Futux al Xabash"*,b.: 6). Laakiin reer Badalaaye oo muddo dheer haystay maamulka Boqortooyada Awdal waxay diidanaayeen in qof aan iyaga ahayn dalka

maamulo, waxayna aaminsanaayeen in maamulaha dhabta ah ee Boqortooyada Awdal uu yahay Abuukar Maxammed Badalaaye Sacaaduddiin Abuu Barakaat Maxammed Cali Cumar Duunyoxus. Sanadkii 1520kii, Abuukar Maxamed wuu ka guuray Zaylac, wuxuuna degey Harar, halkaasna wuxuu ka aasaasay ciidan isaga raacsan. Ciidankaas ayaana ka danbeeyay dilkii Garaad Abuun lagu dilay Zaylac sanadkii 931 Hj (ama 1525 NCKD). Waxaa la galay waqti kale oo arbushka iyo dhibaatada badan tahay waxaase dhibkii joogsaday markuu maamulka Boqortooyada Awdal gacanta uu ku dhigay Maxamed Ibraahim Guray.






# 8 HALGANKII AXMED IBRAAHIM GUREY

War sidaas ah lagama hayo nolosha intii uu yaraa Imaam Axmed Ibraahim Gurey waxaase la sheegay in 1506 NCKD ku dhashay magaalo la yiraahdo Hoobat (Fiiri kitaabka: *"Kashf as-sudul can taariith as-Sumal"* 1974) oo ay deganaan tol la yiraahdo Balaw ama Bulow (Chihab-Eddin 1897, b.: 6). Imaam Axmed waxaa soo barbaaray nin la yiraahdo Caadle, ninkaas oo markii danbana kacan ka siiyay dagaalada uu Imaam Axmed kula jiray masiixiinta Xabashada iyo Boortugiiska (Fiiri kitaabka: *"Kashf as-sudul can taariith as-Sumal"* 1974). Imaam Axmed isagoo yar ayuu Qur'aanka bartay, markuu soo xoog roonaadayna wuxuu ku biiray ciidamadii uu hoggaaminayay Garaad Abuun Cadash. In kastuu yaraa, Imaam Axmed wuxuu ahaa nin firfircoon, dhaqan wanaagsan, geesiya, si fiicanna u yaqaano hubka lagu dagaalo. Dagaalyahannimadiisa waxay keentay in isagoo yar lagu daro gabadha uu dhalay Amiir Mohamed Abibeker ee la yiraahdo Deelwaanbara; wuxuuna jiray labaatan sano markuu dhimanayay Garaad Abuun, Imaam Axmed Ibraahimna la wareegay jagada dagaalgalinta xoogagga ka soo horjeeda Xabashida. Wuxuu dib u urushay ciidamadii Garaad Abuun iyo Amiir Maxammed ka tageen wuxuuna qalcad dagaal ka dhigtay Hoobat.

Sidii macalimintiisa ka horaysay Imaam Axmed wuxuu diiday in xoolo danbe ay Soomaali leedahay uu Xabash qaato. Arrintaasna waxay ka caraysiisay saraakiisha Xabashida. Degelhan oo fadhiyay Baali ayaa bisha Rajab kowdeeda ee sanadkii 935 ee Hj (1527-8 NCKD) weerar ku soo qaaday ciidamada Imaam Axmed Ibraahim oo fadhiyo meel la yiraahdo *Caad-Dir*. Weerarkaas waxaa ka qayb qaatay kumanaan ciidamada Xabashida ah oo wada fardoolay ah, Axmed Ibraahimna wuxuu ciidan ahaan u watay waxaan gaaraynin boqol nimood oo fardoolay ah. Dagaalkaan si xun ayaa loogu baaba'ay, Xabashida la dilayna way ka badnaayeen 400 oo qofood (Dei Sabelli, b.:67).

Libta dagaalkaan iyo geesinimada Imaam Axmed ayaa dalka wada gaartay, meeshuu tagana waa laga soo dhawaynayay waxaana ku darsamayay dhalinyaro cusub oo dagaalyahanno ah. Imaam Axmed wuxuu ku laabtay Harar isagoo sii maray Fitajaar. Marka Harar uu tagay waxaa ciidankiisa ku soo biiray kumanaan qofood oo rag iyo haween leh. Xabashida oo ka caraysan jabka gaaray Degelhan ayaa weerar kale ku soo qaaday Imaan Axmed Ibraahim iyo ciidankiisa. Ciidamada rasmiga ah ee Xabashida ee waqtigaas waxay dhamaayeen lix iyo toban faras iyo labo boqol oo kun oo nin oo farada ku dagaal gasha. Ciidamada cagta ee Xabashida ciiddaas ayuu ka badnaa, oo Imaam Axmed wuxuu ciidankiisa fari jiray in marka dagaalka la galayo aysan fiirin ciidamada Xabashida si tiradooda aysan uga argagixin.

Ciidan noocaas ah ayaa Soomaalidii soo weeraray, Imaam Axmedna waxaa qasab ku noqotay inuu ciidankiisa saddex qaybood u qaybsho si loo waajaho ciidankaas Xabashida: ciidamada *"bardhaxaadka"* la yiraahdo oo ka kooban dagaalyahanada qibradda leh. Kooxdaan waxay ka koobnaayeen 560 nimood oo lagu xoojin karo 700 boqol nimood oo ah ragga kuwa ugu qatarsan. Kooxdaan waxaa ka mid ahaa 300 oo nin oo seefta ku dagaasho iyo 400 oo nin oo fallaarta ku dagaasho. Ciidamada bardhaxaadka ah waxaa dagaal galin jiray Imaam Axmed Ibraahin Gurey. Labada kooxood kale oo mid kasta ka kooban 6,000 nimood oo mutadawiciin ah waxaa la yiraahdaa ciidanka *"baalasha"*, waxayna kala ahaayeen ciidanka ka dagaal gala baalka midigta iyo kan baalka bidixda ee goobta dagaalka.

Imaam Axmed Guray oo wali ku jira diyaarinta ciidankiisa ayaa ciidanka Xabashida ee Tigray ka yimid weerar ku soo qaaday ciidamadii la dhahayey *"bardhaxaadka"* uu Imaam Axmed Ibraahim Guray watay, waxaana la gaaray heer gacan ka gacan noqoto oo laysku dhidid iyo dhacaan beelo. Futuux Al-Xabash waxaa ku qoran in markay Soomaalida weerar galayso ay qaylo cirka ku dhajin jireen iyagoo leh: *"Yaahuu, Yaahuu"*. Qaylada iyo guhaadka Soomaalidana wuxuu argagax iyo cabsi ku beeri jiray ciidamada Xabashida. Dagaalkaan oo bilawday waabarkii wuxuu nafis la'aan socday illaa casirkii, Xabashidana waxay xoogoodii isugu geeyaan halkuu Imaam Axmed Gurey ka dagaalayay. Ciidamada fallaarayda ah ee Soomaaliyeed ayaase Xabashkii

soo dhaqaaqaba fallaar xabadka kaga taqraarayay. Ciidankii Xabashida oo afarta gees laga soo galay ayaa waxaa ugu danbeentii la xaaqay oo laga dhigay wax carara iyo wax dhintay oo ciidda lagu rogay. Goobtaan waxaa xabashida uga dhimatay toban kun oo nimood iyo labaatan iyo sideed sarkaal oo ahaa kuwa ugu sareeyo ciidanka Xabashida. Dagaalkaan ay Xabashida ku hoobatay wuxuu ka dhacay meel la yiraahdo "Simbitaguray" oo u dhaxaysa degmooyinka Moojo iyo Caqaaq. Saraakiisha ugu waaweyn ee Xabashida laga dilay waxaa ka mid ahaa: Rubiin Miikaa'iil iyo walaalkiisa Caqbaa, Zabri Shom, Baluraas, Zamnajaan, Zuunajiil Baxarnajaash.

Dagaalkaan wuxuu keenay burburka ciidankii ugu xoog badnaa ee Xabashida, waxaana xoogaystay niyadda dagaalyahannada iyo maamulka Soomaaliyeed. Imaam Axmed wuxuu ku soo laabtay Harar wuxuuna dagaalyahanadiisa faray in sadex bilood ay nastaan nin walbana aado reerkiisa, fardahana la soo naaxiyo. Imaam Axmed wuxuu nasasho u aaday meel la yiraahdo Zirbah, waxaana sii raacay 30 fardoolay ah. Muddadaas fasaxa ah, wuxuu Imaam Axmed uga faa'idaystay dib u heshiisiinta Soomaalida, wuxuuna socdaal ku gaaray Dalfaay oo ku tiil deegaan la yiraahdo Jilib. Wuxuu soo maray shabeelle wuxuuna soo laabtay isagoo wato ciidan lixaad badan. Sanadkii 1528dii ciidamada Soomaaliyeed waxay weerar ku qaadeen Dawaaro, gobolkaas oo idilna waxay ka raacdeeyeen ciidamadii Xabashida ee dhulkaas fadhiyay. Isla sanadkaas, 12,500 dagaalyahan oo Soomaali ah ayaa raacdaystay ciidamadii Xabashida ee degganaa Fitajaar. Dagaalada uu Imaam Axmed galay 1528, waxaa u kululaa kii ay isku heleen Soomaalida iyo fallaarayda Xabashida ee la yiraahdo Maya. Dagaalkaas oo loo yaqaano *Badake* wuxuu ka dhacay meel u dhow Wabiga Samarma; ugu danbaystiina fallaarayda Maya waa la wada laayay. Markuu ba'aas qabsaday ayaa boqorkii Xabashida ee Lebna Dengel wuxuu kaalmo weydiistay masiixiinta adduunka, waxaana lala soo gaaray hub iyo saanad aan la qiyaasi karin. Bisha Maajo 1529kii, Xabashida waxay soo qaaday dagaal ay soo qaaddo kii ugu weynaa. Boqorka wuxuu ku soo dagaal galay 216,000 oo nimood oo isugu jira fardoollay, fallaaray, warmoolay iyo seeflay. Ciidamada Imaam Axmed ugu talagalay inuu la dagaalo ciidankaas Xabashida waxay ahaayeen 12,600 oo kaliya, nin kasta oo Soomaali ahna waxaa hal mar ku soo aadayday 18 nimood oo Xabashi ah. Dagaalkaas si xun ayaa Xabashida loogu gumaaday waxayna goobta dagaalka uga tageen 120,000 oo bakhtigooda ah. Inta hartayna dhaawacooda ayay la carareen. Xabashida dagaalkaas lagu dilay waxaa ka mid ah sarkaal reer boqor ah oo haystay gobolka Tigrai lana yiraahdo Rubel. Waxaa kaloo halkaan lagu dilay Rubel aabihiisa, Egba Micheal, iyo abbaanduul la yiraahdo Fanuel. Goobta dagaalkaas ka dhacay waxaa la yiraahdaa *"Shimbiragura"*, sababta magacaas loogu baxshayna waxay ahayd iyadoo bakhtigii Xabashida meesha uga tageen aad u badnaa muddana haadda iyo shimbiru cunaayeen.

Soomaalida markay labo bilood nasatay ayay halkii dagaalka ka waday oo

weerar ku qaadeen Jawaatir, Zagbah, iyo gobolka Baali waxayna meelahaas ka soo hooyeen guulo waaweyn. Soomaalida waxay raacdo ku raadsheen Boqorkii Xabashida Lebna Dengel oo cabsi awgeed habeenba meel u seexan jiray. Raacdeentaas iyagoo ku jiro ayaa 23 Febraayo 1531dii ciidan Soomali ah dusha uga dhacay 6,000 oo fardoolayda Xabashida ah iyo 100,000 fallaaray oo la socotay. Ciidamada Soomaalida waxay ahaayeen 500 fardoolay ah iyo toban kun oo ciidanka cagta ah. Soomaalida durbaba weerar ayay ku ekeeyeen Xabashadii, waxayna firir iyo carar ku rideen ciidamadii Xabashida. Eslamo oo ahaa abbaanduulka ciidankaas wuxuu ka mid ahaa raggii cagta wax ka dayay. Goobta dagaalkaan ka dhacay waxaa la yiraahdaa Cantuugyo (Antokia). Abbaanduulka Eslaamo ee ka baxsaday dagaalkii Cantuugyo waxaa lagu dilay dagaal Cayfaras ka dhacay 31 Maarso 1531.

Xabashida si la yaab leh ayay meel kasta uga dib guratay, boqorkoodana wuxuu koray buur dheer oo aan la gaari karin lana yiraahdo Joraaji. Luulyo 18keeda ee 1531, Soomaalida waxay qabsatay magaalo istaraatiiji ah oo la yiraahdo Dabra Libanos, maalintii ku xigtana waxay cagta mariyeen ciidamo ajnabi iyo Xabashi isugu jira oo rabay in Fatijaar weeraraan. Abbaanduulka ciidankaas oo la dhihi jiray Wasan Sagad waa la bireeyay. Soomaalida waxay ku wada guulaysatay dagaaladii dhacay 1531 oo ay ka mid ahaayeen

dagaalkii Wasel oo dhacay 26ka Oktoobar iyo dagaalkii Ambe Gishe oo dhacay 24ka Nofeembar.

Bishii Janaayo 1532, dagaalyahanno Soomaaliyeed oo 30,000 gaaray iyo 50 duqawda Soomaaliyeed ah ayaa loo diray Debra Berhan, soonka sanadkaasna waxaa lagu wada soomay gobolka Guraaga. Sanadihii 1532-34, Imaam Axmed Ibraahim wuxuu maamulkiisa gaarsiiyay Eretariyah. Maamulka Soomaaliyeed wuxuu 19 Maarso 1537 NCKD gaaray Harada Taana, waxaana la go'doomiyay boqorkii Xabashida ee Lebna Dengel. Wiilka curadka u ahaa boqorka magaciisuna ahaa Fiqtor iyo ciidan ballaaran uu hoggaaminayo ayaa 7dii Abriile 1539 isku dayay inay furtaan boqorkii la go'doomiyay, waxayse dhaafi waayeen ciidamada Soomaaliyeed ee ku geydaamanaa halka boqorka uu ku jiro. Weerarkaas Xabashida soo qaadeen waxaa lagu laayay Xabashi tiro badan waxaana dadkii la dilay ka mid ahaa wiilkii boqorka ee la yiraahdo Fiqtor. Sanad ka dib Soomaalida waxay go'aan ku qaateen inay weerar ku qaadaan meeshii uu ku dhuumanayay boqorka Xabashida iyo ciidamo badan ee la jiray, waxayna 2da bishii Sibteembar ee 1520kii cagta wada mariyeen dhammaan ciidamadii difaacayay boqorka gacantana waxay ku dhigeen, qoortana ka jareen boqorkii Xabashida ee Lebna Dengel.

Lebna Dengel wuxuu nodqay boqorkii labaad ee Xabashiga ah oo ay Soomaalidu disho, arrintaanna waxay fiig iyo naxdin ku noqotay dhammaan masiixiinta adduunka. Caalamka masiixiga waxaa u muuqatay in kacaanka Islaamiga ah ee Soomaalida si weyn ugu fidayo Geeska Afrika, haddaan si deg deg ah wax looga qabaninna Islaamka uu wada gaarayo dhammaan Afrikada Bari. Waxaa u cadaadaday in Soomaalidu Afrikada kale gaarsiin karto siyaasadda gumaysi naceybka ah, arrintaasna waxay ka hortagaysay qorshaha Yurubka ay ku rabeen inay ku wada addoonsadaan adduunka siibana Afrikada madowga ah. Waxay masiixiinta Yurubka istuseen in Xabashida tahay cidda kaliya ee dammaanad qaadi karto siyaasadda Yurubka ay ka leeyihiin Afrika, maadaama Xabashida asal ahaan Afrikaan ahayn. Yurubka waxaa u cadaatay in hubka iyo saanada ay hore Xabashi u siiyeen uusan celinin xoogagga xoriyadoonka ah ee Geeska Afrika sidaas darteedna loo baahan yahay in Geeska Afrika loo diro ciidamo reer Yurub ah oo lagu xoojiyo ciidamada masiixiga ah ee hore halkaa uga dagaalayay. Waxaa soo baxay kumaan kun oo calooshood u shaqaysata ah, waddanka Bortugiiska oo cadowtooyo gaar ah u qabay ummadda Soomaaliyeedna ayaa maxaysatadaas ku xoojiyay afar boqol iyo konton sarkaal oo xul ah kana mid ahaayeen khubarada waqtigaas ku xeeldheeraa dagaalka. Ciidamadaas waxaa madax looga dhigay labo nin oo la dhashay badmaaxii caanka ahaa ee Vasco de Gama, lana kala yiraahdo d. Estevam iyo d. Christovao. Estevam wuxuu ahaa admiraalka maraakiibta dagaalka, Christovao wuxuu ahaa abbaanduule ciidanka dagaalka (Petrucci 1993,



b:14). Ciidamadaas oo maraakiib looga keenay Yurub waxay wateen saanad iyo hub hore loo keenin Afrika, waxaana u dheeraa madaafiicda iyo qoryaha dabtuurka ah. Ciidamadaan oo marka hore ku tala jiray inay burburiyaan magaalofurdooyinka Soomaaliyeed, dhabar jabinna ku sameeyaan ciidamada Soomaaliyeed ee ka dagaalayo Gabbal waxay qorshahooda bedelayn markay maqleen in la dilay boqorkii Xabashida ee Lebna Dengel iyo wiilkii curadkiisa ahaa. Waxay kaloo ogaadeen in haddii cagta dhigaan meel ka mid ah ciidda Soomaalida deggan tahay, in nolosha lagu gubayo sidii ku dhacday ciidamadii ay wateen Pedro da Covilha iyo Vasco De Gama. Arrimahaan ayaa ciidankaas lexaadka badan ee masiixiga ah ku qasbay inay ka leexdaan magaalooyinka Soomaalida habeennimana ka degaan furdo yar oo ciidamada Soomaalida wali aysan gaarin kuna tiil Massawac (Eretariya). Ciidamadaan oo Masawac soo gaaray 1541 waxay hubka iyo saanadda ay wateen ku rarteen geel, dameero iyo baqallo waxayna isku dayeen inay badbaadiyaan boqorka cusub ee Xabashida oo markaas ku dhuumanayay buuro ku yaalo koofurta Xabashida. Ciidankaas masiixiinta waxay socon jireen habeenkii maalintiina buuraha iyo keynta ayay ku dhuuman jireen; arrintaasise kuma nabadgelin. Soomaalida markay ka war heshay imaanshaha ciidamada ajnabiga ah durbaba waxay bilaabeen inay kala xiraan ciidankaas iyo halka uu ku jiro boqorka cusub ee Xabashida. Galawdewos nin la yiraahdo oo uu dhalay Lebna Dengel ayaa boqornimadii loo caleemo saaray markii la dilay Boqorkii Lebna Dengal ahaa. Si labada ciidan ee masiixiinta ah aysan isku gaarin ayaa Soomaalida waxay weerartay ciidamadii Yurubka ahaa, dagaalkaas kediska ahna wuxuu naxdin iyo qalbi jab ukeenay calooshood u shaqaystayaashii loogu sheekeeyey in Afrikaan diliddiisa ka sahlan tahay cawl ugaarshashada. Iyagoon loo naxin ayaa ciidankaas xooggiisa lagu laayay meel u dhow Masawac; waxaana goobta dirqi uga baxsaday 460 Bortugiis ah. Waxaa la yiri qaar calooshood u shaqaystayaasha ahaa ayaa waxay u carareen maraakiibta ay ku yimaadeen dibna isaga soo laabtay dalkooda, iyagoo leh Yurub ayaa idinkaga roon meel caddaantooda la soo raadsanaayo oo fallaar mariidaysan murqaha looga taagayo.

Ciidankii ka cararay dagaalka Masawac waxaa ka mid ahaa ciidamadii Bortugiiska, Xabashadii ciidankaas jidka tusaysayna waxay la yaabeen tabar yarida ciidanka Yurub u soo direen inay boqorka Xabashida badbaadiyaan. Magac xumadaas si ay isaga dhaqaan ayaa abbaanduulka masiixiinta, D. Christovao, go'aan ku gaaray inuu weeraro ciidamada Soomaalida. D. Christovao saddex qayb ayuu ciidankiisa u qaybshay. Qaybta koowaad waxaa madax looga dhigay Captain Francisco Velho iyo Captain Manuel da Cunho. Qaybta labaad waxaa madax ka ahaa Captain Joao da Fonseca iyo Captain Francesco de Abreu oo loo malaynayo inuu asalkiisa Yahuudi ahaa. Qaybta saddexaad waxaa madax ka ahaa D. Christovao naftiisa.

Ciidamadaan masiixiinta ah waxay weerar ku qaadeen buuro ay deggan yihiin ciidamada Soomaalida, ha yeeshee way gali waayeen. Waxaa la yiri in ciidanka D. Christovao qaar ka mid ah habeennimo isku dayay inay koraan buuraha ay Soomaalidu deggan tahay waxaana ka raacay hoog iyo ba'. Waxaa la yiri intaysan buurtaba u soo dhawaanin oo aysan soo korin ayaa fallaarayda Soomaaliyeed fallaar oodda uga dhigay ciidamada Bortugiiska ahaa kana dileen ugu yaraan labo qofood (Catanhoso 1902, b.:34-35). Dagaalkaas oo dhawr bari socday Bortugiiska wuxuu ku candacooday inay ka dhinteen sideed qofood, afartanna dhaawac culus ka gaaray. Waxaase hubaal ah in geerida iyo dhaawaca gaalada gibilka cad intaas ka badnaa. Dadka ka dhintay ciidamada calooshood u shaqaysatada ee reer Yurub iyo Xabashida ma la qiyaasi karin, wuxuuna D. Christovao dhihi jiray: *"Ha tirinina bakhtiga Xabishida waayo Xabashka wuu ka qiimo yar yahay neef ida ah oo dhintay"*. Halkaanna waxaa kaaga cad in qofka Yurubka ah, haba kuu gargaaree, aysan marna ka maqnayn midabtakoornimda!

Ciidamada D. Christovao waxay ogaadeen in la daagaalanka Soomaalida ahayn cawl ugaarsi wuxuuna diray farriin uu ku leeyahay waa in lay soo gaarsiiyaa ciidan maadaama qaar badan oo ciidankiisa ah la dilay inta harsanna niyad jab xoog leh ku dhacday. Dawladda Bortugiiska si ay mar kale u fadeexoobin ayay ciidan kale oo deg deg ah ugu dirtay Masawac, ciidankaasna waxaa hoggaaminaayay Manuel de Vasconellos. Soomaalidu oo ogayd sababta ay u dhimanayaan marnaba kama naxin kumanaanta masiixiinta ee laga keenayo Yurub iyo adduunka kale. Ciidamada Manuel de Vasconellos waxay soo gaareen D. Christovao aakhirkii Febraayo 1542, Imaam Axmedse uma ogolaanin inay nabad ku nastaan. 25kii Maarso ee 1542dii ciidan ballaaran oo Imaam Axmed wato ayaa dhan kasta ka hareereeyay 12,000 nimood oo ka mid ah ciidamada masiixiinta (Bruce 1791, b.:205). Ciidamada Soomaalida waxay ahaayeen 300 illaa 500 oo fardoolay ah iyo dhowr kun oo fallaaray ah. Catanhoso oo ka sheekaynayo labada ciidan wuxuu yiri: *"Waxay (Soomaalidu) wateen saddex calan oo waaweyn, oo labo ka mid ah way cadaayeen oo bilal guduudan ayaa dhexda uga tiil, kan sadexaad wuu guduudnaa oo bil cad ayaa dhexda uga tiil. Way qeelinayaan waxayna garaacayeen durbaanno dhawaqooda dhegaha na tirayay, Xabishidii ciidamada Yurubka ah gacan siinaysayna way jareenayeen...Waxaad u maleenaysay inay dunida nagu soo duntay, waxaanna ahayn calooshood u shaqaysato iyo adoomo dabin ku jira"* (Catanhoso 1902, b.:45, 159).

Ciidamada Yurubka iyo huwantii la socday runta waxay arkayn markii afarta gees laga weeraray, khubarada masiixiga ahna kashi u waayeen inay baaruudda ku shubtaan madaafiicda ay wateen. Qofkii hal mitir madfaca u soo gaaraba wadnahaa fallaar looga dhufanayay. D. Christavoa wuxuu arkay raggiisa oo sidii ayax sun lagu buufiyay dhulka ugu hoobanaayo, oo mid rafta ama mid dhinta ama mid carara noqday. Aaway Luiz Rodriguez



de Cavalho. Aaway Lopo da Cunha. Aaway hebel iyo hebel. Waa meed. D. Christavoa wuu wareeray wuxuuna garanwaayay wuxuu sameeyo. D. Christavoa wuxuu arkay ciidamo Xabashi ah oo meel u dhow difaac ugu jiray oo sidii ariga loo biraynayo. Wuxuu u yeeray Captain Manuel da Cunha wuxuuna yiri: *"War aaggaa yaan la nooga soo galin Xabashidii xabaalbaa loo wadaaye"*. Ciidanka Captain Manuel da Cunha markay meeshii ay gaareen waxaa durbaba yalam ka siiyay soomajeestayaal Soomaali ah oo halkaa ugu gabanaa, ciidankii Bortagiiskana ku qasbay inay ka cararaan calanka wadankooda. Dagaalka wuxuu socday illaa gabal dhacii, ciidamadii Yurubkana waxay u mahdiyeen ilaahii qorraxda ka riday; oo mugdinimaday ka faa'iidaysteen si ay mid mid goobta dagaalka uga baxsadaan. Waxay isugu tageen buur dheer waxayna farriin kale u dirsadeen ciidamo masiixi ah oo si joogto ah uga soo dagayay Masawac. D. Christavoa iyo la taliyaashiisa waxay go'aansadeen inay buurtaas ka soo deggan, ayna iska ilaalshaan in dagaal gacanta la isugu tago ay kula kulmaan Soomaalida. Waxay go'aansadeen in iyagoo artilari isticmaalayo meel fog ka toogtaan Soomaalida.

Markay ciidamada calooshood u shaqaysatada ah ee masiixiinta sirtaas degsanayeen, Soomaalidana waxay ku jirtay shir la mid ah. Soomaalida waxay ogayd in waxa ugu qatarsan oo ay masiixiinta wataan uu yahay baaruudda lagu shubo madaafiicda, nin la yiraahdo Garaad Cumar ayaana soo jeediyay in la gubo baaruuddaas, hawshaasna isagaa loo xilsaaray. Koox Soomaali ah ayaa habeennimadii u dhuumatay meelaha ay gaaladu degnaayeen waxayna dab sureen dhammaan guryaha iyo baaruudda masiixiinta, waxaana meeshee ku dhintay ugu yaraan labo nin oo ka mid ah saraakiisha Bortugiiska in sideed ka badanna way ku dhaawacmeen (Correa 1858-64- vol IV, b.:369).

Soomaalida intaas uguma ekaynin ee waxay waabarkii dhan kasta uga duuleen masiixiinta waxaana laga dhigay wax la dilay iyo wax cararay. Gaaladii waa isgaran weysay, waxayna garan waayeen dhan ay aadeen. Afar iyo toban oo Bortugiis oo carartay waa la laayay, wuxuuna D. Christavoa garan waayay meel uu u baxo iyo meel uu joogo. Ciidamadii qaylodhaanta u dirsaday jidka ayaa loo fadhiyay, oo meeshii ay soo maraanba gam ayaa laga siinayay. Laba habeen ka dib markii ciidankiisii la baabi'iyay ayaa waxaa soo gaaray afartan illaa konton fardoolay iyo shan boqol oo askari oo bedela ciidankiis hore looga laayay. Waxay sheegeen inay intaan ka badnaayaan laakiin jidka lagu weeraray, qaar badanna looga dilay. D. Christavoa iyo ciidankii yaraa ee u yimid waxay sii naxeen markay arkeen inay Soomaalida isku urursanayso dooxada Afla' oo koofurta ka xigta Harada Ashange. Wuxuu D. Christavoa yiri waa in la weeraraa Soomaalida intaysan afarta gees ka go'doominin. Bortugiiska oo isticmaalayo qoryihii iyo baaruuddii ciidankii danbe keenay ayaa weerar

madiic ku soo qaaday dhukii ciidamada Soomaaliyeed ay deganaayeen; dabkaas xoogga badanse ma joojinin Soomaalida, balse waxay soo hor marisay qorshihii lagu dabar goyn lahaa ciidamada ajnabiga ah. Fardoolay Soomaaliyeed oo caraysanna cagta marsheen xariiqqa difaaca masiixiinta, ciidamadii Bortugiiskana waxaa lagu qasbay inay dib u gurtaan. D. Christavoa wuxuu ku amray raggiisa kuwa ugu qatarsanaa oo ay ka mid ahaayeen Manuel da Cunha, Joao da Fonseca iyo Francisco Velho inaysan dib u guran. Wadkoodow kula talinayee, D. Christavoa wuxuu labadiisa indhooda toos ugu jeeday Joao da Fonseca iyo Francisco Velho oo markii la qabtay sida ariga loo baraynayo. Dagaalkaas waxaa ka baxsaday 14 nimood oo Bortugiis, intii kale waa la dilay. D. Christavoa oo dhaawacan ayaa ka mid ahaa ragga baxsaday. Imaam Axmed wuxuu ciidankiisa faray in nolol ugu keenaan shaydaanka weyn ee la yiraahdo D. Christavoa.
Fardoolay Soomaali ah ayaa daba raacdaysay masiixiintii baxsaday, D. Christavoa iyo raggiisana iyagoo nool ayaa gacanta lagu soo dhigay. D. Christavoa waxaa la hor keenay Imaam Axmed oo hortiisa yaalaan meed ka badan labo boqol oo nimood oo Bortugiis ah, waxaana la weydiiyay sababta raggaan uu ugu qasbay dagaal aysan raali ka ahayn, una ogolaan waayay in nolol lagu qabto. Waxaa la saaray maxkamad waxayna ku xukuntay in xabsi lagu hayo maadaama uu ka mid yahay maxaabiista dagaalka. Waxaa kaloo D. Christavoa loo sheegay in markuu dhamaado

dagaalka loo celindoono wadankiisa. Waxaa la yiri, waxaad warqad u qortaa ciidamada masiixinta ee Yurub ka yimid kana soo degaya Masawac, waana inuu u sheegaa inay wadankooda isaga laabtaan, oo aysan galin dagaal aan xaq ahayn. D. Christavoa waxaa laga daaweeyay dhaawicii dagaalka ka gaaray, waxaana loo khadarinayay sida qof caadi ah. Wuxuuse khalad weyn suu biyay markuu raashin u sumeeyay nin ka mid ah saraakiisha ugu waaweynaa ee ciidanka Soomaalida, taasna waxay caro galisay Soomaalida. Waxaa Imaam Axmed laga codsaday in D. Christavoa maxkamad la saaro, haddii ay ku cadaato inuu ninkaas sumeeyayna la dilo. Sidii ayaana la yeelay (Catanhoso 1902, b.:172-174).
Xabashida siibana Boqorkooda Galawdewos markay maqleen jabka ku dhacay ciidamada masiixiga ah iyo diliddii la dilay D. Christavoa waxay qaadeen cabsi iyo argagax waxaana u cadaatay inay Yurub iyo ciidankooda wax u tareen. Xabashida waxay is tiri intaan dibed wax ka sugi lahayd aan isku tasho waxaana janaraaladii Xabashida bilaabeen inay ururshaan qof kasto oo Xabashi ah oo dagaali karo. Reer Yurub kuma ballan furin Xabashida waxaana la soo gaarsiiyay ciidamo iyo hub kuwii hore ka badan kana casriyaysan. Waxaa kaloo hubkaas la soo raaciyay khuburo ka yimid meelo kala duwan si loo sameeyo istraatijiyo lagu dilo Imaam Axmed. Boqorka Xabashida waxaa laga codsaday inuu diyaarso dad Xabasho ah oo gaashaan ama gabaad u noqda askarta Yurubka ah, Boqorkana dhexda uga jiro askarta Yurubka ah. Waxaa la dhisay istaraatijiyo la rabo in dhammaan safafka hore ee dagaalka lagu dhoobo dad Xabashi ah oo gaashaan ahaan fallaarta uga celsho askarta caddaanka ah, waayo ragga caddaanka ah iyo Soomaalida haday iska hor yimaadaan waxaa caddayd inay gaaladaas dabada jeedinayaan. Waxaa la yiri in Boqorka Xabashida konton nim oo caddaan ah oo ka baxsata ama ka dhimata ay uga qasaaro badnay kun nimood oo Xabashi ah oo hal mar la dilo (Catanhoso 1902, b.:77). Arrintaan ayaa keentay inuusan u beernaxin dadkiisa, uuna ogolaado qorshaha khubarada reer Yurub.
Hore ayaa loo yiri: *"Handad Soomaali halna loogama qaado"*; Imaam Axmed iyo Soomaalida dhegjalaq uma siin faqfaqda masiixiinta, balse 6dii Febraayo 1543kii, Soomaalida waxay dagaal ba'an ku soo qaaday 12,000 oo askarta reer Yurub iyo Xabashi ah. Waxaa ciidankaa ku jiray lix boqol oo fardoolay ah, inta kalana waxay ahaayeen fallaaray iyo ciidan cag. Soomaalida weerarkaas ka qayb qaadatay waxay ahaayeen 300 oo fardoolay ah iyo kun cagta ku socoto, waxaana abbaanduul u ahaa nin la yiraahdo Mire Samow (Miraizmao). Labada ciidan waxay ku kulmeen meel la yiraahdo Ogara waxaana ka dhacay dagaal gacmaha laysla gaaray. General Azmach Kefl oo ciidankaas abbaanduul u ahaa iyo rag badan oo masiin ah ayaa goobtaa lagu dilay meedkooduna lagu dul dhaanto tuntay.
Jajabkaan isdabajoogga ah waxay niyadda ka jabsheen Boqorka Xabashada iyo masiixiinta kale waxayna ka quusteen nolosha. Waxaa laga rajo dhigay 
in Soomaali guul laga soo hooyo, meel kasta oo Xabashi iyo Soomaali ku kulantana waxaa iska caado ahayd Xabashka inuu cararo. Catanhoso (1902) wuxuu sheegay in Xabashida ku sheekaysan jirtay: *"Xoogga askarta Imaam Axmed waa sida xoogga libaaxa, dafdaftoodana waa sida gorgorka... markay dagaalayaanna sida uulayda ayay cadowgooda carabka marshaan"*.
Markay usbuuc nasteen ayaa 17kii Febraayo ciidan xoog leh oo u wato imaam Axmed ka war heleen meel uu joogo Boqorka Xabashada, wuxuuna ciidankiisa u hor kacay dagaalkii dagaalada. Soomaalida waxay aragtay in boqorka Xabashada iyo khuburadiisa reer Yurub ay ku jiraan qalcad yar oo bartanka ugu taalay goobta dagaalka kuna wareegsan yihiin safaf ciiddaas ka badan oo Xabashi iyo calooshood u shaqaystayaal dibadda laga keenay. Si Boqorka loo gaaro waxaa qasab ahayd in badweyn dhiig ah marka hore la dhex dabaasho; Soomaali dagaal u soo seetaysatase ka noqod waa ku ceeb. Waa rag xididadooda ay marayaan dhiigga udgayo ee Soomaalinimada karfanna madaxa saartay. Imaam Axmed waa u cadaatay inay maanta arrintu dhii-dhii taagan tagay, wuxuuna Soomaalidii faray in afka tawxiidka ku qabsadaan. Imaam Axmed wuxuu kaloo yiri: *"War maanta mise asaa maqan mise anaa maqan mid saddexayso ma jirto"*. Soomaalidana meeshuu odaygooda ku dhaarto kama dhaqaaqi jirin.
Ciidamadii Soomaaliyeed waxay dhan kasta ka degeen meesha ay fadhiyeen

gaalada, waxaase la yaab noqotay in gaalada soo ridin qoryihii artileeriga ahaa ee lagu yaqaanay inay Soomaalida isaga waabiyaan. Arrintaasi dadka qaar way ku farxeen oo waxay is yiraahdeen baaruuddii ayaa gaaladii ka dhamaatay, qaar kalana waxay tuhmayeen in falkaasi xeel dagaal yahay. Meel lagu murmo lama jooginee waxay Soomaalida weerar ku qaaday safafkii hore ee gaalada. Safba safka ka danbeeyo waa ka sii adkaa, oo madax go'aya iyo seefo isku dhacaya mooyee wax kale lama arkaynin. Soomaalida oo dagaalka gacanta ah aanba lagu gaarin, ayaa meedka Xabashada iyo calooshood u shaqaystayaasha masiixiga mid mid uga tallaabsaday. Imaam Axmed iyo ciidankiisa xulka ahaana waxayba u dhaceen barta xoggaanka Masiixiga, waxayna laabta isasaareen gibilcadkii reer Yurub ee ilaalinayay Boqorka Xabashida. Ragga badan oo caddaan ah ayaa madaxa illaa feeraha seefta goysay waxaana ka mid ahaa Joao Correa, Francisco Vieyra, Francisco Fialho iyo Gallicians (Catanhoso 1902, b.:83).

Saraakiisha Bortugiiska waxay durba garteen in laga gacan sareeyo waxayna go'aansadeen inay xooggooda wada saaraan sidii loo heli lahaa xeel lagu dilo Imaan Axmed. Waxaa caddaatay in Imaam Axmed waxba looga qaadi karin waxaysa awoodeen in markuu soo dhawaado hal madfac si toos ah loogu shiisho. Si Soomaalida u ogaanin meesha madfaca uu yaalo, waxay Bortugiiska go'aansadeen in dagaalkaas madaafiic aysan isticmaalin; madafaca lagu shiishi rabo Imaam Axmedna caws lagu daboolo. Imaan Axmed oo faras weyn saaran ayaa ku soo dhexdhacay barta hoggaanka ee ciidamada reer Yurub, wuxuuna maalintaa rabay inuu nolol ku qabto Boqorka Xabashida si masiixi danbe dalkaas uusan u xukumin. Ciidamada reer Yurub waxay dhammaantood isku tilmaameen Imaam Axmed oo seef madaxa ugu garaacay masiixiin farastiisa hoos joogtay. Ninkii u xilsaarnaa inuu madfaca ku shiisho Imaam Axmed ayaa la faray in afka madfaca uu gelsho dhagax weyn, dhagaxaasna xabadka ugu dhufto Imaamka marka uu soo dhawaado. Imaam Axmed iyo Soomaalida oo aan madfacaas cawska ku daboolan arkayn ayaa dagaalkii sii kululeeyay soona gaaray waqtigii guusha ugu danbaysay gacanta lagu dhigi lahaa, nololna lagu qaban lahaa Boqorkii Xabashida ee Galawdewos. Imaam Axmed oo farastiisa ku gantamayo ayaa seef la dhexmary gaaladii boqorka difaacaysay, waxaase mar kaliya xabadka uga dhacay dhagax weyn. Imaam Axmed wuxuu xajistay faristiisa mana rabin inuu masiixiinta u gacan galo. Fardoolay Soomaali ah ayaa durba geesaha ka galay Imaam Axmed iyo farastiisa kana difaacay gibilcadkii ku soo yaacay. Dhaawaca Imaamka gaaray wuxuu ka caraysiiyay Soomaalidii, waxaana go'aan lagu gaaray in dab la suro xarunta oo idil iyo meeshii uu caws yaalo si mar kale aan loogu qatalmin. Dagaalkaan Soomaalida lagu qatalay waxaa loo baxshay Dagaalkii Waa-ina-dagay (Wainadege).

Markii dab la suray cawskii yaalay meeshii qalcada u ahayd Boqorka Xabashida oo cirka iyo dhulka qiiq iyo boor isqabsaday ayaa Boqorkii iyo in yar oo saraakiishiisa ah dhuunteen, kana carareen goobta dagaalka. Ciidamadii Yurubka oo nasiib u helin inay dhuuntaan waxaa la wada mariyay seef oo midna kama fiigin.. Ciidamada Soomaaliyeed oo ogaaday dhaawaca gaaray Imaam Axmed, caro awgeed ayay isku raacinayeen qofkii dhaawac oo ay arkeen, goobtii dagaalkana waxay isku bedeshay war dhiig. Walow dagaalkaas aan laga gaarin dantii laga lahaa, hadana wuxuu darsi lama ilaawaan ah u noqday Xabashida iyo dadkii gumaysigeeda iyo kufrinimadeeda ku gacan siinayay. Afar bari ka dib maalintii dhaawaca uu gaaray ayuu Imaam Axmed Ibraahim Guray (Jannadii Fardiwso Allaha Geeyee) ku dhexdhintay ciidankiisa iyo dadkiisa, si wanaagsanna loo aasay. Dagaalkii Xabashida iyo Soomaalida wuxuu sii kululaaday markuu Imaam Axmed la dilay, Soomaalidana waxay ballan ku qaaday inaysan dagaalka joojin illaa laga dilo Boqorka Xabashada, Imaam Axmedna loo aargudo. Xukunka waxaa Imaamka uga danbeeyay walaalkiisa Cabbaas oo dagaal ku qaaday Xabashida. Amiir Cabbaas wuxuu shahiiday 1551ama 1552 waxaana maamulka gacanta ku dhigay Amiir Nuur Mujaahid oo ahaa wiil uu abti u ahaa Imaam Axmed Gurey. Amiir Nuur wuxuu dib u dhisay ciidanka iyo maamulka Soomaalida, ka dibna dharaar cad Xabashida ka saaray gobolka Dawaara.

Boqorkii Xabashida iyo xulufadiisa reer Yurub markay arrintaas maqleen way ka naxeen waxayna garteen in Soomaalida dib ay isku habaysay, maalinba maalinta ka danbeeyana weerarkooda soo kordhayo. Waxaa la diyaarshay ciidan laxaad weyn oo uu horkacayay Boqorka Xabashida naftiisa; waxayna weerar ku qaadeen ciidan uu watay Imaam Nuur. Dagaalkaas wuxuu dhacay 23 Maarso, 1559, goobtaasna waxaa ciidankii Xabashida iyo xulufadii ka raacay hoog iyo ba'. Dadka maalintaas la dilay waxaa ka mid ahaa Galawdewos oo ahaa boqorkii Xabashida ee afaraad ee Soomaalidu disho. Soomaalidu iyagoo guul xambaarsan, una aarguday Imaam Axmed Ibraahim Guray ayay dib ugu soo laabteen magaalada Harar. Imaam Axmed Ibraahim, laguma xusuusto geesinimadiisa iyo Soomaalinimadiisa kaliya, ee wuxuu yahay astaan uu ku dayan karo qofkii rabo inuu aakhiro iyo adduunyo ku najaxo, dadkiisa iyo dalkiisana waxtaro. Imaam Axmed wuxuu ahaa nin cabsida Alle iyo xumo ka dhawrsiga u wehelisay dabeecad wanaag iyo hoggaamin wacan. Wuxuu ahaa nin aad u garaad badan (mental ability) oo leh xirfadda dadka oo idil lagu mideeyo (communication skills), ka dibna wanaagga loogu horkaco. Wuxuu lahaa awood dad la socod, dad aqool, talawadaag iyo hawgalin oo mar kasta u idmaysay inuu kasbo jaceelka dadka la socda iyo kuwa hawsha la wado. In kastoo da' yaraa hadana wuxuu ahaa nin bisil (mature) oo diinaqool ah isla markaasna ku dhiiran ka dhabaynta himiladiisa *(motivational strength)*. Arrimahaan ayaa lagu qadariyaa Imaam Axmed Ibraahim Guray.

# ERAYO-RAACA QORAALKA (Afterword)

Qoraalkaan oo muujinayo facdheerida taariikhda dadka Soomaaliyeed, wuxuu beeninaya aragti kasta oo dadka Soomaaliyeed u kala saarayso cunsur kala duwan oo meelo kala duwan ka yimid. Wuxuu tilmaamayaa in aragtida qabiiliga ah ee tol tolka ama reer reerka ay tahay caado jaahili ah, kana timid waxay dadka aaminsanaayeen Islaamka ka hor, kaasoo ahaa *"ayaamaha"*. Waayahaas waxaa wax kasto lagu qiimayn jiray sida uu yahay ayaankiisa, waxaana la dhihi jiray *"hebel wuu ayaan san yahay ama waa ayaan xun yahay"*. Soomaalidaba waatey tiraah: *"Ayaanba waa ayaankeed"*.

*"Ayaan"* waxay kaloo Soomaalida u taqaan *"maalinta"*; lahjadda dadka Boont oo ah lahjadii ay ka yimaadeen dhammaan lahjadaha Soomaaliyeed waxay maalinta lagu yiraahdaa *"abtere"* (Grottanelli wly, b:215) ama *"abtare"*. Maadaama *"ab"* uu yahay eray tilmaamayo gudbinta ayaanka lab; ku magacaabidda maalinta ee erayga *"abtere"*, wuxuu muujinyaa in maalmaha lagu kala saari jirey sida uu yahay ayaankooda *"ab"*. Tusaale, maalinta arbacada ah waxaa loo aqoon jiray *"ayaan geel"* ama *"abtargaal"*, maalintaasna geela lama garaaci jirin mana la safrin jirin. Sidoo kale, qof kasta ayaan ayuu lahaa, ayaankiisana waxaa la aaminsanaa inuu ku xiran yahay ayaamaha dadka uu ka soo askumay. Ugu badnaan magacada dadkaas muddo ka dib waa la hilmaamaa, magacda qaarkood ayaase xusuusta dadka ku haraa, wanaagga ama geesinimada ama farac badnida dadka magacdaas leh ay lahaayeen awgii. Waa kuwaa dadka la yiraahdo *"Hebel xnbaashaa laga taway"*; oo markuu dhintay ayaa kaalintiisa iyo hayay dadka u cadaataa Dadka sidaas ah magacdooda lama hilmaamo, jiil ka jiil ayuuna u gudbaa, oo waa la tirsadaa oo la magac qabsadaa!

Waxaa la aaminsanaa in dadka sidaas ah ayaankooda lab ee *"ab"* ka waxtar badnaa kan dadka kale maadaamo uu dhashay maalin *"ab tar"* ama *"ab ter"* wanaagsan. Tirsiga magacyada dadka *"ab tarka"* ama *"ab terka"* wanaagsan ayaa waxaa la yiraahdaa *"abter tirsi"* oo ah asalka erayga *"ab-tirsi"* oo ay Soomaalida maanta isticmaasho. Nin kastoo abtirsanayo wax kale sheegimaayee wuxuu tilmaamayaa abtarada (ama ayaamaha) dadka uu ka yimid. Qof walba wuxuu xusuustaa magacda ragga *"ab tarkooda"* la garanayo oo uu ka yimid ama uu la toloobay, magacdaasna midba midka uu ka shisheeyo wuu ka ayaan sii daciifsan yahay oo waxaa sahlan in la hilmaamo. Taa ayaa ugu wacan in ayaanka aabaha uu ka xoog bato kan abkowga, kan abkowgana uu ka xoog bato kan absaxanka, mid kaanna uu ka xoog bato kuwa ka sii shisheeya oo abisirka iyo absuulka ah. Tan ayaa keentay in qof qofka dhalasho soo xiga inuu ka jeclaysto dadka kale, dadka *"abtarkooda"* aan isku soo dhicinna waxba aysan wadaagin, waxna aysan ka dhaxaynin oo noqon kara sida labo qofood oo kala ajnabi ah, isku dad iyo dalba ha ahaadaanee. Dadka *"abtarooda"* isku soo dhaca waxay aaminsan yihiin inay isku dad yihiin, laakiin iyaguba markuu dhib dhaco, dhibkaas waa loo kala sokeeyaa oo Soomaalidu waxay tiraah: *"Xige waa laga xigaa waranka xanaftiisa"*.

Ku dhaqanka iyo aaminaadda 100% ee dadka aaminsan yihiin *"abtirsiga"* iyo *"abtarnimadiisa"* ayaa ah midda hor istaagtay walina hortaagan in Soomaalida samaysato maamul dadkoo dhan u siman yihiin oo kan abtarka dhow iyo kan abtarka fog isku si wax ugu qabta, isku xirana dadka isku abtarka ahayn. Xataa Islaamnimada kunka iyo washiiga sano dalka ka jirtay ma keenin inay Soomaalida ka tagto aaminaadda 100% ay aaminsan tahay waxtarka *"abtirsiiyaha"* ama *"abtarka"*. Aqoonyahan ama wadaad ama siyaasad kasto wuxuu wanaagsan yahay intuusan *"abtirsiinyaha"* ama *"abtarka"* dadka wax gaarsiinin.

Qaladka ugu weyn ee aqoonyahanada Soomaaliyeed iyo kuwa ajnabiga ahba samaynayaan waa iyagoo aaminsan in qabiilka Soomaaliya ka jira uu yahay hab dhaqan-dhaqaale oo la mid ah kuwa ka jira ummadaha Soomaalida la mid ah; si loo xaliyana loo baahan yahay dhismo maamullo federaal ah.Waxayse dadkaas moog yihiin in qabyaalada Soomaaliyeed lagu baabi'in karin nidaam federaal ah haddii marka hore aan dadka laga tirtirin caqiidada *"abtarka"* ah. Taa waxaa ka sii daran, in maamul noocaan ah uu keenayo dagaal soohdin iyo daaq oo aan hore uga jirin Soomaaliya; waayo Soomaalida waa reer guuraa soohdinna kalama laha, degaanno iyo ceelalbay kala leedahay mooyee. Sidaas darteed, xalka ma aha Soomaaliya oo la kala sii qaybqaybsha ee waa in la helaa maamul salkiisa uu yahay degmooyinka; kana madaxbanaan qabiil iyo qabiilquute. Si arrimahaas u dhaboobaan waxaa iga talo ah in waxyaalaha hoos ku qoran la sameeyo:



1- *Waa in aqoonyahanada iyo culumaa'uddiinka Soomaaliyeed si wadajir ah oo naxariis lahayn dagaal ugu qaadaan qabiilka iyo qabiilquutaha; dadkana af iyo qoraal ugu sheegaan in aaminaadda qabiilka iyo "abtarka" uu keeni karo Alle ku shirki iyo diin ka bax sida ku cad xadiith Saxiix ah oo uu Muslim wariyay, Nabigana (SCW) ku yiri: "Nagama mid aha qofkii dadka ugu yeera qabiil, nagama mid aha qofkii ku dagaala qabiil, managa mid aha qofkii ku hadla qabiil".*

Waa in dadka loo sheegaa in kaabo-qabiilada 90%, Qur'aandiidayaal iyo qarandumayaal oo Alle iyo Rasuulkii ka furtay yihiin; sababtaas awgeedna ku noqdeen kuwa dadka u horseeda baaba' adduun iyo baas aakhiro. Waxaan dadka Soomaaliyeed ku leeyahay:

Qabiil Qur'aankaan haka dooraninee.
Qabiix qaawan waayee ha qalabsaninee.
Qabiilquute qooqan ha qaaqaminee
Waa qaniin dhiigga quutee ha qaraabsaninee.
Waa qash laga quustee ha qiiqsaninee.
Waatuu qaabdareeyee ha qaalininee.
Qashiin uri weeyee, ha qiimayninee.
Qurmuun abkii weeye ha qaadaninee.
Qarandumis weeye qar dheer kaba tuur.
Qeelshaha qalalaasaa Allow qaxiyee.
Midkii qaybinaaya Allow qabri gee.
Qaadir Adi weeye dhulkay qurxiyee.
Qundhac yara weeyee qabaal biyo sii.
Qaalmaha xamaraysan ha qabatiimaanee.
Qajaar iyo qoomaal ha wada noqdo ee.
Qayuum Adi weeye qoomkay mid ka yeel.
Waa yara qalqaleenee, qarawga ka qaad.
Qareen qariibkood ah, Qur'aan ugu dhiib.
Qaruunbaan sugaynee quwaddeen midee
Qaxar baa qulqulshee, qubtaan kaba reeb (Aamiin).

Waxaan qof kasta oo Soomaali ah ku leeyahay in aaminaadda *"abtarka"* ku bedelaan aaminaadda dhabta ah ee Alle, aysanna dhagaysanin waxa dadka qabiilka aaminsan ay wadaan. Walaalayaal, Alle annaga ayuu Quraanka noo soo dejiyay, sidaas darteedna waa in diinkaas aan ku dhaqannaa, laguna sabraa dhibka nooga imaan kara dhanka cadowyada Alle iyo Shaydaamada. Alle wuxuu Suuratu Al-Insaan ku yiri: *"Ku samir xukunka Alle, hana maglin dambiile iyo gaalnimo badane warkiisa"*.

Khatarta gaalnimo ee qofka aaminsan qabyaaladda iyo cunsuriyadda waxaad ka arki kartaa canaanta Nabi Maxamed (SCW) u jeediyay Abuu Darr, mar uu saxaabigaan ugu yeeray Bilaal: *"Yaa Ibnu Aswadah"*; oo la macna ah *"Warkii hooyadiis madoobeedow"*. Hadalkaas markuu Nabiga (SCW) uu maqlay wuxuu yiri: *"Abuu Darrow, waxaad tahay nimay ku danbayso jaahilnimada"* oo uu Nabiga (SCW) ka waday *"waxaad tahay nimay ku jirto dhaqankii gaalnimada ahaa oo Islaamka ka horeeyay"*. Meesha nin asxaabi ah oo hadalkaas yar yiri sidaas loogu canaantay bal ka waran kaaboqabiilada iyo colaad-huriyayaasha Soomaaliyeed oo dadkii iyo dalkii qabiil qabiil u kala saaray oo waliba hub isugu dhiibay!

2. *Aqoonyahada iyo culumaa'uddiinka, iyagoo Alle iyo Rasuulkiisa (SCW) aaminsan, kaashanayana ummadaha adduunka ee xoriyadda iyo wanaagga Soomaaliya jecel, waa inay u istaagaan dalka iyo dadka, kana ceshaan hororka qabiilka oo maalinba cad kala baxayo..*

3- *Waa in aqoonyahanada iyo culumada ay si joogta ah u shiraan dhexdoodana ka saaraan aragtiyada seef laboodka ah oo iyaga iyo ummadaba dan u ahayn.* Waa inay labadaas kooxood ogaadaan in waxa kaliya ee Soomaalida isku xiri karo ay tahay diinta; Islaamkana yahay diinta kaliya ee u ballanqaadi karto horumar iyo barwaaqo deg deg ah loona siman yahay. Arrintaas aqoonyahanada qaar ayaa ka cabsadaa waxayse moog yihiin dawladaha ay ka shidaal qaataan ee Maraykanka, Yahuudda iyo Yurubka ah lagu aasaasay, laguna mideeyay, laguna horumarshay diin (Al-Farsy 1990, b.:22) oo waata iyo haatan lacagta adduunka ugu qaalsan ee doolarka Maraykan la yiraahdo

ugu taalo "IN GOD WE TRUST" (Alle Ayaan Talo-saaranay). Waxay u badan tahay in aqoonyahanada jeebka ku wato doolarka Maraykan haddii la weydiiyo in lacagta Soomaaliyeed lagu qoro *"Alle Ayaan Talosaaranay"* ay diidi lahaayeen iyagoo ka cabsanayo in cidaacadaha adduunka laga yiraahdo waxaad tihiin *"Fundãmentalist"*! Walaalayaal, mashaakilka ma aha diinta ee waa kala doorashada U ADEEGIDDA diinta ama ADEEGSIGA DIINTA. Wadamadaas aan soo sheegay, waxay doorteen in diimahooda u adeegaan, markaas ayayna midoobeen, midowgoodana wuxuu u keenay xasilooni iyo horumar.


4- *Waa in la dhisaa isbahaysi isku keena culumaa'uddiinka iyo aqoonyahanada oo dantiisuna tahay in Soomaaliya laga sameeyo dawlad dadka u mideysan yihiin, Alle uu ka mali yahay, ilaalisana is-afgamdka Soomaaliya la leedahay adduunka gaar ahaan dunida Islaamka ah iyo dawladaha nala deriska ah.* Isbahaysiga noocaan ah wuxuu ku imaam karaa iyadoo la qaato aragtida *"Afarta Qaaf"* oo hordhaca buugga aan ku soo sheegnay, lana dhiso guddiyo la yiraahdo *"Qaafyada"* kana kooban:

- Guddiga Qalinka oo qaabilsan dajinta siyaasadda guud ee waxbarashada iyo warfaafinta dalka; waxaana ka m adax noqon karaa qof aqoonyahan ah hase yeeshee aqoon fiican u leh dhaqanka iyo diinta dadka Soomaaliyeed.
- Guddiga Qur'aanka oo qaabilsan dajinta siyaasadda nabadgelyada gudaha, cadaaladda iyo dhaqaalaha dadka iyo dalka. Waa inuu ka madax noqdaa qof ahlu diin ah ama isla leh aqoonta diinta iyo midda qaanuunka.
- Guddiga Qiyaasta oo qaabilsan dajinta siyaasadda dibadda ee dalka iyo jaangooynta istaraatijiyada (birmadgeedeynta) goboleed ee dalka Soomaaliya. Waxaa ka madax noqon karaa qof aqoonyahan ah.
- Guddiga Qoys-dejinta oo qaabilsan siyaasadda dejinta iyo daryeelka nolosha iyo caafimaadka qoysaska Soomaaliyeed; taakuleynta dadka hoyga iyo heebta lahayn. Waxaa ka madax noqon karaa qof ahlu diin ah.

Waxaad aragtaa in madaxda gudiyadaan ay kala yihiin labo culumaa'uddiin iyo labo aqoonyahan, sidaas darteed ayaa waxaa la rajaynayaa in maamulkooda uu noqdo mid qunyar socod ah oo aan seef labood ahayn. Afartaan nimood waxaa lagu darayaa nin shanaad oo ka socdo beelaha baryarta ah (minority), si aysan u dhicin maahmaahda ah *"dad kaa badan iyo biyo kaa badan way ku hafiyaan"*, loona ilaalsho xuquuqda baryarta.

5- *Shanta qofood ee ka socoto Isbahaysiga aqoonyahanada iyo culumaa'uddiinta waa inay si toos ah ula shiman dadka Soomaaliyeed ee beelaha kala duwan deggan, u gudbiyaan go'aanada afarta Guddi-Qaaf, fikradda beelahana u soo gudbiyaan dhammaan ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaan xubnaha Isbahaysiga aqoonyahanada iyo culumaa'uddiinta Soomaaliyeed.* Si hawshaa u dhaqangasho waa in beel kasto laga dhisaa guddiyo beel oo la mid ah afarta Guddi Qaaf, dadka afartaas guddi ka madaxda ahna lagu daro nin shanaad ee ka socdo beesha ugu dad yar ee halkaas deggan. Isku darka xubnaha min shanta qofood ah ee beelaha ka socdo ayaa waxay ku biirayaan Golaha Isbahaysiga Aqoonyahanada iyo Culumaa'uddiinka, waxaana isku darkaas ka samaysmayaa Golaha Sare ee *"Golaha Sare ee Isbahaysiga Ummadda Soomaaliyeed"*. Isbahaysigaan waa inuu dhexdiisa ka doortaa qof ahlu diin ah oo madax u noqda, ninkaasna waxaa lagu magacaabyaa *"Adeegaha Ummadda"*.

6- *Adeegaha Ummadda iyo xubnaha Isbahaysiga Ummadda ayaa muddo gaaban dalka maamulayaa iyagoo muhimadda koowaad siinayo nabadgelyada iyo dhismaha dhaqaale xor ah.*




*Qaabdhiska maamul ka turjumayo diinta iyo dhaqanka Soomaaliyeed*



# TIXRAACA CARABIGA AH


*Al-Bidaayah wa An-Nihaayah*, waxaa qoray Ibnu Kathiir. Daabacaadda 1413 Hj. Qaahira.
*Al-Islam fi-Sumal*, waxaa qoray An-Najar Sheikh Abduraxmaan. 1973; Qaahira.
*Bugyatul al-Amal*, waxaa qoray Shariif Caydaruus, 1955 Muqdishow.
*Intishaar al-Islaam wa al-Curuubah fii maa yalii as-Saxraa al-Kubraa sharq al-Qaarah al-Ifriiqiyah wa qariibahaa*, waxaa qoray Hassan Ibrahim Hassan. Daabacaadda Qaahiraj1957.
*As-Suumaaliyah bi luqati Al-Qur'aan*, waxaa qoray Ibrahin Xirsi Maxammed. 1963, Muqdishu.
*As-Sumal: wa danan wa shacban*, waxaa qoray Muhammad Cabdulmuncim Yuunis,1966, Qaahirah.
*Ruuxu Ad-Diin Al-Islaamiyyi*, waxaa qoray Cafiif Cabdu-Al-Muftaax Dabbaarah 1982,. Bayruut.
*Tarikh as-Sumal* .waxaa qoray Muhammad Abdulfatah Hindi 1961, Cairo.


# TIXRAACA CARABIGA AHAYN


Abdalla O. M. (1988): *"Le lingue cuscitiche e il Somalo."* Ed. Italiano. Roma.
Ali A.H. (1977): *" The Arab factor in Somali history: the origins and the development of Arab enterprise and cultural influences in the Somali Peninsula."* Ph.D. Thesis. University of California, Los Angels.
Ahmed C. X. (1988): *"Sheekoxariirooyin Soomaaliyeed"*. Uppsala.
Baker E.C. (1949): *"Notes on the history of the Wasegeju"*. T.N.R., 27.
Biasutti R. (1905): *"Pastori, agricoltori e cacciatori nell'Africa orientale interna, a mezzo-giorno dell'Etiopia"*. In. BRSGI, Ser. IV. Roma
Blumner H. (1879): *"Technologie und terminologie der gewerbe und kunste bei Griechen und Romern"*. Leipzig.
Bretzl H. (1903): *"Botanische forschungen des Alexsanderzuges."* Leipzig.
Breasted J. H. (1905): *" A history of Egypt"*. New York.
Breasted J. H. (1906): *"Ancient records of Egypt: historical documents. Vol I"*. New York.
Bruce J. (1791): *"Voyages en Abyssinie."* Trad. par J.H. Castera, Paris.
Butzer K.W. (1984): *"Long-term Nile flood variation and political discontinuities in Pharaonic Egypt."* In: "From hunters to farmers: the causes and the consequences of food production in Africa"; Ed. by J. Desmond Clark and Steven A. Brandt.
Caniglia G. (1935): *"Genti di Somalia"*. Roma.
Carletti T. (1910): "Attraverso il Benadir". Viterba.
Cassanelli L. V. (1982): *"The shaping of Somali Society"*. Philadelphia.
Casson L. (1980): *"Periplus Maris Erythraei: three notes on the text."* Classical Quaterly 30: 495-497.
Casson L. (1984): *"Ancient trade and society."* Detroit.
Casson L. (1989): *"The Periplus Maris Erythraei"* Princton University Press.
Catanhoso M. (1902): *"The Portuguese expedition to Abyssinia in 1541-1543"*. Translated

and edited by R.S. Whiteway, 1967.
Cerulli E. (1934): *"La sconfita del Sultan Badlay"*. in Aethiopica II.
Cerulli E. (1957): *"Somalia, scritti vari editi e inediti"*. Rome.
Chihab-Eddin A.A. (1897): *"La conquète de l'Abyssine"*. Traduction Francaise et notes par Renè Basset. Paris.
Chittick N. (1976): *"An archeological reconnaissance in the Horn-the British-Somali Expedition, 1971"*. Azania 11; 117-134.
Clark J. D. Brandt S. A. (1984): *"From hunters to farmers: the causes and consequences of food production in Africa."* University of California Press.
Colucci M. (1924): *"Principio di diritto consuetudinario della Somalia Italiana meridionale"*. Firenze.
Correa Gaspar (1858-64): *"Lendas da India."* 4 vol. (Colleccao de Monumentos ineditos para a historia das conquistas dos Portuguezes em Africa.) Academia Real das Sciencias: Lisboa.
Cosmo (wml): *"Topographia christiana"*. In Migne (ed): Patrologide Cursus Completus. Series Graeca, LXXXVIII.
Crindle J.M. (1897): *"The Christian topography of Cosmos, an Egyptian Monk"*. London.
Cuoq J. (1981): *"L'Islam en Ethiopie - des origines ou XIV° siecle"*. Paris.
Davidson B. (1959): *"The lost cities of Africa."* Boston.
Davies N. de G. (1935): *"The Egyptian expedition of 1934-1935"*. Bulletin of the Metropolitan Museum of Arts, XXX, Section II, bogagga 46-49.
De Gray B. (1875): *"The commentaries of the Great Alfonso Dalboquerque"*. London.
dal Verme L. (1889): *"Paese dei Somali"*. Roma.
Desanges J. (1978): *"Recerche sur l'activité des Méditerranéen aus confins de l'Afrique."* Collection de l'Ecole Francaise de Rome 38, Rome.
Dhoorre A.S. (1994): *"Qaabdhiska bulshada Soomaaliyeed"*. AAYOIFIS tirsiga 5aad; bogagga 2-5. Napoli.
Doresse J. (1971): *"Histoire sommaire de la Corne Orientale de l'Afrique"*. Paris.
Dracopoli I.N. (1914): *"Throughout the Jubaland to the Lorian Swamp"*. London.
Dulac E. (lama yaqaan goortii la qoray): *"The kingdom of the pearls"* London.
Ehret C. (1971): *" Southern Nilotic history."* Evanston: Northwestern University Press.
Ehret C. (1974b): *" Ethiopians and East Africans: The problem of contacts."* Nairobi: East African Publishing House.
Ehret C. (1976): *"Linguistic evidence and its correlation with archaeology."* World Archaeology 8: 5-18.
Ehret C. (1979): *"On the antiquity of agriculture in Ethiopia."* Jour. Afr. Hist. 20: 161-177.
Elliot F. (1913): *"Jubaland and its inhabitants"*. In GI, XYI.
Elliot J.A. (1925-1926): *"A visit to the Bajun Islands"*. J.A.S., XXV.
Faure H. (1966): *"Evolution de grand lacs Saharien à l'Holocene"*. Quaternarie 8: 167-175.
Ferrand G. (1903): *"Le Comalis"*. Paris.
Filesi T. (1961): *"I viaggi dei Cinesi in Africa nel medioeve"*. Rome.
Fischer (1878) *"Die sprachen in sudlichen Gala-land"*. In: ZfE, X.
Fleming H.C. (1969): *"Asa and Aramanik; cushitic hunters in Masailand."* Ethnology 8:.1-36.



Fleming H.C. (1974): *"Omotic as an Afroasiatin family."* Studies of African Linguistics, Supp. 5:.81-94.
Graziosi P. (1940): *"L'età della pietra in Somalia"*. Firenze.
Greenberg J. (1963a): *"The languages of Africa."* The Hague.
Vicinanza G. (1910): *"Somalia Italiana"*. Napoli.
Yaasiin C. K. (1976): *"Qaamuuska Af-Soomaaliga"*. Mogadishu, Somalia.
Zoli C. (1927): *"Oltre Giuba"*. Rome.
Zorc R.D., Madina M. O., Virginia L. (1991): *"Somali-English dictionary"*. Dunwoody Press.
Grottanelli V.L. (1955): *"Pescatori dell'Oceano Indiano"*. Roma.
Grottanelli V.L. (wly): *"Gerarchie etniche e conflitto culturale: saggi di etnologia nordest-africana"*. Milano.
Hamy (1882): *"Quelques observations sur l'anthropologie de Comalis"*. Bull. Soc. Anthr. Paris.
Heine B. (1978): *"The Sam languages. A history of Rendille, Boni and Somali."* Afroasiatic Linguistics 6; pp. 25-115.
Hourani G. F. (1951): *"Arab-seafaring: In the Indian Ocean in Ancient and the Early Medieval Times."* Princeton University Press.
Huntingford G.W.B. (1989): *"The historical geography of Ethiopia: from the first century A.D. to 1704"*. Edited by Pankhurst R. The Oxford University Press.
Junker H.(1921): *"The first appearance of the negroes in history."* Journal of Egyptian Archeology 7: 121-132.
Kirk J.W.C. (1909): *"The Yibirs and the Midgans of Somaliland, their traditons and dialects"*. Journal African Society, XIII.
Kobischanov Y. M. (1965): *"On the problem of sea voyages of ancient Africans in the Indian Ocean"*. Journal of African History VI-2:134-141.
Kunz G.F., Stevenson G.H. (1908): *"The book of the pearl"*. London.
Lee R.B. (1968): *"What the hunters do for a living."* in Lee and De Vore, 1968: 30-48.
Lewis H.S. (1966): *"The origin of the Galla and Somali"*. Jour. Afr. History 1:27-46.
Lewis I.M. (1961): *"The so-called Galla graves in northern Somaliland"*. Man **61**, 132; pp. 103-106.
Lewis I.M. (1966):*"Islam in tropical Africa"*. London.
Lewis I.M. (1969): *"From nomadism to cultivation: the expansion of political solidarity in southern Somalia"*. In: Man in Africa, (Ed.) M. Douglas and Ph. M. Kaberry, pp. 59-77.
Mohamed A. M. (1992): *"Histoire des croyances en Somalie"*. Paris.
Marzuq A. (1962): *"Adhwa cala s'-Sumàl"*. Cairo.
Maspero G. (1879): *"De quelques navigations des E'gyptiens sur les cotes de la mer E'rythrèe"*. Revue Historique, V.
Maspero G. (1909): *"New lights on ancient Egypt"* translated from French by Elizabeth Lee, New York.
Massey G. (1987): *"Subsistance and change: lessons of agropastoralism in Somalia"*. London.
Max W. M. (1910): *"Egyptological researches, results of a journey in 1906,"*. vol.II. Washington.
Mohamed Y.H. (1993): *"Somalia: le radice del futuro"*. Torino.

Monneret U.D.V. (1938): *"Note sulle influenze asiatiche nell'Africa orientale"*. R.S.O. XVII. Roma.
Munson P.J. (1977): *"Africa's pre-historic past."* In P.M. martin & P. O'Meara eds., Africa; pp. 62-82.
Murdock G. P. (1959):*"Africa: Its peoples and their culture history"*. NewYork.
Naville Edouard (1894): *"The temple of Deir el-Bahari."* London.
Nello P. (1937): *"Le popolazioni indigene della Somalia Italiana"*. Bologna.
Paribeni R. (1908): *"Ricerche sul luogo dell'antica Adulis-Colonia Eritrea"*. In: Monumenti antiche pubblicati per la cura della Reale Accademia dei Lincei. Milano.
Pankhurst S. (1951): *"Ex-Italian Somaliland"*. London.
Paulitscke Ph. (1893-1896): *"Ethnographie nord-ost Africa"*. Berlin.
Petrucci P. (1993): *"Mogadiscio"*. Roma.
Rapolla A, Cella F, Dorre A.S. (1995): *"Gravity study of the crustal structures of Somalia along ILP International Lithosphere Program geotransects"*. Jour. Afr. Earth Sci. vol. 20/ 3-4:263-274. Pergamon.
Révoil G. (1888): *"La vallée du Darror"*. Paris.
Roncière C. de la (1924-25): *"La dècouverte de l'Afrique au moyen àge, II"*.
Rossini C. (1928): *"Storia d'Etiopia: parte prima delle origini all'avvento della Dinastia Salomonide."* Bergamo.
Robecchi L.B. (1903): *"Nel paese degli aromi"*. Milano.
Sergi G. (1897): *"Africa: antropologia della stirpe camitica"*. Torino.
Schlee G. (1989): *"Identities on the move: clanship and pastarolism in northern Somalia"*. Newyorka.
Schoff W. (1912): *"The Periplus of the Erythrean Sea"*.

Silberbauer G.B. (1965): *"Bushman survey Report."* Gaberones.
Sommavilla E., Sacdiya Cariif, Hussen Salad, Ibrahin Mahamed Farah (1993): *"Neotectonic and geomorphological events in central Somalia"*. Wuxuu ku qoran yahay buugga la yiraahdo: - Geology and mineral resources of Somalia and surrounding regions. Relaz. e Monogr. 113:389-396.
Stigand C.H. (1913): *"The land of Zinji"*. London.
Street F.A., Grove A.T. (1976): *"Environmental and climatic implications of the Late Quaternary lake-level fluctuations in Africa"* . Nature 261: 361-390.
Sylvain L. (1937): *"Memorial of Sylvain Lévi"*. Paris.
Trimingham J.S. (1873): *"Islam in Ethiopia"*. Barnes and Noble Inc.
Turton E.R. (1975): *"Bantu, Galla and Somali migrations in the Horn of Afrika: a reassessment of the Jubba- Tana area"*. Jour. Afr. History XVI, 4:519-537.
Wainright G.A. (1947): *"Early foreign trade in East Africa."* Man XLVII, 161, November: 143-148.
Watt G. (1889): *"A dictionary of the economic products of India."* Calcutta.
Werner A. (1915): *"The Bantu coastal tribes of the Eastern African Protectorate"*. J.R.A.I., XLV.
Wisner B. (1994): *"Jilaal, Gu, Hagaa and Deer: Living with the Somali land and living well"*. In: 'The Somali challenge from catastrophe to renewal?' Edited by Ahmed I. Samatar.

# *KA FAALAYNTA QORAHA BUGGA*

*Ustaad Cabdulqaadir Salaad Dhoorre Barre wuxuu ku dhashay Ceelbuur 1958, wuxuuna dugsiga Qur'aanka ka dhigtay Ceeldheer, halkaas ayuuna ka bilaabay waxbarashada dugsiga hoose. Wuxuu waxbarashadiisa dugsiga dhexe iyo sare ku qaatay Jowhar, wuxuuna 1977 gacanta ku dhigay Shahaadada Dugiga Sare. Shaqo qaran ka dib, wuxuu 1979 galay Kuliyadda Jiyoolojiya ee Jaamacadda Soomaaliyeed, wuxuuna kuliyaddaas ka qalinjabiyay 1982. Sanadkii ku xigay wuxuu Bare Kaaliye ka noqday Kuliyadda Jiyoolojiyada wuxuuna kaaliya ka ahaa maadada Jiyoofiisikada iyo Toobogaraafiyada. 1983dii wuxuu shahaado ka qaatay daruus ay diyaarisay shirkadda baarista betroolka ee la yiraahdo GEOSOURCE. Wuxuu sanadihii 1983-84 Bare waqti-dhiman (part time) ka ahaa dugsiyada Sare ee Muqdishow (Hawlwadaag iyo 21ka Oktoobar) isla markaasna ahaa biyogoobaha (water researcher) Hay'adda Talyaaniga ee Gargaarka Qaxootiga Soomaaliyeed ee deggan Belet Weyn, Jalalaqsi iyo Qoryoolay. 1984kii ayuu ku guulaystay deeq waxbarasho ee wadanka Talyaaniga ah, wuxuuna 1984-1986 qatay taqasuska bare-jaamacadeed loogu diyaarinayay. 1985dii wuxuu shahaado ka qaatay daruus ay diyaarisay shirkadda baarista betroolka ee la yiraahdo EXXON. Wuxuu 1987dii noqday Bare Jaamacadeed. Aakhirkii 1986dii wuxuu ku guulaystay imtixaanadka loo galo waxbarashada shahaadada Ph.D.; wuxuuna shahaadadaas qaatay 1989. Wuxuu ku taqasusay maadada Fiisikiska Dhulka. Isla sanadkaa wuxuu ku gudbay imtixaanka xirfadda Jiyoolojiyada wuxuuna ka mid noqday Golaha Xirfadlayaasha ee Jiyoolojiinta Talyaaniga. Waxaa intaa u dheeraa isagoo cilmibaaris joogta ah ka waday Soomaaliya, Masar iyo Talyaaniga, natiijooyinka cilmibaaristaasna lagu soo bandhigay shir-cilmiyeedyo lagu qabtay Soomaaliya iyo dibaddeedaba. Qoraalada jiyoofiisikada ah ee uu qoray waxay kor u dhaafeen 38 qoraal, waxaana lagu daabacay wargeys cilmiyeedyada kala ah Afr. Earth Sci., Boll. Geof. Teor. e Appl., Atti dei Conveg. Gruppo Naz.Italiana Geof. Terra Solida, Atti Conf. Sci. Annuale Dip. di Geof. di Napoli, Quaderno Geol. Somala, Cilmi iyo Farsamo oo ahaa joornaalka cilmiga ah oo ay soo saari jirtay Kulliyadda Injineeriya ee Jaamacadda Soomaaliyeed. Haatan wuxuu cilmibaare xirfadle idman ah ka yahay Waaxda Jiyoofiisikada iyo Baraakiinta ee Jaamacadda Naapoli. Maadaama hiwaayadda (hobby) qoraha ay tahay arrimaha bulshada ayuu ardaynimadiisa iyo ka dibba ka mid ahaa qorayaasha joornaalo ay ka mid yihiin Aayo-ifis oo ay soo saari jireen dhalinta Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed iyo joornaal Maandeeq la yiraahdo oo 1990kii ka soo bixi jiray magaalada Toronto (Canada). Wuxuu 1991, Talyaaniga ka aasaasay Xiriirka Adeegga Bulshada ee Koytada Soomaaliyeed (Associazione Servizi Sociali per gli Immigrati Somali), xiriirkaan oo dib u soo nooleeyay soo bixidda wargayskii Aayo-ifis. 1988 illaa iyo haatan wuxuu baaris joogta ah ku hayaa taariikhda Soomaaliyeed iyo helista sababta ay u saldhigi la' yihiin maamulada Soomaaliyeed. 1996dii wuxun soo saaray kitaab diini ah ee la yiraahdo "Axkaamta Salaadda iyo Soonka" laguna dhaabacay Talyaaniga.*